
QEYBTA 1AAD



Maxammed Cabdi Faarax (Bin Faarax)

GEESIYAAL

TAARIIKHDA GALAY

GEESIYAAL TAARIIKHDA GALAY

GEESIYAAL TAARIIKHDA GALAY

Muxammad Cabdi Farax (Bin Faarax)

RAAD PRESS
Muqdisho

DAABACAADDII KOOWAAD 2023
Muqdisho, Soomaaliya.

Xuquuqda © Muxammad Cabdi Farax (Bin Faarax) 2023
Xuquuqda oo dhan way dhowran tahay. Buuggan ama qayb ka mid ah lama daabici karo, lamana minguurin karo la'aanta oggolaansho qoran oo laga helo qoraaga ama faafiyaha.

Hagaajinta dhigaalka: *Yoonis Baarri*
Nashqadaynta jaldiga: *Muxammad Cabdi Farax (Bin Faarax)*

—

Raad Press

Raad Press, Muqdisho, Soomaaliya
raadpress1@gmail.com
+252 61 5241028 — +252 61 9555001
@Raadpress

Taariikhda waxa ay dadka bartaa casharro, waxa ayna ka dhigtaa kuwo aad u baraarugsan oo awood u leh in ay qaaddaan tallaabooyinka ku habboon

—

TUSMO

TUSMO VII
MAHAD CELIN IX
HORDHAC 1
TAARIIKHDA ISLAAMKA 3
ABUU BAKAR SIDIIQ 7
CUMAR BINU KHADAAB 14
ABUU AYUUB AL-ANSAARI 22
MUQIIRA BINU SHUCBA 28
CUMAR BINU CABDI CASIIS 34
HAARUUN AL-RASHIID 40
CUMEYR BINU WAHAB 47
CIKRIMA BINU ABII JAHAL 57
CUSMAAN BINU ERTUGRUL 63
KHAALID BINU WALIID 69
MUXAMMAD AL-FAATIX 78
SULEYMAAN AL-QAANUUNI 84
YUUSUF BINU TAASHAFIIN 93
MAXAMUUD BINU SUBAKTIKIIN 101
SAYFU DIIN QUDUS 107
DAARIQ BINU ZIYAAD 115
SACIID BINU CAAMIR AL-JUMAXI 122

ORKHAN BINU CUSMAAN 130
SALAAXUDIIN AL-AYUUBI.....136
ALPA ARSALAAN 144
BARAKA KHAN 149
Al-XAAJIB AL-MANSUUR 154
ABUU YUUSUF YACQUUB AL-MANSUUR.....160
SAFIYA BINTU CABDI MUDHALIB 167
UMMU CAMAARAH 173
RAMLA BINTU ABII SUFYAAN 178
ASMAA BINTU ABII BAKAR SIDIIQ 184
GUNAANAD.....188

***

MAHAD CELIN

Marka ugu horeyso waxaan u mahadcelinayaa Allaah swt oo iwaafajiyay inaan wax ka qoro qaar kamid ah geesiyada islaamka, isaga ayaan gargaar weydiisanayaa jidka toosan in uu hagana ka dalbanayaa.

Marka labaad waxaan u mahadcelinayaa waalidkeyga kuwas oo korinteyda iyo barbaarrinteyda kusoo daalay, qaasatan ayeeyo Saynab Faarax.

Marka xigta waxaan u mahadcelinayaa cid walba oo garab igu siisay qorista buuggaan qaasatan macalinkeyga aan jeclahay Ustaad Xasan Muxammad Sabriye iyo dhammaan asxaabteyda kale.

Ugu danbeyna waxaan u mahadcelinayaa akhristaha qiimaha badan ee buuggan waqtigiisa ku bixiyay si uu wax uun uga faaiido.

Qoraaga: Maxammed Cabdi Faarax (Bin Faarax)

***

HORDHAC

Taariikhda islaamka waxa ay kamid tahay taariikhaha ugu wanaagsan adduunka sidaas ay tahay innaga ayaa ah ummad aan ka warheynin taariikhda aabbeyaalkooda lagasoo billaabo Maalinkii Nabiga scw lasoo diray Taariikhdeenna qurxoon marba marka ka dambeyso waxaa kusoo kordhayay rag mujaahidiin ah iyo dumar diintooda ay waxwalba kala muhiimsan tahay, kuwaas oo waqtigooda iyo hantidooda ku bixiyay sidii ay u difaaci lahaayeen diintaan ay ka dhaxleen Nabigooda Muxammad scw Sababtaas darteed ayey cadoowga islaamka waqti iyo juhdi ugu bixiyaan sidii ay jiilka soo koraayo uga indhatiri lahaayeen taariikhda ummadooda, intaas oo kaliya kuma eka fikirka reer galbeedka ee xitaa waxa ay ina bareen taariikhdooda fulaynimada ku dhisan iyo qaar kamid ah taariikhda geesiyadeenna oo ay ku ciyaareen iyaga oo rabo in ay nooga dhigaan dad xun in ay ahaayeen.

Taariikhda waa muraayadda wixii tagay, Ummadd aan taariikhdeeda war u heynina mustaqbalka waxba kama qaban karto, Taariikhda aynu ka hadleyno ugama hadleyno kaliya inaan waqtiga isku dhaafinno ama aan carruurteenna ku seexinno ee waxaa la inooga baahan yahay in aynu ku beddalno waaqica aynu ku nool nahay,

Aabayaasheennii hore waxaa soo maray caqabado badan oo lamid ah amaba ka badan kuwa ina heysta maanta Anagana waxaa la inaga rabaa in aynu ka barano qaabka ay u xaliyeen dhibaatadaas.

Taariikhdeenna waxaa ka buuxo rag hadafkooda ugu horreeyo uu ahaa sidii ay diinta islaamka adduunka oo dhan ku gaarsiin lahaayeen, innaguna waxa aynu ka faa'iidi karnaa aqrina taariikhdooda Geesinnimo, Caqiido adag iyo kalsoonni nafeed, Waxaanna ku talin lahaa in carruurta yaryar la baro taariikhda si ay u ogaadan qiimaha ay leeyihiin hadafkooduna uu u dhaafo in ay iska noolaadaan oo kaliya.

Taariikhda oo la daraaseeyo waxa ay leedahay saameyn aad u balaaran, Taasna waxaa cadeyn buuxdo kaaga filan qur'aanka kariimka marka loo qeybiyo Saddex qeybood, hal qeyb oo kamid ah waxa ay ka hadashaa taariikhda ummadihii innaga horeeyay, hadafka laga leeyahayna wuxuu yahay in ay tusaale iyo cibro qaadasho u noqoto Banii aadamka, si aysan ugu dhicin wixii ku dhacay dadkii ka horreeyay iyaga, dadka wanaagsana waxaa taariikhdooda looga waramaa si loogu daydo waxna looga barto.

TAARIIKHDA ISLAAMKA

Ummad walba waxa ay leedahay Taariikh hore oo ay ku faanto sharafna ay ku dareento carruuteedana ay barto, mararka qaar waxaan maqalnaa taariikhda roomaanka ama yuunaanka ama giriiga, taariikh macnaheeda oo koobban waa dhacdooyin iyo mawaaqif dhacay xilliyo hore, marka la fiirinaayo dhacdooyinka caalamka soo maray iyo taariikhaha ummadaha waxaa la arki karaa taariikhda islaamka in ay tahay taariikhda ugu wanaagsan ee caalamka soo marta hordhaca buuggana waxaan kuugu soo koobi donna qaar kamid ah taariikhda ummadeenna muslimka ah, taariikhdeenna qiimaha badan waxa ay soo martay heerar kala duwan waxaana kamid ah:-

SOO DEGIDDA WAXYIGA:

Taariikhdeenna islaamka waxa ay soo bilaabatay markii uu waxyiga ku biloowday Nabi Muxammad scw sidoo kalena uu bashariyada caalamka ugu yeeray dacwada islaamka, markaas oo uu dacwadiisa ka bilaabay ehelkiisa kuwa ugu dhawaa kadibne reer makka iyo dadkii udhawaa, ilaa heer ay ugu danbeyn dacwadaasi noqotay mid caalami ah markaas oo uu Nabiga scw farriimo kala duwan u diray boqoraddii ka talinaayay adduunka ee xilligaas.

XILLIGII KHULAFAA'U RAASHIDIINKA:

Nabiga scw markii uu dhintay waxaa bilawday xilli cusub oo kamid taariikhda islaamka waana xilligii khulafada waxa ayna kasoo bilaabatay Abuu Bakar, Abuu Bakar wuxuu waqtigiisa ku qaatay ilaalinta iyo adkeynta tiirarka dowladdii uu Nabiga scw ummadiisa kaga tagay wuxuu la dagaalamay dhamaan dadkii diinta ka ridoobay geerida Nabiga kadib, Abuu Bakar isagana markii uu dhintay waxaa maamulka islaamka qabtay Cumar Binu Khadaab oo isagana ku caan baxay Cadaaladda, markii uu Cumar dhintay maamulka waxaa uga danbeeyay Cusmaan Binu Cafaan iyo Cali Binu Abii Daalib kadibna Xasan Binu Cali Binu Abii Daalib oo hoggaanka islaamka haayay kaliya lix bilood kadibna u tanaasulay Mucaawiya Binu Abii Sufyaan, halkaasna waxaa ka biloowday Xilligii Khilaafada Umawiyiinta.

KHILAAFADA UMAWIYIINTA:

Markii uu dhamaaday Xilligii Khulaa'u Raashidiinka waxaa maamulka islaamka u wareegay qaab boqortooyo ahaan ah oo wuxuu gacanta u galay qoyska reer Banii Umaya, iyaguna islaamka lama fariisan oo waxa ay gaarsiiyeen meelo uusan horay ugaarin islaamka waxey furteen dhulka Andalus waxey dhiseen maamul islaam oo awood badan waxa ay horumariyeen Jihaadka iyo furashooyinka islaamka, Reer banii Umaya kadib maamulka islaamka waxaa qabtay Qoys kale oo isla Qureysh ah waana Cabaasiyiinta.

KHILAAFADA CABAASIYIINTA:

Markii uu dhamaaday maamulkii umawiyiin hoggaanka ummada islaamka waxaa qabtay Reer Banii Cabaas iyaguna islaamka lama aysan fariisan oo waxa ay ka qeyb qaateen Faafinta Dacwada islaamka iyo sidii loo gudan lahaa amaanada uu Nabiga scw kaga tagay Ummadiisa waxa ay horumariyeen Cilmiga heer Caasimadooda oo Baqdaad aheyd ay noqotay magaalo cilmiga nuucyadiisa kala duwan lagasoo doonto, dowladda Cabaasiyiinta xilliyadeedii dambe markii ay daciiftay waxaa ka faracmay dowladdo badan oo islaami ah sida: dowladda Saljuuqiyiinta, dowladda Ayuubiyiinta, dowladda Sinkiyiinta, dowladda mamaaliikta iyo kuwo badan laakiin dhamaantood waxa ay hoos imaan jireen Khilaafada Cabaasiyiinta.

Khilaafada Cusmaaniyiinta:

Waa mid kamid ah dowladdihii ugu awoodda badnaa ee islaamka soo maraa sidoo kalena waxa ay aheyd dowladdii ugu cimriga dheereyd dhamaan dowladdihii islaamka adduunkana waxa ay tustay qoraxda islaamka haddii ay meel ka dhacdo in ay dhinac kale kasoo baxdo iyaguna waxa ay horumariyeen Cilmiga iyo jihaadka sidoo kalena waxa ay ilaaliyeen sharafta ummada muslimka ah.

ABUU BAKAR SIDIIQ

Qof walba oo aan diinta ugu yeero wuu shakinaayay
Marka laga reebo Abuubakar

- Nabiga scw

**

Khaliifkii ugu horreeyay ee islaamka ahna mid kamid ah tobanka shaqsi ee jannada loogu bishaareeyay, sidoo kalena ahaa wasiirka koowaad ee Nabi Muxammad scw. Intaas oo dhan waxaa u dheer in uu ahaa saaxiibka Nabi Muxammad ee wehelka u ahaa markii uu magaalada Madiina u hijroonaayay, culimada Ahlu sunnaha waxa ay ku sheegaan in uu yahay qofka ugu kheyrka badan bashariyadda oo idil, marka laga reebo Nabiyada iyo rususha, magaciisu waa Cabdullaahi Binu Abii Quxaafa, Nabiga ayaa u bixiyay Abuu Bakar Sidiiq runtiisa badan awgeed.

Markii uu dhintay Nabiga scw Saxaabada ayaa waxa ay isku khilaafeen geerida Nabiga qaar Waxa ay dhaheen Nabiga ayaa dhintay halka qaar kale ay dhaheen Nabiga ma dhimman, markii uu yimid Abuubakar arrinkana loo sheegay ayuu Nabiga qolka ugu galay kadib ayuu marada wajigiisa ka qaaday markaas ayuu dhunkaday,

sidoo kale dadka ayuu u xaqiijiyay geerida Nabiga scw isaga oo u khudbeynaayo ayuu dhahay *Qofkii Muxammad caabudi jiray ha ogaado Muxammad wuu dhintay, qofkiise Alle caabudi jiray Alle waa mid nool oo aan dhimmaneyn* Kadib markii uu Abuubakar muslimiinta qalbiga u dajiyay ayey muslimiinta waxa ay ka tashteen cida hoggaamin doonto iyaga maadama uu Nabiga scw dhintay, Abuubakar ayaa markaas loo doortay in uu buuxiyo booskaas, Abuubakar markii loo doortay hoggaaminta muslimiinta ayuu jeediyay Khudbad cajiib ah daacadnimo iyo tawaaducna ay ka muuqato waxa uu yiri sidaan:

Dadoow...! Madaxdiina ayaa la iga dhigay mana idinka kheyr badni, haddii aan wax wanaajiyo igu kaalmeeya haddii aan xumeeyana itoosiya, runtu waa amaanno, beentuna waa qiyaano, kiina tabarta darran agteyda xoog ayuu ku leeyahay ilaa aan xaqiisa ugasoo dhiciyo, kiina awoodda lehna agteyda daciif ayuu ka yahay ilaa aan ka qaado xaqqa lagu leeyahay hadduu Alle idmo, qofna kama taggo Jihaadka ilaa haddii uu ka tagana Alle waxa uu ku salidaa dulli, igu adeeca wixii aan Alle iyo Rasuulkiisa ku adeeco, haddii aan Alle caasiyana wax adeecid ah idinkuma lihi….

Geerida Nabiga kadib islaamka waxaa ku dhacday musiibo weyn oo haddii uusan Abuubakar caqligiisa ku xalin laheyn ay diinta daciifin laheyd, Wadajirka muslimiintana kala geyn laheyd, markii uu dhintay Suubanaha N.N.K.H waxaa diinta ka laabtay Carabtii

ugu badneyd kaliya waxa diinta kusoo haray Reer Makka oo Qureysh ah iyo reer Daa'if iyo reer Madiina iyo qaar kale oo yar, xilligaasna dadka waxa ay u qeybsameen laba qeybood.

1. Mid diinta dhan ka baxay sida reer Banii Qaddafaan iyo reer Banii Xaniifa
2. Mid diiday in uu Sakada bixiyo sida reer Banii Tamiim iyo reer Banii Hawsaan

Abuubakar markaas wuxuu go'aansaday in uu la dagaalamo dhammaantood, Intana waxaan kuugu sheegi doonna waxyar oo kamid ah dagaaladaas uu Abuubakar la galay dadkaas diinta ka laabtay.

DULEYXA BINU KHUWEYLID

Reer Banii Qaddafaan iyo ninkii ay rumeeyeen oo ah Duleyxa Binu khuweylid ninkani wuxuu ahaa nin wax sheeg sheego (Faalaloow) wuxuu sheegtay Nabinnimo intii uu noolaa Suubanaha N.N.K.H markaas waxaa raacay oo rumeeyay dadka maangaabka ah, Nabiga ayaa markaas wuxuu udiray Saxaabi kamid ah saxaabadiisa oo lagu magacaabo Diraar Binu Aswar si uu uga taqaluso ninkaas, Diraar markii uu tagay meesha uu joogay ninkaas uuna damcay in uu qorshihiisa fuliyo ayaa

waxaa dhintay Nabiga scw, Sidaas ayaa arrinkiisa looga mashquulay xilligaas.

Abuubakar ayaa waqti kadib wuxuu udiray Khaalid Binu Waliid si uu usoo edbiyo Duleyxa iyo dadka la socday, ciidanka Khaalid waxaa kamid ahaa nin lagu magacaabay Cadiy Binu Xaatim, Cadiy wuxuu Khaalid ka dalbaday in uusan ku dagdagin dagaalka, Khaalidna waa uu ka aqbalay Kadib Cadiy Qabiilkiisa oo ninkaan la safnaa ayuu diinta ugu yeeray iyagana ugu danbeyn waxa ay kusoo biireen ciidanka muslimiinta, markale Cadiy wuxuu diinta ugu yeeray dadkii la socday Duleyxa iyagana sidoo kale wey ajiibeen, Kadibna waxaa is gacan qaaday dadkii gaalnimada ku adkeystay ee la safnaa Duleyxa iyo ciidanka muslimiinta, Duleyxa wuxuu arkay in uusan awood u laheyn ciidanka Khaalid Markaas ayuu meesha ka cararay isaga iyo xaaskiisa, ciidankiisana sidaas ayaa lagu jabiyay, Duleyxa Binu khuweylid ugu danbeyna diinta ayuu kusoo laabtay.

ARRINKA REER BANII TAMIIM

Mid kamid ah go'aammada ugu adag ee uu qaatay Abuubakar, Nabiga scw ayaa Reer Banii Tamiim u sameeyay lix hoggaamiye waxaana kamid ahaa nin lagu magacaabay Maalik Binu Nuweyrah, markii uu Nabiga scw dhintay labo kamid ah hoggaamiyeyaashaas waxa

ay Sakada u keenneen Abuubakar halka kuwii kalena ay diideen bixinta sakada Maalik Binu Nuweyrah waxa uu kamid ahaa raggii diiday bixinta Sakada, Reer Banii Tamiim iyaga oo sidaas u jahwareersan ayaa waxaa usoo baxday Naag lagu magacaabi jiray Sajaax waxa ay kasoo jeeday Reer Banii Taqlib waxa ay eheed Kirishtaan markii uu Nabiga scw dhintayna waxa ay sheegatay Nabinnimo waxaa raacay Carabta kuwooda ugu liito, waxa ay damacday in ay ku duusho Abuubakar Markaasna waxaa jidka u galay oo la dagaalamay qaar kamid ah Muslimiintii reer Banii Tamiin raggii ay wadatay qaarna wey qafaasheen qaarna wey dileen iyadiina dhanka Yamaamah ayey u carartay, Reer Banii Tamiim diinta ayey kusoo laabteen marka laga reebo Maalik Binu Nuweyrah, weyna ka qoomameeyeen arrinkii ay sameeyeen, Khaalid Binu Waliid ayaa loo diray Maalik iyo kooxdiisa iyagana markii ay maqleen in uu Khaalid usoo socdo ayey kala yaaceen, Khaalid Binu Waliid Rc ayaa amray in dhammaantood lasoo qabto, qaar badan oo iyaga kamid ahaa waa lasoo qabtay dadka lasoo qabtayna waxaa ku jiray Maalik Binu Nuweyrah, Khaalid ayaa amray in la dilo kadibna Khaalid wuxuu guursaday Xaaskii Maalik.

Cumar Binu Khadaab Rc ayaa ka xanaaqay falka uu sameeyay Khaalid Sababtoo ah dad badan ayaa isku waafaqay Maalik in uu diinta kusoo laabtay, Abuubakar ayuu ka codsaday in la qisaaso Khaalid, Abuubakar ayaa

yiri markaas waxbuu Fasirtay wuuna qalday Carrabkaadana ka leexi Khaalid Anigu ma daminaayo Seef uu Alle dul dhigay gaalada.

MUSAYLAMA IYO TOLKIISA

Nabiga scw intii uu noolaa wafdiyadii u yimid waxaa kamid ahaa Reer Banii Xaniifa waxaana la socday nin lagu magacaabi jiray Musaylama, Reer Banii Xaniifa markii ay yimaadeen magaalada Madiina Musaylama waxaa uu lahaa Haddii uu madax iga dhigaayo geeridiisa kadib waan raacayaa markii uu dhintay Nabiga scw Musaylama wuxuu sheegtay Nabinnimo, Abuubakar ayaa wuxuu u diray Khaalid Binu Waliid wuxuuna ku xoojiyay ciidan xooggan oo ka koobnaa Muhaajiriin iyo Ansaar, Musaylama ciidankiisa waxa ay gaarayeen 40kun, markii uu ogaaday in uu Khaalid usoo socdo ayaa isaga iyo Tolkiisa iyo intii raacsaneydba waxa ay dhufeys ka dhigteen meel lagu magacaabo Yamaamah.

Ciidanka Muslimiinta iyo kuwii Musaylama ayaa waxa ay dagaalameen dagaal xooggan heer Murtadiintii diinta ka baxay la jabiyay jab xooggan, markale ayey dhufeys ka dhigteen Beer uu lahaa Musaylama hoosna ayey ka xirteen, Muslimiinta oo wax ay sameyaan raadinaayo ayuu Al-Baraa Binu Maalik oo ahaa geesi

Ansaari ah wuxuu yiri igu dhax tuura Meesha kadib ayaa lagu dhax tuuray wuxuuna awood u yeeshay in uu muslimiinta ka furo Albaabkii dhufeyska ahaa, muslimiinta ayaa gudaha u galay beerta markale haddane waxaa dhacay dagaal xooggan ilaa la dilay Musaylama sidaasna waxaa ku jabay Reer Banii Xaniifa iyo Kooxdii uu watay Musaylama oo qafaal iyo dil leyskugu daray.

Mid kamid ah Culimada ayaa waxa uu yiri Illaahey wuxuu diintiisa ku ilaaliyay labo nin, Abuubakar oo maalinkii ridada ahaa iyo Axmed Binu Xanbal oo fitnadii qur'aanka lala rabay Alle uga difaacay

Alle haka raali noqdo geesiyadaas dhiigooda u huray islaamka.

CUMAR BINU KHADAAB

Ilaahayoow islaamka ku Xoojo laba Cumar midkood

- Nabiga scw

**

Amiirul Mu'miniin Cumar Binu Khadaab Rc Waa magaca Ruum iyo Faaris u diiday hurdada Waa Libaaxa kaliya ee uu Sheydaanka xitaa ka cabsan jiray, Cumar Binu Khadaab marka aynu ka hadleyno kama hadleyno oo kaliya qof iska caadi ah, ee waxaan ka hadleynaa Caddaaladdii oo Banii aadam laga dhigay, Cumar Binu Khadaab waa ninka uu Nabiga scw ku magacaabay Al-Faaruuq oo macnaheedu tahay kii Xaqqa iyo baadilka kala saaraayay, dhab ahaanna sidaas waa uu ahaa.

Cumar Binu Khadaab Rc waxa uu kamid yahay geesiyada islaamka, waana qofka labaad ee ugu Fadliga badan Banii aadamka oo dhan marka laga reebo Abuubabar iyo Rususha iyo Nabiyada, wuxuu ahaa nin

adag, Xaqqana ku adag, Fikir toosan, Aragti fog, Caddaalada iyo garsoorkana ka bartay Jaamacada Nabi Muxammad scw, wuxuu hurdada uga tagi jiray si uu uga war qabo bulshada uu madaxda u yahay, Xalaal miirad ah adduunka iyo dhaldhalaalkiisana ka Saahiday oo ka jeestay.

Islaamida Cumar waxa ay aheyd furasho, hijradiisana waxa ay aheyd guul, madaxtinimadiisana waxa ay aheyd naxariis.

Markii uu dhintay Abuubakar ayuu qabtay xilka Muslimiinta isagoon raali ka aheyn Sababtoo ah waxaa u dardaarmay Abuubakar, Isla markaas Cumar waxa uu isugu yeeray Wiilashiisa waxa uuna ku yiri Ma taqaanaan waxaan waqtigaan idinkugu wacay, Waxaa laga yaaba qaarkiin in ay is dhahaayan Aabaheen ayaa Amiirka Muslimiinta noqday, annaguna waxa aan nahay Carruurtiisa, qofkiin haddii uu u baxo dantiisa waxa uu umaleyn doonna in ay dadka isaga udhimmanayaan, haddaba ogaada aabihiin in uu raaci jiray Geelkii Khadaab, Xaabada iyo qoryahana waxa uu usoo aruurin jiray Habaryaryaalkiisa, Markaas ayey siin jireen xoogga Timir ama Sabiib ah, Reer Banii Cadiy wax la sheego kama aysan aheyn Qureysh dhexdeeda, Alle ayaa nagu kor yeelay islaamka, dadkuna adinka ayey idin fiirsanayaan sida ay shimbirtu u fiirsato hilibka, haddii aad ku dhacdaan iyaguna waa ay ku dhacayaan, haddii

aad ka joogsataanna iyaguna waa ay ka joogsannayaan, haddii aan dadka ka reebo arrin, adinka noqda kuwa ugu horeeya ee ka joogsada, wallaahi haddii la ii keenno mid idinka mid ah oo sameyay wax aan dadka ka reebay, ciqaabta ayaan ulaba jibaarayaa, heer midkiina uu yiraahdo fiicnaan laheydaa in uusan aabaheen noqon hoggaamiyaha Muslimiinta.

Qisooyinka cajiibka ah dhifkana ay tahay in laga helo hoggaamiye sidaas oo kale ah waxaa kamid ah Cumar Binu Khadaab Rc ayaa maalin minbarka Masaajidka koray wuxuu amray inaan meherka qaali laga dhigin, waxa uuna u sheegay meherka in qaali laga dhigto haddii ay wanaag ahaan laheyd in uu Nabiga scw sameyn lahaa, isla markaas haweeney reer Qureysh ah ayaa istaagtay markaas ayey si geesinnimo leh u dhahday, Cumaroow Alle ayaa ina siiyay, ee ma adiga ayaa inoo diidayo...! Soo Alle ma dhihin.

﴿وَإِنْ أَرَدتُّمُ اسْتِبْدَالَ زَوْجٍ مَّكَانَ زَوْجٍ وَآتَيْتُمْ إِحْدَاهُنَّ قِنطَارًا فَلَا تَأْخُذُوا مِنْهُ شَيْئًا ۚ أَتَأْخُذُونَهُ بُهْتَانًا وَإِثْمًا مُّبِينًا﴾

Haddaad Doontaan inaad ku Baddashaan Haweenay mid kale idinkoo Siiyey Meher (Badan) ha ka Qaadanina Xaggiisa waxba, Ma waxaad Qaadanaysaan Been iyo Danbi Cad.

— *Suurat Nisaa, aayada 20*

Cumar ayaa markaas dhahay Qof walba waa uu ka cilmi badan yahay Cumar... Qof walba waa uu ka cilmi badan yahay Cumar… Markaas ayuu yiri Waxaan idinka reebay inaad meherka qaali ka dhigtaan, nin walbaa xoolihiisa haku sameysto wixii la wanaagsan kadibna wuxuu yiri Haweeney wax saxday iyo nin wax qalday, Illaahayoow danbi dhaaf, dadka oo dhan wey ka cilmi badan yihiin Cumar….

Cumar Binu Khadaab Rc Xilligiisa waxaa dhacay dagaalo waaweyn oo lala galay Ruum iyo Faaris oo markaasi ahaa dowladdaha ugu awoodda badan Adduunka, waxaa la furtay Masar, Ciraaq, Khuraasan, Adarbiijaan, Dimishiq, Ximis iyo Baytul Maqdis iyo Meelo badan.

Ciraaq waxaa ka dhacay dagaal taariikhdiisa lagu xusay boggaga taariikhda laguna qoray Dhiigga shuhadada iyo biyo dahab ah, dagaalkaasi waxaa cashir lama ilooban ah loogu dhigay gaaladii Furus, Tanina waa Qiso kale oo aad u cajiib ah, markii ay Muslimiinta Furteen magaalada Tustur[1] waxa ay gacanta ku dhigeen

[1]) waa magaalo ku taalo waqooyiga Iiran

hoggaamiyaheeda, markaas ayey u direen Cumar hormosaankii hoggaaminyay dagaalka, markii la yimid Madiina hormosaan iyo Ciidankii la socday ayaa dadka waxa ay weydiiyeen Cumar meesha uu jiro isla markaasna waxaa loo sheegay in uu Masaajidka aaday, kadib Masaajidka ayey yimadeen haddana wey ka waayeen, kadibna wey iskasoo laabteen iyaga oo jidka socdo ayey arkeen carruur meel ku ciyaareyso waxa ayna weydiiyeen Cumar halkaa uu joogo, carruurtii ayaa usheegay in uu Masaajidka jiifo, Masaajidka markii ay galeen ayey arkeen Cumar oo hurdo, Hormuzaan ayaa yiri Aaway Cumar? waxaa lagu yiri waa ka halkaas hurda wuxuu yiri Aaway ilaaladiisa? waxaa lagu yiri malahan wax ilaalo ah, markaas ayuu yiri Wuxuu mudanyahay in uu noqdo Nabi waxaa lagu yiri wuxuu sameeya Nabiyada waxa ay sameeyaan, isla markaas dadkii ayaa meesha kusoo batay buuqna waa ay noqotay Cumar ayaa soo kacay markaas, hormuzaan ayuu fiiriyay, wuxuuna yiri Hormuzaan.!! dadkii ayaa dhahay haa Cumar iyo hormuzaan ayaa is fiiriyay, hormuzaan waxa uu ku labisnaa dhar xariir iyo dahab ka sameysan, Cumar ayaa yiri *Alle ayaan ka magan galayaa Naarta, isaga ayaana kaalmo weydiisanayaa, Alle ayaa mahadleh oo ninkaan iyo dadkiisaba duleeyay, dhallinyarada muslimiintoow ku dhaganaada diintaan, raacana Sunnada Nabigiinna, Aduunyaduna yeysan idin Kadin* Kadib dadkii wafdiga ahaa ayaa Cumar ku yiri Kani waa Boqorka Ahwaas ee

la hadal, Cumar ayaa yiri lama hadlaayo ilaa uu iskasoo badello labiskaan uu xiran yahay, sidii ayaa la sameyay oo waxaa loogu labisay dhar caadi ah, isaga iyo Cumar ayaa wadda hadlay mrkaas, Hormuzaan ayaa yiri Intaanu Alle garabkiinna soo istaagin waan idinka guuleysan jirnay Cumar ayaa markaas yiri waxaad nooga guuleysan jirteen kala taggeenna, iyo wadajirka aad wadajirteen ugu danbeyn Hormuzaan wuu islaamay Madiina ayuuna iska dagay.

FURASHADII MADAA'IN

Mid kamid ah furashooyinka cajiibka ah ay muslimiinta ka sameeyeen dhulka Faaris xilligii Cumar Binu Khadaab (Bisha safar sannadkii 16aad ee Hijri) Madaa'in[1] waxa ay aheyd Caasimada Boqortooyada Faaris , muslimiinta markii ay galeen Caasimadaan ayna hortooda ka arkeen keydkii Kisraa (Boqorka Faaris) ayey xasuusteen balan qaad uu Nabiga scw u sameeyay

[1]) Waa caasimadii Boqortooyada Faaris, waxayna ahayd goobtii ay ku noolaayeen boqorradii reer Sasaniyaanka, Carabtuna waxay u bixiyeen Al-Madaain, maxaa yeelay waxay ahayd toddoba magaalo, 25 mayl ayaa u dhaxaysa iyada iyo Baqdaad.

Kaas oo ahaa sidaan *Koox muslimiinta kamid ah ayaa furan doonno guriga cad, guriga kisraaa* Markaas ayuu qalbigooda dagay hankoodana sare ayuu noqday, waxa ay aamisanaayeen guusha Alle sababtoo ah waxa ay kalsoonni ku qabeen diintooda marwalba oo ay helaan jaanis ay Alle ugu dhawaan karaan wey u tartami jireen, nin lagu magacaabo Diraar Binu Khadaab ayaa yiri markaas ALLAAHU AKBAR, kani waa guriga cad ee Kisraa tana waa balan qaadkii Alle, Rasuulkiisana run ayuu sheegay markaas ayey Muslimiinta si wada jir ah u Takbiirsadeen, hoggaamiyaha ciidanka muslimiinta Sacad Binu Abii waqaas ayaa markaas go'doomiyay Magaalada, Fardooleydana wuxuu u diray Tuulooyinka dariska la ah caasimada in ay soo furtaan, markii go'doonka uu ku adkaaday Madaxdii Madaa'in haba ugu horeeyo Yasdajir ninka lagu magacaabi jiray oo ahaa Boqorka ayaa waxa ay go'aansadeen in ay isaga cararaan Magaalada maadama aysan wax awood ah u laheyn ciidanka muslimiinta, guutadii ugu horeysay ee gasha Madaa'in waxaa hoggaaminayay nin lagu magacaabi jiray Al-Qacqaac Binu Camar oo kamid ahaa hoggaamiyeyaasha Muslimiinta, Muslimiintana dhulkaas waxa ay ka heleen qaniimo aad u badan taasna Alle ayaa ku mahadsan.

Amiirul Mu'miniin Cumar Binu Khadaab Rc wuxuu ahaa hoggaamiye aan calooshiisa ka hormarin bulshada uu madaxda u yahay, hoggaamiye u dhafraayo sidii uu

uga warheyn lahaa bulshadiisa kuwa taagta daran iyo kuwa kaleba.

Ilaa iyo intee ayaan u baahan nahay hoggaamiye yiraahdo haddii aan Maalinkii seexdo waxaan ka baqayaa inaan dayaco xaqqa Muslimiinta, haddii aan habeenkii seexdana waxaan dayacayaa xaqqa Rabbigey.

Run ayuu sheegay Amiirul Mu'miniin Cumar Binu Khadaab Rc markii uu lahaa Waxaan nahay umad uu Alle ku sharfay islaamka, haddii aan Sharafta ka raadino cid aan Alle aheyna, Alle ayaa ina duleeyo.

ABUU AYUUB AL-ANSAARI

Salaan iga gaarsii ciidanka muslimiinta.

- Abuu Ayuub Al-Ansaari

**

Saxaabigaan qiimaha badan magaciisa waa Khaalid Binu Zayd Binu Kuleyb, Umaleyn maayo in uu jiro qof muslim ah oo aan aqoon cida uu yahay saxaabigaan, Rabbiga cirka iyo dhulka Abuuray ayaa u doortay in uu marti qaado Nabigiisa Muxammad markii uu usoo hijrooday Magaalada Madiina.

Nabiga scw markii uu yimid mgaalada Madiina, Reer Madiina waxa ay kusoo dhaweeyeen si galgaceyl iyo xiiso leh, sidoo kale qalbigooda ayey u fureen, Waddooyinka ayey u istaageen, hasha Nabiga ayey ku dhagaayeen, iyadoo mid walbaa uu rabay in uu marti qaado Suubanaha scw mid walba oo iyaga kamid ah wuxuu lahaa Rasuulka Alloow agteena joog Nabigana

wuxuu lahaa Ka leexda hasha wey amran tahayee hashaas sidii ay u socotay ayaa waxa ay hor fariisatay Guriga Abuu Ayuub Al-Ansaari.

Guriga Abuu Ayuub wuxuu ka koobnaa labo dabaq, Dabaqa kore ayuu Nabiga scw u banneeyay, balse Nabiga ayaa doortay dabaqa hoose in uu daggo, Abuu Ayuub isagana amarka Nabiga ayuu qaatay oo meeshii uu jeclaa ayuu dajiyay, Markii gabalku dhacay Abuu Ayuub iyo xaaskiisana ay qolka isugu tageen ayuu Abuu Ayuub xaaskiisa ku yiri Maxaan sameynay, rasuulka miyaa hoosteenna seexannaayo inagana kor miyaan seexanneynaa, rasuulka Alle korkiisa miyaan ku soconeynaa isaga iyo waxyigana ma kala dhax galeynaa, haddaba waan halaagsanay iyaga oo sidaas u wareersan waxa ay sameyaana aqoon la' ayuu waaga ku baryay Abuu Ayuub ayaa markaas ku yiri Nabiga Aniga iyo Ummu Ayuub wax hurda ah nagama soo dhicin xalay Nabiga ayaa weydiiyay sababta, wuxuu u sheegay in ay ka walwalsan yihiin in ay seexdaan guri uu hoostiisa jiifo Suubanaha N.N.K.H Nabiga ayaa markaas qalbiga u dajiyay.

Abuu Ayuub amarka Nabiga ayuu qaatay wuxuu yiri isaga oo ka sheekeynaayo arrinkaas Habeen habeennada kamid ah ayaa waxaa naga jabay weel ay biyo ku jireen, Annaga oo jiifno Rasuulka Alle dushiisa, biyihii ayaa dareeray, waxaan ka cabsanay Rasuulka Alle in ay ku

dhibcaan, Aniga iyo Ummu Ayuub waxaan qaadanay go' aan kaligiis ka heysanay dhar, waxaan bilaawnay inaan habeenkii oo dhan ku qalajino biyaha si aysan Rasuulka Alle u gaarrin dhibic biyo ah isaga oo jiifo hoosteenna hurdadana uusan uga kicin Nabiga scw wuxuu guriga Abuu Ayuub joogay wax ku dhaw Todobo bilood, markii uu dhisay Masaajidka ayuu ka guuray guriga Abuu Ayuub Rc.

Habeen habeennada kamid ah ayaa waxa soo baxay Abuubakar Sidiiq Rc kadib ayuu Masaajidka ku arkay Cumar, markaas ayuu Cumar yiri maxaa lasoo baxday Abuu Bakar isagana wuxuu usheegay in uu baahi darteed lasoo baxay Cumar ayaa yiri Anigaba baahi ayaa isoo saartay iyaga oo sidaas ah ayaa waxaa usoo baxay Nabiga wuxuuna ku yiri Maxaa idin soo saaray xilligaan waxa ay dhaheen Baahi ayaa ina soo saartay Nabiga scw wuxuu yiri Allaha nafteyda ay gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartayee anigaba taas ayaan lasoo baxay ee isoo raaca.

Nabiga iyo labadiisa saaxiib waxa ay tageen guriga Abuu Ayuub Rc, Abuu Ayuubna Maalin walba Nabiga ayuu u dhigi jiray cunto si marka uu yimaado uu u cuno, haddii uu imaan waayana qoyskiisa ayuu siin jiray, Xaaskii ayuu Ayuub ayaa Albaabka ka furtay Nabiga ayaa markaas yiri aaway Abuu Ayuub, Asagana markii

uu maqlay codka Nabiga ayuu si farxad leh usoo dhaweeyay Nabiga iyo saaxiibadiis.

Abuu Ayuub neef ayuu gawracay xaaskiisana Waxa uu ku yiri cajiinka inooo diyaari, Nabiga iyo labadiisa Saaxiib ayuu soo hor dhigay wax ay cunnaan, markii ay dhargeen ayuu Nabiga scw isagoo ilmeynayo yiri Allaha nafteyda ay gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartayee nimcadaan waa tan qiyaamaha leys weydiin doonno.

Nolosha cajiib ah ee Saxaabigaan iyo jaceylka uu Jihaadka u qabay, waxaan kuu sheegi doonna qiso kale, qisadaan waxa ay mudan tahay in lagu aqriyo Maqaayaddaha iyo goobaha ay isugu yimaadaan odayaasha, kuwaas oo waqtigooda ku dhammeeyo Maqaayaddaha iyo Maalayacniga, iyaga oo markaas iska suganaayo inta uu uga imaannayo Malaku Mowtka, Kama sheekeyneyno wiil yar oo 20 jir ah amase 30 jir ama xitaa oday 60ka gaaray ee waxaan ka sheekeyneyna 80 jir odaynimada dhaafay, sidaas ay tahayna wali usoo taagan jihaadka iyo in uu Alle dartii u dhinto.

Xilligii uu amiirka ahaa Mucaawiya Binu Abii Sufyaan Rc ayaa waxaa Jihaad u baxay ciidan uu hoggaaminnaayay Yasiid Binu Mucaawiya, kaas oo ay ku jireen Saxaabo badan oo ay kamid ahaayeen Xuseen Binu Cali, Cabdullaahi Binu Cumar, Cabdullaahi Binu Cabaas, Cabdullaahi Binu Zubeyr iyo Cabdullaahi

Camar Binu Caas, waxa ayna duulaan ku ahaayeen Caasimada Boqortooyada Ruum ee Qustandiiniya.

Abuu Ayuub Al-Ansaari Rc isaga oo 80 jir ah ayuu iska diiday in uu ka haro jihaadkaas, libaaxyadii muslimiinta ee u oomanaa dhiigga gaalada Ruum markii ay gaareen Caasimadii Reer Yurub, Ciidankii Muslimiinta iyo kuwa gaaladana ay is horjoogaan, ayey halmar arkeen nin wajiga u duuban yahay faraskiisa cadna kula duulayo hawada sida gorgor ugaarsi ku jiro dhanka cadoowgana sida duufaanta ugu socdo, Gaaladii Ruum ee awalba meesha leyskugu keennay waxa ay difaacayaanna aanan aqoon ayaa waxa ay ku wareeren waxa ay indhahoodu arkaan run iyo riyo waxa ay tahay, ciidankii muslimiintana idhaha ayey la raaceen ninkaan aan marnaba dhimashada ka baqeynin sida tooska ahna uu waajahaayo geerida, waaba Abuu Ayuub Al-Ansaari Rc oo 80ka kor udhaafay isaga oo la moodo wiil yar oo 20 ah kaas oo hadda soo koraayo.

Abuu Ayuub wuxuu qaatay seeftiisa si uu uga shaqeeyo gaalada ay Ruum isku keensatay, ilaa uu markii dambe uu dareemay in ay dhimashadiisa soo dhawaatay, markaas ayuu hoggaamiyihii muslimiinta ka dalbaday in uu salaan ka gaarsiiyo ciidanka muslimiinta oo ayna ku aasaan meel u dhaw Qustandiiniya.

Hoggaamiyaha muslimiinta Yaziid Binu Mucaawiya isagana waxa uu fuliyay codsiga saxaabigaas qiimaha badan waxa ayna ku aaseen Qustandiiniya.

Waan kaa qaadnay salaanta Saaxiibkii rasuulkoow, Alle hakaa raali noqdo, Hana kuu marti qaado sida aad rasuulkiisa u marti qaaday iyo si ka wanaagsanba.

MUQIIRA BINU SHUCBA

Jannada ayuu galayaa kii inaga mid ah ee la dilo,
kii idin kamid ah ee la dilana naarta ayuu galayaa

- Muqiira Binu Shucbah

**

Rag saxaraha ku safray iyaga oo halkii Ratiba Saddex qof iskula saaran hadafkooduna uu yahay in ay dacwada gaarsiiyaan dhulka Faaris , Reer Faaris markii ay dacwada diideenna isku baddelay halyeeyo soo duulaan tagay, Ragg ku labisan dhar iska caadi ah gacmahana ku wato hub iska caadi ah gaadiidkooduna uu yahay faras jihaadka ku daalay, geesiyaal aan cadoowga dhabarka xijin, habeenkiinna cibaado u taagan Maalinkiina sida gorgorka u ugaarsanaayo cid walba oo diinta hor istaagta, cid kale ma ahan waa Saxaabadii Nabiga scw ee geesiyada ahaa, waxa ay kasoo baxeen jasiirada Carabta iyadoo uu hoggaaminaayay Sacad Binu Abii Waqaas Rc

waxa ay u tageen Kisraa oo ahaa boqorkii Faaris iyaga oo u waday diin iyo dacwo.

Ciidanka Muslimiinta ee uu hoggaaminaayay Sacad Binu Abii Waqaas waxa ay saldhig ka dhigteen meel udhaw Qaadisiya iyaga oo isku diyaarrinaayay in ay dagaal la galaan Boqortooyada Faaris tiro ahaana waxa ay dhammaayeen 30kun oo askari halka Ciidanka Faaris ay ahaayeen 120kun oo ay usii dheereed Maroodiyaal ay wateen, Ciidanka muslimiinta aad ayey u tira yaraayeen halka Furusna dhan walba ay ka dhisneed, sidaas ay tahay Boqortooyada Faaris aad ayey uga cabsi qabtay ciidanka Muslimiinta, taasna layaab malahan oo Saxaabada Nabiga scw waxa ay duulanka soo qaadeen iyaga oo Amaanada Nabigooda gudannaayo sidoo kale waxa ay raadinayeen shahaado midkoodna ma uusan ka baqeynin dhimasho, halka ciidanka Furus ay dagaalka soo galeen iyaga oo aan aqoon waxa ay u dagaalamayaan iyo waxa ay difaacayaan sidaas darteedna lugaha waxaa looga xiray xargo iyo silsilado si aaney udhabar jeedin marka dagaalku holco.

Rustum oo ahaa hoggaamiyaha ciidanka Faaris ayaa hoggaamiyaha Ciidanka Muslimiinta Sacad Binu Abii Waqaas ka dalbaday in uu u diro rag kamid ah ciidankiisa si uu wada hadal ula sameeyo, Sacad Binu Abii Waqaas markaas wuxuu udiray toban nin oo uu ku jiray Muqiira Binu Shucbah, Sababta loo doortay Muqiira

ha isweydiin oo Muqiira wuxuu kamid ahaa dadka Carabta ugu caqliga badan, Sacadna kuma uusan qaldaneyn doorashada Muqiira sababtoo ah Meesha waxaa looga baahna Caqli iyo maskax.

Muqiira iyo Asxaabtiisa waxa ay u baxeen la kulanka Rustum dadkii reer Faaris ahaa iyagana bannaanada ayey usoo wada baxeen si ay u arkaan ragga lasoo diray maadama ay dhagaha ka maqli jireen geesinnimadooda iyo sida ay isugu Naxariistaan, markii ay indhaha saareen ayey la yaabeen iyaga oo ku mashquulay sida ay u labisnaayeen iyo Fardaha ay wateen iyo Seefaha ay xirnaayeen.

Libaaxyada Muslimiinta markii ay u galeen Rustum ayey arkeen meel lagu qurxiyay dahab iyo xariir iyo waxwalba oo qurxoon oo qaali ah, Rustum waxa uu ku fariistay sariir dahab ah, iyagana markii ay damceen in ay u galaan ayaa ilaaladii meesha joogtay dhaheen hubka iska dhiga markaas ayey dhaheen Anaga ma idin imaan ee adinka ayaa ina wacday, Ama sida aan nahay ayaad nooga leexaneysaan ama waan iska laabaneynaa Sidii ay rabeen ayey ku galeen markaas.

Markii ay Fariisteen ayuu Rustum bilaabay in uu ku jeesjeeso labiskooda, wuxuu weydiiyay su'aalo aan macno laheyn kadib ayuu yiri Maxaa idin keennay dhulkeenna Ribciy Binu Caamir oo kamid ah wafdiga

muslimiinta ayaa u jawaabay oo yiri Alle ayaa inoo soo saaray inaan adoomada ka saarno adoomada ay caabudayaan oo aan u saarno cibaadada Alle, ciriiriga adduunka inaan ka saarno oo aan nimcada adduunka u saarno, dulmiga diimaha inaan ka saarno oo aan caddaalada islaamka u saarno, diintiisa ayuu nala soo diray si aan adoomadiisa ugu yeerno, qofkii aqbalo intaas annaguna waan aqbaleynaa waana ka laabaneynaa balse Kii diido waan la dagaalameynaa ilaa aan ka fulino balanka Alle Gaaladii waxa ay dhaheen muxuu yahay Balanka Alle Wuxuu Yiri Janno kii inaga mid ah ee la dilo iyo guul kii inaga mid ah ee noolaada.

Rustum wuxuu yiri Waan maqalnay hadalkiinna ee waqti mana siin aysaan si aan arrinka uga tashanno Wuxuu yiri Ribciy Meeqa jeceshahay Maalin mise labo maalin Reer Furus waxa ay dhaheen Maya ka badan ayaan u baahan nahay si aan odayaasheenna ula tashanno Markaas ayuu Ribciy yiri Rasuulka Alle inooma jideynin inaan cadoowgeenna u sugno wax ka badan Saddex maalin.

Muqiira Binu Shucbah isaga wuxuu sariirta la fariistay Rustum, ilaaladii Rustum ayaa isku dayay in ay Muqiira ka soo jiidaan sariirta, balse waxa uu yiri, Waxaa na soo gaari jirtay in aad tihiin dad caqli badan, balse hadda waxa aan arkaa inaad tihiin dadka kuwooda ugu caqliga xun, annagu haddii aan nahay carab isma adoonsano,

waxa aan umaleyn jiray sideenna oo kale in aad u siman tihiin, waxa ugu wanaagsan ee aad sameyseen waa inaad ii sheegteen midkiin midka kale in uu caabudo ama adoonsado arrinkiinuna ma ahan mid hagaagsan, anigana adinka ayaa iwacday ee aniga idinma imaan, maantana waxa aan ogaaday in la idinka adkaaday boqortooyana kumasii jirto caqligaan iyo dhaqankaan, ilaaladii ayaa waxa ay dhaheen markaas run ayuu sheegay Carabigaan odayaashii meesha joogay iyagana waxa ay yiraahdeen wallaahi waxa uu yiri hadal ay adoomadeennu la dhaceen, Alle ha hoojiyo dadkeenii hore caqligooda intuu jiray markii ay wax yar nooga dhigaayeen ummad sidaan ah Rustum ayaa xanaaqay wuxuu bilaabay in uu Carabta qiimahooda liido qowmkiisana amaano, kadibna wuxuu hanti ubandhigay geesiyadii islaamka si ay uga leexdaan dhulka faaris.

Muqiira Binu Shucbah ayaa yiri markaas Inaga waxaa diin inoo aheyd inaan is dilno midkeen midka kale ayuu dili jiray qof walba oo inaga mid ahna qofka kale ayuu ku xad gudbi jiray, gabadhaheenna ayaan Aasi jirnay iyaga oo nool annaga oo ka baqeyno in ay wax nala cunnaan ama waaba ceebsan jirnay, waxaan caabudi jirnay dhagaxaanta haddii aan aragno dhagaxa aan caabudno midka ka qurxoon waan tuuri jirnay oo midkaas qurxoon ayaan qaadan jirnay, Xaalkeenna wuxuu ahaa sida aad sheegtay kadib ayuu rabbi inoo soo diray Nabi inaga mid ah, oo inoogu yeeraayo inaan Alle rumeyno, Waan

raacnay waana rumeynay Waxwalba uu dhaho Alle ayaa dhahay wixii uu ina Farana Alle ayaa ina faray, Wuxuu nagu yiri qofkii diintaan idinku soo raaco wuxuu leeyahay waxa aad leedihiin adinka oo xuquuq ah, kii idinka diidana u bandhiga jizyo in uu bixiyo, kadibna ka difaaca waxa aad naftiina ka difaacdaan, qofkii intaas diidana la dagaalama, adigana haddii aad rabto Jizyada dooro adiga oo duleysan ayaad bixin doontaaye Rustum ayaa markaas xanaaqay wuxuu yiri Haddii aan la dili laheyn Fariinsideyaasha waan idin dili lahaa Muqiira ayaa dhahay markaas Carruurteennu waxa ay dhadhamiyeen cuntada dhulkiina waxa ayna dhaheen kama sabri karno.

Rustum ayaa dhahay haddaba waad dhimaneysaan arrinkaas inta aan la gaarin Muqiira waxa uu yiri Jannada ayuu galayaa kii inaga mid ah ee dhinta, kan adinka la idinka dilana naarta ayuu galayaa, midkii annaga naga harana waxa uu ka guuleysan donna midka adinka idinka haro.

Muqiira Binu Shucbah Rc waxa uu dhintay sannadkii 50aad ee Hijri bisha shacbaan isaga oo 70 jir ah.

CUMAR BINU CABDI CASIIS

Qamadiga ku firdhiya buuraha dushooda, si aan, loo dhihin shimbir ayaa ku baahday dhulka muslimiinta

- Cumar Binu Cabdi casiis

**

Amiirul Mu'miniin Cumar Binu Cabdi Casiis, Amiir ay Caddaaladiisa gaartay xitaa xayawaannada, Amiir ay xilligiisa isla daaqi jireen ariga iyo waraabaha, ahna Boqor kamid ah Boqoradii Umawiyiinta, sidoo kalena ah ninka lagu magaacaby **Khaliifka Shanaad ee Islaamka** iyo wiilka uu awoowga u yahay Cumar Binu Khadaab, aan waxyar dib ugu laabano Taariikhda.

Xilligii Cumar Binu Khadaab Rc ayaa waxaa jiray koox ganacsato ah kuwaas oo caanaha ku dari jiray biyo, Cumar Binu Khadaab ayaa maqlay arrinkaas kadibna wuxuu dadka uga digay inaan caanaha lagu dari karrin

biyo, cidii ku dartana laga qaadi doonno tilaabo sharci ah.

Cumar Binu Khadaab [Rc] ayaa habeen isaga oo socdo magaalada dhaxdeeda ayuu guri ka dhax maqlay naag gabadheeda ku dhaheysay istaag oo caanaha ku dar biyo.!

Gabadhii ayaa hooyadeed ku tiri Hooyo miyaadan maqlin go'aankii Cumar Binu Khadaab!?

Hooyadii ayaa tiri oo muxuu ahaa go’aankaas.?! Gabadhii ayaa tiri wuxuu amray inaan caanaha biyo lagu darri karrin cidii ku dartana laga qaadayo talaabo sharci ah

Hooyadii ayaa tiri istaag gabadheyda oo caanaha ku dar biyo, adigu waxaad joogtaa meel uusan Cumar kaa arkeynin ee!.

Gabadhii ayaa tiri Alle ayaan magan galayaa, wallaahi inaan ku adeeceynin bannaanka, oo aan ku caasinaynin markaan kaligey noqdo, haddii uusan Cumar na arkeynina, Rabbiga Cumar ayaa ina arkaayo.

Cumar ayaa la yaabay gabadha markaasna wuxuu calaamadeystay guriga, gacan yarihiisa ayuu amray in uu usoo ogaado gabadha xaalkeeda kadib waxaa loosoo ogaaday in aysan gabadha wax nin ah aysan laheyn,

Cumar ayaa markaas kulmiyay wiilashiisa wuxuuna ku yiri ma idinku jiraa qof u baahan guur? wiilashii ayaa cudurdaartay lakiinse Caasim oo Cumar wiilkiisa ah ayaa yiri Aabe aniga ayaan xaas laheyn ee ii guuri, kadib Cumar wuxuu tagay guriga gabadhii sidaasna waxaa loogu guuriyay Caasim, Gabadhaas Caasim waxa ay u dhashay laba gabadhood Saynab iyo Leyla, Leyla ayaa waxaa guursaday Cabdi Casiis Binu Marwaan wiilka uu dhalay hoggaamiyihii Umawiyiinta ee Marwaan Binu Xakam, Leyla ayaa sidaas ku dhashay Khaliifka Shanaad ee Islaamka Cumar Binu Cabdi Casiis.

Boqorkii Umawiyiinta Suleymaan Binu Cabdi Malik ayaa Cumar Binu Cabdi Casiis u doortay in uu noqdo Boqorka isaga ku xiggi doonno, Sababtoo ah wuxuu ka arkay wanaag iyo Alle ka cabsi iyo xaq jaceyl, Cumar ayaa arrinkaas ka aqbalay Suleymaan, Waxaa la wariyaa markii uu dhintay Suleymaan in uu minbarka koray Cumar dadkiina iskusoo kulmiyay, waxa uuna yiri Dadoow…! Aniga waxaa leygu imtixaamay arrimaha khilaafada mana aysan aheyn fikirkeyga, Aniguna ma aanan dalban, Muslimiintana kama aysan tashan, Haddana adinka ayaan idin dhiibayaa ee doorta qofka aad rabtaan.

Dadkii ayaa si aad ah u qeyliyay waxa ayna dhaheen Adiga ayaan ku doorannay Amiirul Mu’miniinoow, Raalina waan kugu nahay ee maamul arrimaheenna

Cumar markii uu maqlay hadalkaas ayuu dadkii la hadlay, Alle ayuu ammaanay Nabigana wuu ku saliyay scw kadibna waxa uu yiri waxaan idin dardaarmayaa Alle ka cabsiga, Sababtoo ah Alle ka cabsiga kadib ayey wax walbaa yimaadaan, una shaqeysta Aaqiradiina , waayo qofkii u shaqeysto aaqiradiisa Alle ayaa ka faalo qaadayo noloshiisa adduunka, Kadibna codkiisa ayuu kor u qaaday Cumar ilaa ay dadkii dhan maqleen waxa uuna yiri, Dadoow! Qofkii Alle adeeco, ayey waajibeysaa in la adeeco isaga, Qofkii Alle caasiyana wax adeecid ah malahan, Igu adeeca waxaan Alle ku adeeco, Haddii aan Alle caasiyana wax adeecid ah idinkuma lihi.

Markii ay geerida u timid Cumar Binu Cabdi Casiis ayaa waxaa u yimid Maslamah Binu Cabdi Malik waxa uu yiri Amiirul Mu'miniinoow Carruurtaada waad u diiday hantidaan ee ka waran, haddii aad aniga ii dardaaranto, ama qof aad ku kalsoon tahay aad u dardaaranto, markii uu hadalkiisa dhammeystay Cumar ayaa yiri, i fariisiya, waa lasoo fariisiyay wuxuu yiri Maslamoow waan maqlay hadalkaaga, waa runtaada Carruurteyda waan u diiday hantidaan, laakiinse wallaahi ma ihi mid u diidayo wax ay xaq u leeyihiin mana ihi mid siinnaayo wax aysan laheyn sidoo kale waxaad dhahday u dardaaran, waxaan u dardaarmay Allaha soo dajiyay kitaabka xaqa ah isaga ayaa ka faalo qaado dadka wanaagsan, ogoowse Maslamoow carruurteyda waa labbo mid uun.

1. Nin wanaagsan oo Alle ka cabsado markaasna uu Alle hodan ka dhigo.
2. Nin xun oo Alle caasiyay aniguna ma noqonnaayo qofka ugu horeeyo ee hantidiisa garab ku siinayo si uu Alle ugu sii caasiyo.

Kadibna waxa uu yiri iigu Waca carruurteyda, markaas ayaa loogu wacay Tiradooduna waxa ay dhammeyd dhowr iyo toban, Markii uu arkay ayuu ilmeeyay waxa uuna naftiisa ku yiri *waxaan ka tagayaa iyaga oo aan waxba heysan* haddane wuu ooyay kadibna dhankooda ayuu usoo jeestay waxa uuna ku yiri carruurteydii… waxaan idinkaga tagayaa kheyr fara badan, Carruurteydii, waxaa horteenna taalo labo arrin midood, Inaan adduunka idinku siiyo wixii aad rabtaan sidaasna uu Aabihiin Naar ku galo, ama inaad faqri ka noqotaan hantidaan oo uu sidaas aabihiin janno ku galo, umana maleynaayo inaad dooranneysaan badbaadada Aabihiin mooye kadibna si naxariis leh ayuu usoo fiiriyay waxa uuna ku yiri, Istaaga Alle ha idin dhowree, Istaaga Alle ha idin irsaaqee. Maslamah ayaa usoo jeestay Cumar oo ku yiri Amiirul Mu'miniinoow waxaan haaya wax ka kheyr badan arrinkaas. Cumar ayaa yiri oo muxuu yahay? Maslamah ayaa yiri waxaan heystaa siddeed boqol oo kun oo diinnaar, adiga ayaan ku siiyay ee sii ayaga ama sadaqeyso haddii aad rabto, Cumar ayaa dhahay Anigana waxaan haaya arrinkaas mid ka

wanaagsan. Maslamah ayaa yiri oo muxuu yahay? Cumar ayaa dhahay waxaad u celinaysaa qofkii lagasoo qaaday sababtoo ah adiga wax xaq ah kuma lihid, Maslamah ayaa ilmeeyay markaas oo yiri Alle hakuu naxariisto Amiirul Mu'miniinoow nolol iyo geeriba. waxaad inoo jilcisay qalbiyo adkaaday waadna wacdisay iyadoo hilmaamsan.

Alle hakuu naxariisto Amiirul Mu'miniinoow waxaad tusaale u tahay dhammaan hoggaamiyeyaasha muslimiinta, Adiga iyo awoowgaa Cumar Binu Khadaabna Jannada Alle ha idinku kulmiyo.

HAARUUN AL-RASHIID

Ma jirto dhimasho iiga xanuun badneyd dhimashada Amiirul Mu'miniin Haaruun, xitaa waxaan jecleeystay in cumrigeyga asaga loogu kordhiyo si uu u noolaado

- Fudayl Binu Ciyaadh

**

Haaruun Al-Rashiid Alle ha u naxariistee waa hoggaamiye aanan la siinin xaqqii uu ku lahaa taariikhdeenna dahabiga ah, arrinkaasna waxaa u sabab ah shaki galin iyo been Abuur ay ka sameeyeen Kirishtaanka aan cilmiga laheyn iyo Yuhuuda gaalnimada badan iyo dhammaan qolyaha reer galbeedka ah ee u taagan mar walbaa sidii ay inooga indha tiri lahaayeen taariikhdeenna.

Haaruunka aynu ka hadleyno ma ahan midka lagu sheegay buugga xumaanta iyo fisqiga badan ee lagu magacaabo {Kun habeen iyo habeen} kaas oo aan is dhihi

karo waxaa loogu tala galay in lagu aflagaadeeyo geesigeenna Haaruun, gaalada iyo kuwa la shaqeeyaba waxa ay maskaxdeena ku shubeen Haaruun in uu ahaa nin xun oo naagaha kadaba wareego, in uu ahaa nin xun oo kaliya iska daawado dumarka iyo niikadooda ama ciyaartooda, qamrigana cabo islaamkana aan waxba u qaban.

Haaruunka waxaas oo xumaan ah laga sheegay, oo xitaa loo awooddi waayay xaqqiisa uu taariikhda ku leeyahay in la xuso, qaar badan oo Muslimiin ahna ay wax xun ka aamisan yihiin horta yuu yahay? Maxeyse cadowga iskugu dayayaan in ay naga shaki galiyaan taariikhda geesiyadeenna? waxyar waxa aynu ka hadli doonna been Abuurka iyo dacaayada diinta islaamka loo geysto waana labo nuuc middood.

1. Mid waa in si toos ah loo weeraro diinta islaamka, taasina waxaa tijaabiyay qaar kamid ah gaalada weyna ku fashilmeen, jawaabta ay kala kulmeen waxa ay noqotay mid aysan fileynin.
2. Mida kalena waa in shaki galin iyo been Abuur laga sameeyo taariikhda hoggaamiyeyaasha islaamka iyo geesiyadii naftooda u huray diintaan, danta ugu weyn ee laga leeyahayna waa in dadka muslimiinta ah laga leexiyo diintooda, sababtoo ah geesiyada islaamka oo wax laga sheego waa

waddada loo maro aflagaadada diinta, Kanina waa qorshaha ay ku shaqeeyaan Kirishtaanka xilligaan joogo, iyo kuwa neceb islaamka iyo dadkiisaba, si ay uga nabad galaan Jawaabaha uga imaan karo Muslimiinta.

Xilligii Haaruun Al-Rashiid uu Khaliifka ka ahaa Khilaafada Cabaasiyiinta wuxuu ahaa xilligii awoodda iyo sharafta iyo horumarka, Dowladda Haaruun waxa ay aheyd dowladda ugu awoodda badan xilligeeda, waxa ay kasbatay Islaam nool iyo Muslimiin dhiig leh, iyo hoggaamiye ku adag diinta islaamka dadkana ku dhiirragalinaayo barashada cilmiga iyo dhaqanka wanaagsan, Jaabir Binu Xayaan ninka looga haray cilmiga Chemistry-ga wuxuu ku hoos noola dowladdii Haaruun, hantida dowladdaas ayuu ku sameeyay tijaabooyinkiisa cilmiga ah, Haaruunka ay gaalada ku dadaalayaan shaki galinta taariikhdiisa, Waa ninka dhisay Baytul xikmah (Guriga xikmada), Magaalada Baqdaad ee xilligaan caasimada u ah Ciraaq, Haaruun waxa uu ka dhigay Magaalada ugu horumarka badan Adduunka heer waxa ay gaartay loo aqoonsado **(Magaalada Nabada),** sidoo kale waxa ay aheyd Magaalada ugu dadka badan, dadkeedana waxaa lagu qiyaasay wax ku dhaw milyan, wuxuu ka dhigay Magaalo cilmiga nuucyadiisa kala duwan lagasoo doonto, wuxuu horumariyay caafimaadka iyo farsamada.

Haaruun wuxuu ahaa hoggaamiye sannadna jihaadka u taagan sannadna xajka u socdo, qaar kamid ah taariikhyahanada ayaa sheego in uu maalin walbaa tukan jiray 100 rakcadood ilaa uu ka dhintay, hantidiisa uu gaarka u leeyahay ayuu wax ka sadaqeysan jiray, dumarka ciyaartooda in uu daawado iska dhaafe, wuxuu sharfi jiray oo uu soo dhaweysan jiray Cullimada marka ay wacdiyaana wuu ilmeyn jiray, markii uu dhintay Haaruun, Fudayl Binu Ciyaadh Raximahullaah ayaa yiri *Ma jirto dhimasho iiga xanuun badneyd dhimashada Amiirul Mu'miniin Haaruun, xitaa waxaan jecleeystay in cumrigeyga asaga loogu kordhiyo si uu u noolaado.*

Haaruun isaga oo sidaas ah haddane kama uusan mashquuli jirin maamulka iyo arrimaha Khilaafada islaamka, Sidoo kale wuxuu lahaa fikrada kanaalka Suweys ee maanta iskuulada ardaydeenna loogu dhigo in uu lahaa **Ferdinand de lesseps** kaas oo fikrada asalkeeda kasoo xaday Haaruun, Amiirul Mu'miniin Haaruun wuxuu inoo keydiyay Cilmiga, wuxuu inoo sameeyay Maktabad, Laakiinse nasiib darro Cilmigaas iyo kutubtaas qiimaha badan waxaa wabiga Dajjla raaciyay gaaladii Mangooliska, markii ay burburiyeen Caasimadii ugu weyneed adduunka.

Haaruun kaliya ma uusan aheyn maamule dowladdeed ee wuxuu ahaa dagaalyahan ciidanka hoggaamiyo, wuxuu furtay Magaalooyin badan, wuxuu

cashar taariikhdiisa biyaha dahabka iyo dhiigga shuhadada lagu qoray u dhigay gaaladii Roomaanka.

Sannadkii 187 ee hijri Boqorkii Roomaanka ee lagu magacaabi jiray **Nikephoros I (نقفور الأول)** Naqfuurkii koowaad, ayaa buriyay heshiis u dhaxeeyay Khilaafadii Cabaasiyiinta iyo Boqortooyada Roomaanka, isla markaana wuxuu fariin digniiin ah u diray Haaruun, fariintana waxa ay u dhigneed sidaan:

Ka timid Naqfuur Boqorka ruum, Kuna socoto Haaruun Boqorka Carbeed, Boqoradii aniga iga horeysay waxa ay *kaa dhigatay sida walaalkeed oo kale, Hantideedana wey kuu keenni jirtay –Yacnii jizyo ahaan ayaa looga qaadi jiray- wuxuu yiri taasina waa doqonnimada iyo tabar darrida dumarka, haddii aad aqriso qoraalkeygaan kan ah, dib inoogu soo celi hantida aad horay nooga qaadatay oo naftaada ku furo, haddii kale waa inoo dagaal*, Haaruun markii uu aqriyay qoraalkaas aad ayuu u xanaaqay wajigiisana wuu gaduudtay Kadibna isla warqadii dhinaceeda kale ayuu ku qoray jawaab geesinnimo iyo karti ku dheehan jawaabtuna sida tan ayey aheyd *Ka timid Amiirul Mu'miniin Haaruun Al-Rashiid kuna socoto Naqfuur Eeyga ruum, Qoraalkaaga waan aqriyay, Jawaabtuna* waxa ay *noqonneysaa waxaad aragto ee ma ahan wax aad maqleyso* Kadibna Haaruun waxa uu kaxeystay Ciidan uu isaga hoggaamiye u yahay, hadafkiisana waxa uu ahaa edbinta gaalkaas kibray, Haaruun waxa uu hoggaanka u haayay ciidan aan isagoo

kale la arkin siduu u socdayna wuxuu gaaray **magaalada Herakle**[3] wuxuu ka dhigay sida magaalo aan horay u jirin oo kale, kadibna isaga oo u socdo Qustandiiniya ayaa waxaa ka hor yimid gaalkii kibirsanaa ee Naqfuur ahaa isaga oo wado dahab iyo hanti badan, wuxuuna ka codsanaayay in uu jisyada ka aqbalo magangaliyana uu siiyo, Amiirul Mu'miniin Haaruun arrinkaasi wuu diiday wuxuu ku shardiyay Aqbalida jisyada In lasii daayo dhammaan Muslimiinta ku xiran xabsiyada Naqfuur, waana lasii daayay dhammaan Muslimiintii xirnaa.

Amiirul Mu'miniin Haaruun Al-Rashiid wuxuu dhintay isaga oo 45 sano jir ah, Muddada uu khaliifka ahaana waxa ay aheyd 23 sano labo bilood iyo 16 maalmood, Maamulka khilaafada wuu qabtay isaga oo dhawr iyo labaatan jir ah.

Wuxuu muslimiinta hoggaamiyay isagoo 20jir ah, halka dhallinteenna 20 jirada ah ee xilligaan joogana wali kama aysan korin gacanta waalidkood, hoggaamiyeyaasha Muslimiinta qaar kamid ah waxa ay

[3]) Magaalada Herakle waxay ku taal meel u dhow magaalada Eregli ee gobolka Konya ee dalka Turkiga

maamulka qabteen iyaga oo 20jiro ah, Tusaale waxaa kuugu filan halyeeygii Reer Cusmaan, Suldankii Cusmaaniyiinta Libaaxii furtay caasimadii ugu weyneed ee reer Yurub Muxammad Al-Faatix.

CUMEYR BINU WAHAB

Allaha ay nafteyda gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartaye doofaarka ayaan ka jeclaa, Cumeyr Binu Wahab in uu igasoo hor baxo maantase isaga ayaan ka jeclahay qaar kamid ah Carruutayda

– Cumar Binu Khadaab Rc

**

Maalintii badar Cumeyr waxa uu kamid ahaa hoggaamiyeyaasha Qureysh ee usoo dagaal tagay si ay ula dagaalamaan islaamka iyo ehelkiisa, Sidoo kale Cumeyr waxa uu ahaa nin aragti dheer Maamulkana ku wanaagsan, qowmkiisa ayaa u doortay in uu tirakood kusoo sameeyo Muslimiinta la socoto Nabiga scw ee dagaalka gali rabto, iyo in ay wataan wax gurmad ah ama in uu dabin u diyaarsan yahay.

Cumeyr waxa uu guda galay howshiisa Wuxuu qaatay faraskiisa, markii usoo laabtayna waxa uu yiri Iyagu waa Saddex boqol oo nin, waxbaa u dheer ama ka dhimman tirakoobkiisa waxa uu ahaa mid saxan, tolkiisa ayaa weydiiyay ma wataan wax gurmad ah? waxa uu

yiri gadaashooda waxba kama arkin, balse waxaan arkay dad aan gaashaan iyo gabaad midna aan wadan seeftooda mooye, Illaah baan ku dhaartayee mid idin kamid ah ma dilaayo mid iyaga kamid ah ilaa kiina laga dilo, iyaga oo kale haddii ay idinka guuleystaan nolol dambe ma jirto, ee maxaa ku talinaysaan, hadalka Cumeyr iyo fikirkiisaba wuxuu saameeyay qaar kamid madaxda Qureysh waxa ayna ku dhawaadeen in ay raggooda aruursadaan kadibna dhulkooda u laabtan iyaga oon dagaalamin, haddii uusan ahaan laheyn Abuu Jahal kaas oo fikirkooda ka diiday holicii naceybka iyo cadoowtinnimadana ku huriyay.

Reer Makka Cumeyr waxa ay ku magacaabi jireen Sheydaankii Qureysh, Maalintii Badar Sheydaanka Qureysh waxa uu sameeyay wax aan waxba u tarrin tolkiisa, Ciidankii Qureysh waxa ay Makka kusoo laabteen iyaga oo soo jabay, duligana uu ka muuqdo, Cumeyr wiilkiisana waxa uu kamid ahaa dadkii ay qafaasheen muslimiinta.

Maalin ayaa Cumeyr waxa uu la fariistay ina adeerkiis Safwaan Binu Umayah, Safwaana wuxuu naceyb fara badan u qabay dadkii aabihiis dilay, Aabihiis Umaya Binu Khalaf waxa uu kamid ahaa dadkii lagu dilay dagaalkii Badar, Safwaan ayaa yiri isaga oo ka hadlaayo dadkii lagu dilay Badar Illaah baan ku dhaartaye gadaashooda noloshaba dhadhan malalahan.

Cumeyr ayaa yiri waa runtaada, Illaah baan ku dhaartaye haddeyna ahaan laheyn deyn leygu leeyahay oo aan bixinteeda awooddin iyo ciyaalkeyga oo aan uga cabsanaayo in ay iga dayacmaan gadaasheyda, faraskeyga intaan koro ayaan Muxammad u tagi lahaa waana soo dili lahaa, Sababtoo ah waxaan heystaa qaab aan ugu tago oo waxaan leeyahay wiilkeyga aad qafaalateen ayaan u imid, Safwaan ayaa ka faa'iideystay oo yiri deyntaada aniga ayaa dusha saartay oo aniga ayaa bixinnaayo, Carruurtaadana carruurteyda ayey la joogayaan.

Cumeyr ayaa yiri haddaba arrinkeenna inoo qari oo sir ha inoo ahaado.

Cumeyr waxa uu qaatay seeftiisii sumeysneyd toosna wuxuu uu u aaday Magaalada Madiina, Cumar Binu Khadaab Rc iyo qaar kamid ah Muslimiinta oo ka sheekesanaayay dagaalkii Badar iyo siduu Alle ugu sharfay, ayaa Cumar Binu Khadaab Rc waxa uu arkay Cumeyr oo gadiidkiisa ku xirtay albaabka Masaajidka, seeftiisii sumeysneedna wato, Cumar ayaa dhahay Eeygaan waa cadoowga Illaahey Cumeyr Binu Wahab, Illaah baan ku dhaartayee wax aan shar aheyn in uusan la imaan. Kadib Cumar ayaa u galay Nabiga scw oo ku yiri Nabigii Alloow cadoowgii Alle Cumeyr Binu Wahab ayaa yimid isaga oo wato Seeftiisii Sumeysneed, Nabiga ayaa dhahay isoo fasax, Cumar wuu aqbaly Seeftana

wuu ka qaaday raggii la socday ee Ansaarta ahaa ayuu ku yiri u geeya Nabiga oo agtiisa fariisiya, Nabigana ka ilaaliya shartiisa lagama aamin qabee, Cumar ayaa usoo galiyay Nabiga isaga oo Seeftiina ka qaaday Nabiga markii uu arkay waxaa uu yiri iska tag Cumaroow adiga Cumeyr adigana soo gal, Cumeyr ayaa u galay Nabiga waxa uuna ku yiri subax wanaagsan -waa salaantii jaahiliyada- Nabiga scw ayaa dhahay Alle wuxuu nagu karaaameyay salaan ka wanaagsan salaantaada Cumeyroow, waana Salaanta Ahlu Jannaha.

Cumeyr ayaa yiri Wallaahi adigaba kama fogid Salaanteenna.

Nabiga scw ayaa dhahay haddaba maxaa ku keennay Cumeyroow.

Cumeyr ayaa dhahay waxaan u imid wiilkeyga aad qafaalateen.

Nabiga scw ayaa yiri oo maxey eheed Seeftii aad wadatay.

Cumeyr ayaa dhahay inkaar Allaha ku rido seef, maxey inoo qabatay dagaalkii Badar.

Kadib Nabiga scw ayaa u sheegay sababta uu u yimid iyo sheekadii dhaxmartay isaga iyo Safwaan wuxuuna yiri Adiga iyo Safwaan ayaa waxaad fariisateen meel u

dhow dhagaxii ku ag yaallay Kacbada, dabadeedna waxaad ka wada haddasheen dadkii gaalada ahaa ee lagu laayey dagaalkii Badar Adigaa waxaad tiri haddii aynan jiri lahayn deyn laygu leeyahay oo aysan jirin cid iga gudda, iyo ilmo aan uga cabsanayo dayacaad inay u dhintaan, waxaan u taggi lahaa Muxammed (Rasuulka scw) waana dili lahaa, Safwaan ayaa dusha saartay markaas deyntaada iyo ciyaalkaaga si aad aniga ii disho, laakiin Illaah ayaa iga kaa ilaaliyay Cumeyr ayaa qeyliyay oo yaabay waxa uu yiri waxaan qirayaa inaad tahay Rasuulkii Illaahay, Illaah baan ku dhaartayee aniga iyo Safwaan cid aan aheyn ma aysan ogeyn arrinkaan adigana Alle ayaa kuu waramay, waxaa mahadleh Rabigii igu hanuuniyay islaamnimada, Kadib Nabiga scw ayaa ku yiri saxaabada walaalkiin bara diinta qur'aankana u aqriya, Qafaalkiisa oo wiilkiisa ahna usii daaya sidaas ayuu ku islaamay Sheydaankii Qureysh sidaas ayuu ku islaamay Cumeyr Binu Wahab, Cumar Binu Khadaab Rc ayaa yiri Illaaha nafteyda gacantiisa ay ku jirto ayaan ku dhaartayee doofaarka ayaan ka jeclaa Cumeyr Binu Wahab in uu igasoo horbaxo, Maantase isaga ayaan ka jeclahay qaar kamid ah carruurteyda.

Cumeyr ayaa kaligiis meel fariistay isaga oo ka fikiraayo wanaagga diintaan iyo karaamada Nabigaan ayuu xasuustay maalintii Badar iyo dagaalkiisa, iyo maalmihii uu Muslimiinta ku dhagri jiray magaalada Makka inteysan hijroon ka hor, iyo in uu u yimid in uu

dilo Nabiga scw, dhibkaas dhan isaga oo u geystay islaamka ayaa loogu cafiyay halmar uu yiri waxaan qirayaa in uu Nabiga scw xaq yahay rasuulkii Illaaheyna yahay.

Cumeyr markii uu ogaaday waajibka ka saaran diintaan qiimaha badan, iyo in uu ugu adeego siduu ula dagaalamay oo kale, iyo in uu dadka ugaarsiiyo siduu uga celin jiray markii hore oo kale iyo in Alle iyo rasuulkiisa ay ku arkaan waxa ay jecel yihiin oo jihaad iyo adeecid ah, Nabiga ayuu u yimid waxa uuna ku yiri Rasuulkii Alloow waxaan ahaa mid u dadaala siduu u damin lahaa nuurka Alle, aadna u dhibo dadka Alle rumeysan, waxaana jeclahay inaad ii fasaxdo oo aan aado magaalada Makka, Si aan ugu yeero Alle iyo rasuulkiisa iyo islaamnimada waxaa laga yaaba in uu Alle soo hanuuniyo, haddii kalena aan ku dhibo diintooda sida aan Asxaabtaada ugu dhibi jiray diintooda.

Markii uu kasoo tagay Cumeyr magaalada Makka saaxiibkiis Safwaan waxaa ku jirtay yididiilo ah in uu maqli doonno dilka Suubanaha scw, magaalada Makka ayuu dhax wareeggi jiray, fadhiyada Qureysh ayuu isku muujin jiray, Marwalba oo ay tolkiisa weydiiyaan sababta uu u faraxsan yahay waxa uu dhihi jiray ku bishaareysta khabar weyn oo idin hilmaamsiin doonno dhacdadii Badar. Safwaan wuxuu subax walba usoo bixi jiray bannaanka magaalada Makka isaga oo safareyda

weydiin jiray in ay magaalada Madiiina wax ka dhaceen, sidaas ayuuna u weydiin jiray marwalbo.

Maalin ayuu Safwaan weydiiyay nin safarey ah in ay magaalada Madiina wax ka dhaceen, Ninkii safareyda ahaa ayaa yiri haa wax weyn ayaa ka dhacay, Safwaan aad ayuu u farxay wuxuuba ku dhawaaday in uu xidigaha ku socdo farxad darteed, Kadib ninkii ayuu weydiiyay waxa dhacay, Ninkii ayaa dhahay waxaa islaamay Cumeyr Binu Wahab, halkaas ayuu jooga waxa uuna baranayaa diinta waxaana loo aqrinayaa qur'aanka, Safwaan dhulka ayaa la wareegay waxa uu ku dhawaaday in uu qarxo duufaanta kusoo dagtay awgeed.

Waxa ay maalmaha soo wareeganba Cumeyr ayaa Makka kusoo laabtay isaga oo seeftiisa u baxsan tahay, dagaalna u diyaarsan, qofkii ugu horeeyay uu la kulmay waxa uu ahaa Safwaan, Cumeyr waxa uu damcay in uu weeraro balse wuxuu ku kaaftoomay in uu xoogga erayo ah ku dhaho, kadibna socodkiisa ayuu iska watay wuxuu galay Makka isaga oo muslim ah, halka maalmo ka horna uu ka tagay isaga oo gaal ah, magaalada Makka ayuu u galay si layaab leh wuxuuna u ekaa Cumar Binu Khadaab Rc maalinkii uu islaamay, Isaga oo islaaminimadiisa muujinnaayo ayuu yiri Illaah baan ku dhaartayee inaan ka tageynin meel aan gaalnimo la

fariistay, haddii ay jirtana waxaa la fariisan doodna islaamnimo iyo iiman.

Cumeyr Binu Wahab Rc wuxuu habeen iyo maalinba si muuqato iyo si qarsoonba u muujinayay islaamnimadiisa qalbigiisa waxaa ka buuxay iimaan, nuur iyo hanuun Carrabkiisana waxaa ka socday haddalo xaq ah, gacanta wuxuu ku watay seeftiisa taas oo uu isaga edbinaayay eeyaha wadooyinka taagan ee rabbo in ay xaqa gacmahooda ku daboolan, isbuucyo kadib waxaa gacantiisa ku islaamay muslimiin fara badan, wuxuu usoo kaxeeyay dhankii Madiina, Maalmo yar ka hor wuxuu Madiina soo galay isaga oo Seef sumeysan wato rabbana in uu dilo Nabiga scw maantana wuxuu hoggaaminayaa Muslimiin fara badan takbiirtana wadooyinka ayey is qabsatay.

Cumeyr wuxuu Nabiga scw kala qeyb galay dagaalo badan, furashadii Makka Cumeyr ma uusan iloobin Saaxiibkiis Safwaan Binu Umaya, Cumeyr wuxuu islaamnimada ugu yeerayay Saaxiibkiis, Safwaanna waxa uu rabay in uu Yaman u safro Cumeyr waxa uu isku dayaayay in uu saaxiibkiis ka reebo Sheydaanka hoggaanka u haayo, Nabiga ayuu u yimid waxa uu yiri rasuulkii Allow Safwaan wuxuu baxay isaga oo adiga kaa cararayo ee Rasuulkii Alloow magan galyo sii, Nabigana wuu ka aqbalay, Cumeyr ayaa dhahay Rasuulkii Alloow isii calaamad uu ku garto inaad magan

galisay, Nabigana wuxuu siiyay cimmaamadii uu kusoo galay Makka, Cumeyr ayaa kadaba tagay Saaxiibkiis Safwaan.

Safwaan waxa uu rabay in uu ku Safro badda, Cumeyr ayaa dhahay Safwaanoow Hooyadeey iyo aabahey ayaan kugu furtayee naftaada ha haligin, Rasuulka Alle magan galiyo ayuu ku siiyay, Safwaanna waxaa u dhahay Hoogee…! iga dheeraaw hana ila hadlin, Cumeyrna waxa uu dhahay hooyadeey iyo aabahey ayaan kugu furtayee Rasuulka Alle waa kan dadka ugu Wanaagsan, ugu Naxariis badan, ugu Dulqaad badan, sharaftiisu waa sharaftaada.

Safwaan waxa uu dhahay nafteyda ayaan uga Cabsanayaa.

Cumeyr ayaa dhahay arrinkaas wuu ka dulqaad badan yahay kana wanaagsan yahay, Cumeyr iyo Safwaanna wey is soo raaceen, Safwaan ayaa Nabiga scw ku yiri Kani wuxuu sheegayaa inaad imagan galisay ee maxaa ka jiro, Nabiga scw waxa uu yiri run buu kuu sheegay, Safwaan waxa uu dhahay haddabo labo bilood qiyaar isii, Nabiga scw waxa uu dhahay afar bilood oo qiyaar ah ayaad leedahay, ugu danbeyn Safwaan wuu islaamay Cumeyrna aad ayuu ugu farxay.

Wixii intaa ka danbeeyay Cumeyr wuxuu dadka ugu yeeri jiray Diinta Islaamka ilaa ay gacantiisa ku soo islaameen khalqi aad u fara badan Alle ha sharfo Cumeyr, qabrigiisna Allaha u nuuriyo Aamiin.

CIKRIMA BINU ABII JAHAL

Nabiga scw ayaa kula dagaalamay meelo badan maantana ma waxaan cararayaa Ruum, taasina ma ahan mid dhaceyso!

- Cikrima Binu Abii Jahal

**

Cikrima Binu Abii Jahal Rc waxa uu kamid ahaa dadka Qureysh ugu nasabka wanaagsan uguna hantida badan, uguna Sharafta badan, Aabihiis waxa uu ahaa Fircoonka Ummadaan, iyo hoggaamiyaha shirkiga iyo gaalnimada iyo sheydaankii Muslimiinta ku ciqaabi jiray magaalada Makka hijrada ka hor, ugu danbeyna wuxuu ku dhintay gacanta wiilashii uu ciqaabi jiray, Waa Abuu Jahal intaasna warbixin wey kaaga filan tahay.

Cikrima isagana waxa uu kamid ahaa hoggaamiyeyaasha Qureysh iyo dagaalyahanada ay ku faanaan Qureysh ee ugaarsiga ku wanaagsan, Cikrima waxa uu cadoowtinnimada ka qaatay aabihiisii

Sheydaanka ahaa, wuxuu aad ula dagaalami jiray diinta islaamka, isaga oo sameeyn jiray waxyaabo uu aabihiis ku farxo.

Dagaalkii Badar aabihiis Abuu Jahal ayaa ahaa hoggaamiyaha gaalada, Waxa uuna ku dhaartay in uusan ku laaban Makka isaga oo aan guuldarro gaarsiinin Muxammad (Nabiga scw), Abuu jahal wuxuu gawracay Saddex neef oo geel ah, wuxuu cabay qamriga, muusigna waa loo tumay, Abuu Jahal marka uu dagaalkaan hoggaaminaayay waxaa garab u ahaa, gacanta uu ku ugaarsadana ahaa wiilkiisa Cikrima, Balse nasiib wanaag Abuu Jahal sanamyadii uu baryay waxba uma aysan qaban sababtoo ah ma aysan maqlin, garabna ma siinin oo ma aysanba awooddin.

Cikrima wuxuu Makka ku noqday isaga oo ka cararay baqtiga aabihiis, jabkii soo gaaray awgiis, mana uusan ku guuleysan in uu Makka qabri uga dhigo, Wiilashii muslimiinta ahaa baqtiga Abuu Jahal waxa ay ku tuureen god meesha ka dhawaa isaga iyo toban gaal oo la socotay carradana wey ku gadiyeen.

Maalintaas laga bilaabo Cikrima wuxuu si xad dhaaf ah u nacay cadoowtinnimana ugu qaaday islaamka iyo muslimiinta, wuxuu rabay in uu aabihiisii gaalka ahaa u aargudo, Cikrima iyo qaar kamid sheydaamo yaryar oo aabayashood lagu dilay dagaalkii Badar ayeey laabta u

dagtay naceybka ay u qabaan Suubanaha scw iyo Asxaabtiisa qiimaha badan, ugu danbeyn waxaa la gaaray dagaalkii Uxud.

Cikrima wuxuu ka qeyb galay dagaalkii Uxud waxaana la socotay Xaaskiisa Ummu Xakiim iyo dumar kale si ay gaalada ugu dhiirragaliyaan dagaalka oo aysan uga cararrin, gaaladii Qureysh waxa ay hoggaamiyaha garabka midig ka dhigteen Khaalid Binu Waliid garabka bidixna waxa ay ka dhigteen Cikrima Binu Abii Jahal oo ahaa labada dagaalyahan ee ugu Wanaagsanaa, halkaasna wuxuu jab kusoo gaaray muslimiinta, gaaladii Qureyshna goobta ayey kala carareen guul aan dhammeystirmin.

Dagaalkii Axsaab gaaladii Mushrikiinta ayaa go'doon galiyay magaalada Madiina maalmo badan, Cikrima wuu u adkeysan Kari waayay waqtigaas faraha badan kadibna wuxuu helay meel yar oo uu ka gali karo magaalada Madiina oo markaasi dhufeys ku jirtay, Cikrima iyo qaar gaalada kamid ah oo la socday ayaa luuqii yaraa galay kadibna walagu soo kala buriyay cikrimana wuu cararay.

Furashadii Makka gaaladii Qureysh waxa ay ogaadeen in aysan awood u laheyn ka hortaga ciidanka uu hoggaaminayay Nabiga scw, waxa ayna go'aansadeen in ay jidka u banneeyaan, Nabiga scw

wuxuu amray inaan la dili karrin qofkii la kari waayo ma ahane, Lakiin Cikrima iyo qaar kamid ah raggii Qureysh ayaa isku dayay in ay hor istaagan ciidanka Muslimiinta kadibna Khaalid Binu Waliid ayaa jabiyay, Halkaasna waxaa lagu dilay kii la dili karo kii kalena wuu iska cararay Cikrima waxa uu kamid ahaa dadkii cararay.

Ugu danbeyn Cikrima wuxuu go'aansaday in uu magaalada Makka isaga tago oo uu Yaman aado, balse Xaaskiisa Ummu Xakiim ayaa Nabiga scw uga dalabtay magan galyo, Nabiga scw wuu ka ogolaaday, Ummu Xakiim markii ay u tagtay Cikrima waxa ay ku tiri Waxaan kaaga imid dadka midkii ugu fadliga badanaa, ugu baarisanaa, ugu wanaagsanaa agtiisa, magan galyo ayaan kuu weydiiyay wuuna ku magan galiyay ee naftaada ha haligin wuxuu yiri ma adigaa la hadlay? waxa ay tiri Haa, kadibna si wadajir ah ayey iskusoo raaceen labadooda, Intii ay waddada ku socdeen ayey si kumeel gaar ah ugu leexdeen guri wadada dhinaceeda ku yaalay, Cikrima waxa uu isku dayay in uu xaaskiisa u dhawaado ayadaana si adag ayey uga diiday oo waxa ay tiri waxaan ahay Muslimad adigana waxaa tahay Mushrik, Cikrima isaga oo yaaban ayuu yiri arrinka adiga iyo aniga na kala ilaaliyay mid sahlan ma ahan.

Cikrima waxa uu kusoo laabtay magaalada Makka Nabiga scw Asxaabtiisa ayuu ku yiri waxaa idin imaan doonno cikrima isaga oo Muslim ah, ee aabihiis ha

caayina, sababtoo ah qofka dhintay oo la caayo waxa ay dhibeysaa qofka nool, ee qofka dhintay ma gaareyso Kadib Cikrima ayaa Nabiga scw u yimid waxaa uu ku yiri Ummu xakiim waxa ay sheegeysaa inaad imagan galisay, ee maxaa ka jiro Nabiga scw waxa uu yiri run ayey kuu sheegtay.

Cikrima ayaa dhahay oo maxaa dadka ugu yeerta Muxammadoow? .

Nabiga scw waxa uu u tiriyay Arkaanul islaamka.

Cikrima waxa uu dhahay Illaah baan ku dhaartayee wax aan xaq aheyn dadka uguma yeertid, wax aan wanaag aheyna ma amartid, ugu danbeyna diinta islaamka ayuu qaatay, Nabiga scw ayuu ka dalbaday in uu u duceeyo Nabigana wuu u duceeyay danbi dhaafna Illaahey wuu u weydiiyay, maalinkaas laga bilaabo cikrima waxa uu kamid noqday Geesiyaasha iyo Mujaahidiinta u taagan faafinta diinta islaamka, mararka qaar kitaabka qur'aanka ayuu inta wajiga saarto dhihi jiray **Kitaabka Rabbigey, Hadalka Rabbigey,** Isaga oo la ooynayo cabsi Alle.

Dagaalkii Yarmuuk Cikrima ayaa waxa uu arkay Ciidanka Muslimiinta oo arrinta ku xumaatay, Markaas ayuu inta faraskiisa kasoo dagay seeftana galka kala baxay oo galkeedii jabiyay ayuu kala jeexay safkii gaalada Ruum, Khaalid Binu Waliid Rc ayaa isku dayay in uu celiyo balse cikrima waxa uu yiri Iga leexo Khaalidoow, Adiga waad

iiga soo horeeysay Nabiga scw, balse Aniga iyo aabaheey cadoow daran ayaan ku eheyn, Nabiga scw ayaa kula dagaalamay meelo badan maantana ma waxaan cararayaa Ruum taasina ma ahan mid dhaceyso! Kadibna muslimiinta ayuu ugu dhawaaqay cod dheer waxa uu yiri Yaa igula balamaayo geerri? Markaasna waxaa soo raacay afar boqol oo kamid ah libaaxyada islaamka, waxa ay dagaalameen dagaalkii geesiyada.

Markii uu dhammaaday dagaalkii, Muslimiintana ay guuleysteen guul weyn ayey arkeen saddex Mujaahid oo dhaawacu tabar dareeyay, waxa ayna kala ahaayeen Cikrima Binu Abii Jahal, Cayaash Binu Abii Rabiica iyo Al-Xaaris Binu Hishaam, Xaaris ayaa dalbaday biyo markii loo keennay ayuu arkay Cikrima waxa uu yiri haloo geeyo cikrima, Cikrima markii loo keennayna waxa uu arkay Cayaash, waxa uu yiri haloo geeyo Cayaash, Cayaash markii loo keennayna waxa uu yiri ma cabaayo ilaa uu ka cabbo walaalkeygii dalbaday markii hore, Biyihii waxaa loo celiyay Al-Xaaris Binu Hishaam balse waxaa la arkay isaga oo dhintay, Haddane waxaa loo keenay Cikrima isagana sidoo kale waa uu dhintay, haddane Cayaash ayaa loo celiyay isagana Saaxiibadiis kama uusan harrin oo waa uu dhintay.

Alle haka raali noqdo dhammaantood oo darka Nabiga Alle haka waraabiyo.

CUSMAAN BINU ERTUGRUL

Waxaan kugula dardaarmayaa Culimada Ummada, ilaali oo qadari, Go'aammadana kala tasho ayaga sababtoo ah

- Cusmaan Binu Ertugrul

**

Sannadkii 656 Hijri Ertugtul Suleyman Shaah ayaa waxaa loo dhalay wiilkiisa Cusmaan, oo ah Aas-aasaha iyo yigleelaha dowladdii Cusmaaniyiinta, Waana isla sannadkii ay Mangooliska ku duuleen Caasimadii Adduunka ahna caasimadii Khilaafada Cabaasiyiinta ee Baqdaad, dhacdadaasi waxa ay aheyd mid weyn oo aad u xannuun badan waxa ay dileen wax walboo ay awoodeen in ay dilaan, dumar iyo ragg, oday iyo carruur iyo dhallinyaro, dadkii Muslimiinta ahaa midna lagama tagin, kaliya waxa ay ka tageen Yuhuudii iyo Kirishtaankii Muslimiinta ku hoos noola.

Dhibaatadaas iyo Tabar-darridaas ku habsatay Muslimiinta waxaa sabab u ahaa danbiga iyo xumaanta oo xad dhaaf noqday sidaas darteedna waxaa lagu saliday Mangoolis oo dhiiggooda iyo sharafkoodaba banneystay, hantidoodana dhacay, guryahoodana burburiyay, iyadoo dhibaatadaas iyo dulligaas uu ku habsaday ummadeenna ayaa la dhalay Cusmaan, halyeygii soo celiyay sharafta Muslimiinta, aas-aasayna dowladdii Cusmaaniyiinta oo isaga loogu magac daray, wuxuu dhidibada u taagay dowlad awooddeeda dhulka ku xukumeysay wax ku dhaw lix boqol oo sano, halkaasna waxaan ka baran karnaa dhammaad walba in uu billoow cusub leeyahay, taasina waa xikmada iyo doonista Alle.

Burbur iyo rafaad dheer kadib waxaa inoo bilawday qiso cusub iyo dowlad awood badan, hoggaamiyaheedana la dhalay markaan kufnay kadib, marka aan u fiirsano taariikhda hoggaamiyaasheenna waxaan ka baran karnaa sifaadka iyo calaamaddaha laga rabo in uu yeesho ama ku sifoobo hoggaamiye walbaa, waxaa kamid ah tilmaamaha hoggaamiye Cusmaan in uu ahaa geesi waxaana tusaale usoo qadan karnaa, markii ay gaalada Beyzantaniya ku heshiiyeen go'aanna ku gaaren in ay dhulka la simaan oo ay burburiyaan dowladdaan soo koreyso sannadkuna waxaa uu ahaa 700 hijri, hoggaamiye Cusmaan isaga ayaa naftiisa kala hortagay dulmigaas iyo shirqoolkaas ay soo maleegen

gaalada, wuuna ka guuleystay ciidankii gaalada ee kirishtaanka ahaa, Geesinnimadiisa cajiibka ahna wuu soo bandhigay wuxuuna noqday tusaale ay ku daydaan Cusmaniyiintii isaga ka Faracmay.

Sidoo kale tilmaamaha hogaamiye Cusmaan waxaa kamid ahaa daacadnimo, dulqaad, sabar iyo caddaalad iyo sifaad kaloo badan, sifada caddaalada ee hoggaamiye Cusmaan waxaan tusaale ugusoo qaadan karnaa, Taariikh ay badanaa wariyaan kutubta ka hadasha Taariikhda Cusmaaniyiinta in Ertugtul oo ah aabaha dhalay Cusmaan uu kala balamay wiilkiisa Cusmaan in uu xukumo qasriga Krajahisaar, kadib markii ay kala soo wareegen Beyzantaaniyiinta sannadkii 684/1285, Cusmaan ayaa kala xukumay nin Muslim ah iyo nin kaloo kirishtaan Beyzantaani ah, Ninkii kirishtaanka ahaa ayaa la yaabay oo yiri sidee xaqeyga iigu xukumeysaa aniga oo heysto diintaada diin aan aheyn?.

Cusmaan ayaa dhahay Sideen xaqaaga kuugu xukumeeynin iyadoo Rabbiga aan caabudno uu ina leeyahay:

﴿إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُم بَيْنَ النَّاسِ أَن تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ﴾

Allaah wuxuu idin amrayaa inaad amaanada siisaan ehelkeeda, haddaad kala xukumeysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan caddaalad… — ***Suurat Nisaa**, **aayada 58***

Caddaalada hoggaamiye Cusmaan waxa ay sabab u noqotay in uu ninkaasi soo Muslimo diinta xaqa ahna qaato waliba isaga iyo tolkiisa, hoggaamiye Cusmaan caddaalad ayuu kula dhaqmi jiray dadkiisa, dhulka uu furtay iyo dadka uu ka adkaadayba kulama dhaqmi jirin dulmi iyo xad gudub, boob dhac midna.

Taariikhyahan Axmed Rafiiq wuxuu ku tilmaamay hoggaamiye Cusmaan in uu ahaa nin diinta ku adag ogna faafinta diinta islaamka in ay tahay waajib muqadas ah, wuxuu lahaa fikir siyaasaddeed balaaran, dowladdiisana uma aas-aasin Xukun jecli ee wuxu u aas-aasay faafinta diinta islaamka.

Taariikhyahan Misir oglo isagana waxa uu leeyahay Cusmaan Binu Ertugrul wuxuu si qoto dheer u aamisanaa in shaqadiisa koowaad ee nolosha in ay tahay jihaad Alle dartii ah iyo kor yeelida kalimada Alle, Awooddiisa oo dhana wuxuu galiyay siduu fikirkaas u xaqiijin lahaa.

Cusmaan wuxuu aad u jeclaa diinta iyo jihaadka wuxuuna aad u necbaa gaalada, sidaas darteed madaxda Ruum wuxuu hor dhigi jiray Saddex qiyaar oo kala ah in ay diinta qaataan, ama in ay jizyo bixiyaan (Jisyada waa lacag ay bixiyaan gaalada ku hoos nool xukunka muslimiinta si amnigooda loo sugo) ama in ay yimaadaan barxadda dagaalka si loogu kala baxo, Kuwo

badan diinta ayey soo gali jireen, qaarna jisyada ayey bixin jireen, kii intaas diidana jihaad aan dhammaad laheyn ayuu nafta uga qaadi jiray ilaa uu ka guuleysto, wuuna ka guuleysan jiray maamulkoodana dowladdiisa ayuu ku darsan jiray.

Nolosha hoggaamiye Cusmaan waxa ay aheyd jihaad iyo diin faafin, wuxuuna aad u jeclaa, aadna u ixtiraami jiray Culimada diinta wuu la tashan jiray go'aammadana wuu u bandhigi jiray, diin jaceylka iyo daacadnimada Cusmaan waxaan ka arki karnaa dardaaranka uu siiyay wiilkiisa Orkhan isaga oo sakaraad ah waxa uuna yiri sidaan Wiilkeygiyoow..!! iska ilaali inaad ku mashquusho wax uusan Alle ku amrin, haddii xukun adag kaa hor yimaadana la tashiga Culimada ka dhigo meel loo noqdo, sheydaankuna yuusan kugu dhagrin oo kugu qiyaamin ciidankaaga iyo hantidaada iskana ilaali inaad ka dheerato dadka diinta iyo Culimada, waad ogtahay hadafkeenna in uu yahay raali galinta Alle jihaadkuna uu diinta u yahay iftiin, ka sheekey wax Alle raali ka yahay, wiilkeygiyoow..! inagu ma nihin kuwa u dagaalamo si ay Maamul ama awood u helaan inaga islaamka ayaan ku nool nahay islaamka ayaana u dhimmaneynaa

Dardaarankii oo si kale u qoran isagana waxa uu leeyahay wiilkeygiyoow…!! Anigu waxaan u guurayaa Alle agtiisa, adigana waan kugu faannayaa inaad noqon

doonto xaqsoor Caadil ah, mujaahid jidka Alle ku jihaaddo si uu diinta islaamka u faafiyo, wiilkeygiyoow… waxaan kugula dardaarmayaa Culimada ummada ilaali oo qadari, Go'aammadana kala tasho sababtoo ah ayaga ku amri mayaan wax aan wanaag aheyn, Wiilkeygiyoow… iska ilaali inaad sameyso wax uusan Alle raali ka aheyn, haddii arrin kugu adkaadana Culimada islaamka weydii, iyaga ayaa ku tusi doonno wannaage, Ogowna Waddada kaliya aan leenahay in ay tahay waddada Alle hadafkeenana uu yahay faafinta islaamka anaguna ma dooneyno aduun iyo madaxnimo midna.

Hoggaamiye Cusmaan Alle ha u naxariisto kaliya ma uusan aheyn hoggaamiye ee wuxuu ahaa barbaariye bulsho oo wuxuu nooga tagay wiilkiisa Orkhan iyo dowladdiisa awoodda badan oo islaamka iyo ehelkiisaba ka difaacday xadgudubka Reer Yurub iyo gaalada kaleba, inta kuma soo koobi karo taariikhda hoggaamiye Cusmaan iyo dhibaatada uu kasoo maray Yigleelida dowladdiisa Cusmaaaniyada balse inta ayaan iskaga soo koobay.

KHAALID BINU WALIID

Dumarka oo dhan way awooddi waayeen
Khaalid oo kale in ay dhalaan.

- Abuubakar Sidiir Rc

**

Hoggaamiye dagaaleed midka ugu weyn ee soo mara taariikhda banii aadamka oo idil, hoggaamiyaha ugu caliga badan uguna qorsheynta badan uguna xeeladda badan, asaga hortiis ma jirin gadaashiisana ma imaanin hoggaamiye kulansaday dhamaan tilmaamahaas, ma jiro hoggaamiye lala barbar dhigi karo, wax ka badan boqol dagaal ayuu galay, noloshiisana hal dagaal laguma jabin, Ruum iyo Furus oo awooddooda dhan adeegsanaayo ayuu ka adkaaday argagax xoogganna qalbiyadooda wuu ku abuuray, sheegida magaciisa oo kaliya ayey la argagixi jireen cadowgiisa waa seeft uu Alle dul dhigay gaalada Khaalid Binu Waliid Rc.

Maadaama uu yahay hoggaamiyaha dagaalyahannada maxaa la yiri isaga:

- Nabiga scw Ayaa yiri Khaalid Binu Waliid waa seef kamid ah seefaha Alle uu dul dhigay gaalada iyo munaafiqiinta.
- Abuubakar Sidiiq Rc wuxuu yiri Dumarka oo dhan way awooddi waayeen Khaalid oo kale in ay dhalaan Sidoo kale wuxuu yiri isaga oo u jawaabayo Cumar oo dalbaday in Khaalid xilka laga casilo Ma ihi mid daminaayo seef uu Alle dul dhigay Mushrikiinta.
- Cumar Binu Khadaab Rc Markii ay geeridiisa soo dhawaatay ayuu yiri Haddii uu joogi lahaa Khaalid isaga ayaan u dhiibi lahaa Maamulka Islaamka, Marka Rabbigey uu iweydiiyo cida aan masuulka uga dhigay Ummada Nabi Muxammad scw, waxaan dhihi lahaa, Rabbiyoow Waxaan maqlay Nabigaada oo leh Khaalid waa seef kamid ah seefaha Alle uu dul dhigay gaalada.
- **Mustashriqiinta gaalada iyo waxa ay ka yiraahdeen Khaalid**
    - Khaalid Binu Waliid Waa hoggaamiye aan ganban, hoggaamintana hibo u leh, Sababtiisa ayey Muslimiinta ugu guuleysteen meelo fara badan, Nabi

Muxammadna wuxuu ku magacaabay seeftii Alle.

- *Richard Müller* Waxa uu leeyahay Napoleon Bonaparte Waa sida Khaalid Binu Waliid, Uma aaba-yeelayo wax aan dagaal aheyn, Mana Jeclo in uu barto wax aan dagaal aheyn.
- *Dermengham* wuxuu leeyahay Khaalid Binu Waliid Waa hoggaamiye weyn, lama jabin lagamana adkaan, hoggaamiye aad u caqli badan, hoggaamintana ku wanaagsan.
- *Goltz* Isaguna waxa uu leeyahay Khaalid Binu waliid waa macalinkeyga dhanka dagaalka.
- Inkasta oo hoggaamiye Khaalid laga casilay hoggaaminta ciidankii Shaam, haddane dhab ahaan isaga ayaa ahaa hoggaamiyaha Ciidanka. (brockelmann)

Khaalid Binu Waliid Rc waxa uu ku dhashay magaalada Makka sannadkii 592dii miilaadiga, aabihiis waa Waliid Binu Muqiira; mid ka mid ah hantiileyaasha Qureysh. Khaalid dagaalkii badar ma uusan ka qeyb gelin sababtoo ah ma uusan joogin, oo waxa uu ku maqnaa Shaam, balse waxa uu ka qeyb galay dagaalkii

Uxud waxa uuna ku lahaa kaalin muuqata, isaga ayaa u sabab ahaa in muslimiinta lagu dhibaateeyo dagaalkaas. Khaalid waxa uu soo islaamay sannadkii siddeedaad ee hijriga ka hor furashadii Makka.

Khaalid Binu Waliid Rc waa hoggaamiye kamid ah hoggaamiyeyaasha islaamka ee Jihaadka, iyo aqoonyahanka kaliya ee laga bartay maamulka iyo hoggaaminta dagaalka, Xilligii uu noola wuxuu edbiyay gaalo badan, Wuxuuna galay dagaalo badan wuxuu waajahay cadoow kala duwan, wuxuu kaalin muuqato ka qaatay dagaaladii ridada, Xilligii uu noola Nabiga scw wuxuu galay dagaalo fara badan Tusaale Buuxana waxaa kuugu filan dagaalkii Mu'tah heer uu Nabigascw ku Magacaabay seef kamid ah seefaha Alle uu duldhigay gaalada, Markii uu dhintay Khaalid ilaa iyo hadda Taariikhdiisa geesinnimada leh Maalinba maalinta ka danbeyso wey sii caan baxeysaa waxaana lagu daraaseeya macaahida iyo Jaamacaddaha Muslim iyo gaalba leh, isaga ayey ka barteen dagaalka iyo maamulkiisa.

Waxaa jiri karto su'aal ah, Khaalid intee ayuu ka bartay dagaalka iyo maamulkiisa? Dhab ahaan kama uusan baran Mac-had ama Jaamacad midna ee wuxuu ka bartay Madarasada Nabi Muxammad scw, caqiidada islaamka ee saxiixa ah iyo geesinnimadiisa ayaa ka dhigtay hoggaamiye dagaal oo dhan walba ah, Islaamka

ka hor Khaalid ma ahaa Dagaalyahan? dhab ahaan maya, Kaliya wuxuu u halgami jiray Noloshiisa inkasta uu kasoo Muuqday dagaalkii Uxud iyo dagaalo kale isaga oo Muslimiinta kasoo hor jeeday xilligaas, laakiinse markaas ma uusan laheyn geesinnimada iyo qibrada uu helay islaamnimada kadib, Halkaan kuma soo Koobi karo dhammaan taariikhda hoggaamiyahaan qiimaha badan, balse waxaan ka tilmaami doonna waxyar oo kamid ah geesinnimadiisa waxaan soo qaadan doonna dagaalkii Mu'tah ee uu ku helay magaca qiimaha badan ee ah ''seefta Alle''.

Khaalid Binu Waliid Rc wuxuu kamid ahaa ciidankii Muslimiinta ee ka baxayay magaalada Madiina, ciidankas oo tiradooda ay dhammeyd Saddex Kun oo askari kuwaas oo wajahay laba boqol oo kun oo Askari, hoggaamiayaha koowaad ee dagaalka waxaa ahaa Zayd Binu Xaarith Rc, Khaalid waxa uu kamid ahaa ciidankaas balse ma uusan aheyn hoggaamiye, Sababta dagaalkana waxa ay aheyd in loogu aargudo wafdi Nabiga scw ka socday oo fariinside ahaa kaas oo jidka uu u galay nin la oran jiray shuraxbiil Binu Cammar kaas oo si foolxun u dilay, Markaas Nabiga scw wuxuu diyaariyay ciidan Ka kooban saddex kun wuxuuna madax uga dhigay Zayd Binu Xaarith, haddii la dilana Jacfar Binu Abii Daalib, haddii la dilana Cabdullaahi Binu Rawaaxa, Libaaxyadii Muslimiinta waxa ay tageen goobta dagaalka, waxa ayna hor istaageen ciidan tiro iyo hub intaba ka badan, balse

geesiyada Nabi Muxammad scw uu soo diray halkii nin ee ayaga kamid ah wuxuu u dhigmay kun askari, hadafkooduna waa janno, sidaas darteedna dhabarka ma jeedin ee cadoowga ayey argagax ku Abuureen, ciidanka muslimiinta kuma ay tashan markii hore in ay la kulmayaan ciidan tiradaan leh, hoggaamiyeyaasha ciidanka ayaa kulmay iyaga oo ka tashnaayo arrinkaan iyo sida ay waxyeeli lahaayeen Cabdullaahi Binu Rawaaxa oo kamid ahaa hoggaamiyeyaasha ciidanka ayaa yiri ''Dadoow… wallaahi tan aad naceysaan ayaa ah mida aad darteed usoo baxdeen adinkoo raadinaayo iyada, Waana shahaado, dadkana kulama dagaalameyno tiro iyo awood badnaan midna, ee waxaan kula dagaalameynaa diinkaan uu Alle nagu karaameeyay dartiis, aan horay u socono labo mid ayey noqonneysaaye, guul ama shahaado'' Kadibna dagaalka ayaa si xamaasad leh ku biloowday, waxyar kadibna waxaa la dilay hoggaamiyeyaasha Muslimiinta ee saddexda ahaa, kadib dagaalyahanada Muslimiinta ayaa tashtay Khaalid ayeyna u doorteen in uu hoggaamiyo.

Khaalid Markii hore hammigiisa ma aheyn hoggaamiye nimo kaliya wuxuu soo raacay ciidanka Mujaahidiinta ee ay hoggaaminaayeen rag asaga islaamnimada ugasoo horeeyay, Khaalid marka uu qabtay hoggaaminta ciidanka wuxuu dagaalamay dagaal qaraar oo aad u xamaasadeysan Imaamu Buqaari Waxa uu Khaalid ka wariyay In maalinkaas ay gacanta

Khaalid ku dhammaadeen sagaal seefood [9] Nabiga scw isaga oo ka waramaayo dagaalkaas ayuu yiri Calanka waxaa qaaday Zeyd waa la asiibay oo wuu dhintay, haddane waxaa qaaday Jacfar isagana waa la asiibay, haddane waxaa qaaday Cabdullaahi Binu Rawaaxa isagana waa la asiibay…! Ilaa calanka uu qaaday seef kamid ah seefaha Alle.

Maalinkii oo dhan ayuu dagaalka socday markii habeen la gaaray qoraxdiina qarsoontay Ayuu ka faa'iideystay Khaalid Fursadaas weyn wuxuu isbaddal ku sameeyay ciidanka, kuwii Midigta ka dagaalami jiray ayuu bidix geeyay kuwii Bidixdana midig ayuu geeyay, kuwii dhaxdana horay ayuu geeyay, inta uu nidaaminta ciidanka ku jirayna wuxuu sameeyay wareeg iyo buuq si cadoowga ay ugu maleeyan in gurmad uu soo gaaray, marka uu waaga baryayn labadii ciidanna ay is hor istaageen, ayaa gaaladii waxa ay arkeen wajiyo cusub oo aysan markii hore arki jirin, markaasna waxa ay aamineen in gurmad cusub uu yimid, hoggaamiye Khaalid isagana qeyb qeyb ayuu ciidanka dagaalka uga saaray Sidaas ayuuna Khaalid ku awooday in uu ciidanka uga saaro dhibka iyaga oo uusan wax jab ah soo gaarrin Qalbiyada cadoowgana argagax ku abuuray oo xitaa gaalada waxa ay awooddi waayeen in ay soo daba galaan ciidankaas tirada yar, Khaalid Binu Waliid iyo ciidankiisa waxa ay gaareen magaalada Madiina waxaana soo dhaweeyay Nabiga scw iyo Muslimiinta.

Khaalid Binu Waliid Rc waxa uu door muuqdo kulahaa furashooyinka ay muslimiinta ka sameeyeen dhulalka Furus iyo Ruum, Abuubakar Sidiiq ayaa markii uu ka taqalusay dhibaatadii ridada ee muslimiinta awooddooda daciifin rabtay ayuu amray Khaalid in uu u jiheysto dhanka Furus iyo furashadeeda, kadib markii uu Khaalid kasoo dhammaaday dagaaladii ridada, Khaalid waxa uu ahaa hoggaamiye uu Abuubakar Sidiiq u adeegsan jiray meel walba, waxa uuna Abuubakar dhihi jiray hadal macnihiisu ahaa Illaah baan ku dhaartaye Khaalid Ayaan ku iloobayaa waswaaska Ruum iyo sheydaanka Khaalid isagana ma uusan hoojin kalsoonnida Abuubakar oo shaam ayuu ku tagay waqti aad u yar isaga oo gurmad u noqday ciidan muslimiin ah oo halkaas joogay, wuxuu mideeyay ciidanka muslimiinta ah, gaalada ruum ayuu kula kulmay waadi lagu magacaabo Yarmuuk halkaas ayuu cashirro wanaagsan ugu dhigay gaaladaas.

Aad ayey u adag tahay inaan halkaan kusoo koobo taariikhda iyo geesinimada nin ay awooddiisa iyo xirfaddiisa la yaaban yihiin xitaa gaaladii uu la dagaalamay, heer ay reer galbeedka ku tilmaameen in uu yahay Jeneraal islaami ah oo ay ka wadaan hoggaamiyaha guud ee ciidanka islaamka waana darajada ugu sareyso, qaar kaloo iyaga kamid ahna waxa ay dhaheen waa hoggaamiye ciidan kan ugu caqliga badan, doodahana si fudud uga taqaluso iyo

hoggaamiyaha ugu weyn taariikhda Banii aadamka oo dhan, taariikhdiisa iyo xirfadihiisa dagaalna waxaa lagu bartaa Jaamacaddaha iyo macaahida qaaradaha Yurub, Ameerika iyo dowladdaha Carbeedba.

Khaalid Binu Waliid Rc waxa uu ku dhintay Ximis (18ka bisha ramadaan 21 hijri), Khaalid markii ay geerida u timid indhihiisa murug ayey la ilmeeyeen ma ahan in uu geerida uu ka cabsaday ee wuxuu jaclaa shahaadada Alle dartii ah ee uusan nasiibka u yeelan, waxa uu dhintay isaga oo ay jirkiisa meel walba seef uga taalo, Alle raali haka noqdo hoggaamiye Khaalid Binu Waliid Rc.

MUXAMMAD AL-FAATIX

Qustandiiniya waad furan doontaan ood furan doontaan,
Waxaa nimco iyo kheyr oo dhan helay amiirka furta iyo ciidanka uu hogaaminaayo.

- Nabiga scw

**

Magaca Muxammad Al-Faatix maqalkiisa ayaa kugu filan qofka uu yahayna Inaad barato waa Suldaan Muxammadka labaad ahna Suldaanka todobaad ee Salaadiinta Cusmaaniyiinta, wuxuu Maamulka islaamka haayay wax ku dhaw 30 sano oo Sharaf iyo Cizi ah wuxuu Maamulka qabtay isaga oo 22 jir ah wuxuu manhaj iyo waddo ka dhigtay jidka Aabeyaashiis markii uu Maamulka qabtay wuxuu horumariyay Maamulada gobolada wuxuu dib udhis ku sameeyay ciidanka wuxuu xilka ka tuuray qof walba uu gaabis ka arkay ugu danbeyna wuxuu awoodday in uu xaqiijiyo riyo Muslimiinta ay sugayeen sideed qarni, Mujaahidiin

badan oo ay saxaabada Suubanaha ku jiraana ay naftooda iyo maalkoodaba ay u hureen balse ay awooddi waayeen xaqiijinteeda, riyadaasna waa **Furashada Caasimada ugu weyn Yurub ee Qustandiiniya** Muslimiinta waxa ay sugayeen wax ka badan sideed qarni in ay xaqiiqo u noqoto bishaarada uu Suubanaha ku bishaareeyay ee ah Furashada Caasimada Reer Yurub ee Qustandiiniya, waxa ay aheyd Yididiilo qaali ah iyo go'aanka hoggaamiye walba oo Muslim ah uu ku taami jiray mar uun in uu xaqiijiyo.

Qustandiiniya waxaa lagu tiriyaa in ay kamid tahay Caasimadaha caalamiga ah kuwooda ugu muhiimsan, waxa dhidibada loo aasay sannadkii 330 Miilaadiga waxana dhidibada u taagay Boqorkii Beyzantaaniyiinta ee lagu magacaabi jiray Qustandiinka Koowaad arrinkeeduna waa arrin cajiib ah ilaa la yiri Haddii adduunka oo dhan uu noqon lahaa hal Boqortooyo, Qustandiiniya ayaa Caasimad u noqon laheyd.

Suldaan Muxammad wuxuu bilaabay geerida Aabihiis kadib in uu dhammeystiro howsha uu ka tagay Aabihiis ee ah dhammeystirka Furashada dhulka Balqaan iyo Qustandiiniya wuxuuna dadaal dheer galiyay dhisida ciidanka Cusmaaniga ah heer tiradooda ay gaartay rubuc milyan askari, waana tiro ciidan oo aad u badan marka loo fiiriyo xilligaas wuxuu siiyay tababaro qaas ah wuxuu baray nuuc walba oo dagaal

laabtoodana wuxuu ku Abuuray marwalbana xasuusin jiray amaanta Nabiga uu amaanay ciidanka Furanaayo Qustandiiniya wuxuuna ku aqrin jiray Xadiiska Nabiga scw ee macnihiisu yahay *Qustandiiniya waad furan doontaan ood furan doontaan, Waxaa nimco iyo kheyr oo dhan helay Amiirka furta iyo ciidanka uu hoggaaminaayo* Xadiiskaasna waxa ay ka heli jireen geesinnimo iyo karti dheeraad ah, Culimadii xilligaasna kaalin buuxdo ayey ka qaateen dhisida ciidankii Qustandiiniya.

Ciidanka muslimiinta iyo hoggaamiyeyaasha islaamkaba marar badan ayey isku dayeen Furashada Qustandiiniya lagasoo bilaabo xilligii Mucaawiya Waxaa jiray iskudayo badan oo lagu doonnayay magaaladaan ugu danbeyna waxaa furtay oo gacanta ku dhigay Suldaan Muxammad AL-Faatix.

Suldaan Muxammad Inta uusan ku dhaqaaqin Furashada Magaaladaan wuxuu xirtay waddo walba uu gurmad soo mari karo si aysan ugusoo gurman Boqortooyada Trabzon, Boqorkii Ruum markuu ogaaday arrinkaas ayuu Safiir u dirsaday Suldaanka Cusmaanniyada Muxammad Al-Faatix wuxuuna dalbaday in uu bixin doonno Jizyada loo jaan gooyo, Suldaan Muxammadna wuu iska diiday arrinkaas, Magaalada Qustandiiniya waxaa saddexda dhinacba ka jiray biyo (Biyo Mareenka Al-Basfuur, Badda marmara iyo jaziirad yareey lagu magacaabo Al-Qarnu dahabi

القرن الذهبي Golden Horn) oo lagu Xiray Silsilado xoog badan si loogu xakameeyo doomaha soo galaayo, si Ciidanka Cusmaaniyiinta looga hor istaago in ay gudbaan halkaas, Dhanka kale haddaan ka eegno Qustandiiniya waxa ay kamid aheyd Magaalooyinka ugu dhufeyska iyo ciidanka adag Adduunka sababtaas darteed ayeyna ciidamo badan oo Muslimiin ah ugu fashilmeen furashaddeeda, Suldaan Muxammadna wuu u diyaar garoobay Qustandiiniya wuxuu ogaa wax walba oo ku saabsan sidoo kale wuxuu heystay qariiradada Qustandiiniya.

Maalin Khamiis ah (26 Rabiicul awal sannadkii 857 hijri) ayuu Suldaan Muxammad kulmiyay ciidanka iyaga oo tiro ahaan markaas dhammaa 250kun oo askari wuxuuna u jeediyay Khudbad xamaasad leh dhiirranaan iyo geesinnimana wuu siiyay sidoo wuxuu ku booriyay Jihaadka wuxuuna ka dalbaday Guul Ama Shahaado Sidoo wuxuu xasuusiyay Karti iyo sugnaan marka cadoowga lala kulmo wuxuu ku aqriyay aayado qur'aan ah iyo Axaadiista Suubanaha oo arrinkaas ku boorinayso wuxuu xasuusiyay fadliga iyo qiimaha ay leeyihiin ciidanka Qustandiiniya wuxuu kaloo u aqriyay xadiiska Nabiga scw ee ku saabsan furashada Qustandiiniya, ciidankii muslimiintana waxa ay hoggaamiyahooda ugu jawaabeen Takbiir iyo duco iyaga oo ay dhiirranaanta ka muuqato, Sidoo kale safka ciidanka waxaa ka muuqday culimadii islaamka ee

xilligaas waxa ayna garab u ahaayeen hoggaamiyaha iyo ciidanka.

Ugu danbeyna waxaa bilawday dagaal Leysku adeegsaday hubka nuucyadiisa kala duwan ciidankii Beyzantaaniyiinta waxa ay juhdi iyo dadaalba galiyeen sidii ay u badbaadin lahaayeen magalaadooda Waxa ay buux dhaafiyeen dhufeysyada Magaalada, Madaafiicda Cusmaanniyada waxa ay kaalin buuxdo ka qaadanayeen cabsi galinta qalbiyada cadoowga.

Culimadii karishtaanka ahaa iyagana waxa ay dhax wareegayeen wadooyinka magaalada iyaga oo dhiiragalinaayay ciidankooda karishtaanka ah si ay ugu sugnaadan dagaalka oo aysan dhabarka u jeedin, dadkii shacabka ahaana waxa ay u diraayeen kanniisadaha si ay usoo duceeyaan.

Ugu danbeyn Geesiyadii islaamka waxa ay gudaha u galeen Magaalada Qustandiiniya, Suldaan Muxammad wuxuu gudaha u galay Magaalada, isla markaas wuxuu u sujuuday una mahdiyay Rabbiga guushaas qiimaha badan siiyay kadibna wuxuu aaday dhankii kanniisada Aaya Soofiya, Dadkii karishtaanka ahaa aad ayey uga cabsadeen markaasna mid kamid culimadooda ayuu ku yiri dadka daji oo guryahooda si nabad leh ha ugu laabtaan naxariistaan iyo cafiskaan uu suldaanka

sameeyay waxaa kusoo islaamay qaar kamid ah Culimadii karishtaanka.

Qustandiiniya markaas kadib waxa ay noqotay Caasimada islaamka, Waxaa lagu magacaabay Islaambuul oo laga wado magaalada islaamka, Suldaan Muxammadna markaas kadib waxaa lagu magacaabay Suldaan Muxammad Al-Faatix.

SULEYMAAN AL-QAANUUNI

Waxaan Jeclahay inaan dhinto anigoo Alle dartii duulaan u ah

- Suleymaan Al-Qaanuuni

**

Suldaan Suleymaan Al-Qaanuuni Wuxuu ku dhashay Magaalada Trabzon ee wadanka Turkiga Wuxuu Maamulka Dowladda Cusmaanniyada la wareegay kadib geerida Aabihiis isagoo 26 jir ah, Go'aammadana si adag ayuu uga fikiri jiray mana uusan ka laaban jirin go'aan uu mar qaatay.

Markii uu qabtay Maamulka dowladda wuxuu la kulmay madax taagyo badan oo dhanka maamuladii hoos imaan jiray dowladda ah, iyadoo maamul walbaa uu go'aansaday in uu balaariyo gobolkiisa, gudoomiyaha Shaam oo lagu magacaabi jiray Janbirdi Al-Ghazaali ayaa kamid ah dadkii ka madax taagay maamulka Dowladda

wuxuuna isku dayay in uu qabsado magaalada Xalab balse wuu ku fashilmay arrinkaas, Suldaan Suleymaan ayaa amray in la damiyo fitnadaas, ugu danbeyna waala damiyay ninkii fitnada Abuuraayayna madaxiisa ayaa Istanbuul loo diray.

Fitnada labaad waxaa hoggaaminaayay nin lagu magacaabay Axmed shaah oo ah nin Qaa'in ah ninkaan hadafkiisa wuxuu ahaa in uu gudoomiye ka noqdo Masar, Suldaanka ayuuna ka dalbaday in uu garab ku siiyo arrinkaas ugu danbeyn xilka uu rabay ayaa loo magacaabay, markii uu tagay Masar wuxuu isku magacaabay in uu yahay Suldaan ka madaxbanan dowladda, kadibna culimadii iyo ciidankii Cusmaaniyiinta ee Inkishaariyiinta ahaa ayaa kasoo hor jeestay Maamulkiisa ugu danbeyna wey dileen.

Fitnooyin kalena wey jiraan waxaana soo abaabulay Shiicada iyaguna waxa ay mareen waddada kuwaan oo kale.

Arrimaha cajiibka ah ee dhacay xilligii suldaan Suleymaan waxaa kamid ah dagaalkii Mohaakis.

Dagaalka Mohaakis wuxuu dhacay (sannadkii 932 Hijri ama 1526 Miilaadi) wuxuuna dhaxmaray Ciidanka Khilaafada islaamka oo uu hoggaaminayay Suldaan Suleymaan Al-Qaanuuuni iyo Boqortooyada Masiixiga

ah ee Majar dagaalkaasna muslimiinta ayey guusha ku raacday, sababta dagaalkaan waxa ay aheyd Boqorkii Majar oo lagu Magacaabi jiray Faylaadkii labaad ayaa go'aansaday In uu buriyo heshiis dhaxmaray Majar iyo Cusmaaniyiinta, intaas kuma ekaan ee wuxuu dilay Fariinside uu dirsaday Suldaan Suleymaan, Fariinsidahaas oo loo diray jizyada sannadlaha ah ee Boqortooyada Majar lagu xukumay in uu soo qaado, dilka fariinsidahaas kadib Suldaanka Cusmaaniyiinta ee Suldaan Suleymaan Al-Qaanuuni wuxuu yiri Ma waxaa la dilay fariinside islaam ah aniga oo nool, Yurub bari ayey ogaan doontaa cirib xumada waxa ay fashay''.

(11 bisha rajab sannadkii 932 hijri) Suldaan Suleymaan ayaa Magaalada Istanbuul ka baxay isaga oo hoggaaminaayo ciidan lagu qiyaasay boqol kun oo askari iyaga oo wato Saddex boqol oo madfac iyo siddeed doomood, ugu danbeyn 128 maalmood kadib ayuu tagay Goobta Dagaalka oo Mohaakis ah, ciidanka masiixiga ah ee Majar iyaguna tiro ahaan waxa ay dhammaayeen labo boqol oo kun oo askari waxaa hoggaanka u haayay Boqorkii Majar Faylaadkii labaad.

Salaada Subax kadib (11 Bisha Dul qacda) ayuu Suldaan Suleymaan Ciidanka u jeediyay Khudbad aad u xamaasadeysan wuxuu ku booriyay dulqaadka iyo sugnaanta sidoo kale wuxuu yiri kalimad ciidanka dhan

ka ilmeysiisay Saameyn badanna ku yeelatay wuxuu Jiri Kasoo qaada Ruuxda Nabiga scw in ay idin jeedo.

Xilligii casarka ayey ciidanka Majar dagaal kusoo qaadeen ciidankii Cusmaaniyiinta oo Saddex saf isku qeybiyay Suldaanka iyo Madaafiicdiisa wax gummaada iyo ciidankii inkishaariyiinta waxa ay joogeen safka saddexaad, Fardooleyda ciidanka Majar oo caan ku ahaa dagaalka in ay ku horeeyaan ayaa dagaal soo qaaday markaasna Suldaanka wuxuu amray ciidanka safka hore in ay gadaal usoo laabtaan si ciidanka gaalada ay gudaha usoo galaan Kadibna sidaas Madaafiicda loogu laayo Markii ay gudaha soo galaan, Markii ay gudaha soo galeen Madaafiicdii ayaa lagu dhammeeyay dagaalka wuxuu socday Saacad iyo bar Waxaa dagaalkaas jab xooggan kala kulmay ciidankii Majariyiinta oo badankood halkaas ku dhammaaday sidoo kale waxaa laga qafaashay Shan iyo labaatan kun oo askari, ciidanka Cusmaaniyiinta dagaalkaas waxaa kaga shahiiday 150 askari, Arrinka Cajiibka leh ee qisada Mohaakis waa in ay muslimiinta ogaadeen in Shiicada Safawiyiinta ay garab siinayeen gaalada Saliibiyiinta ah iyaga oo ka taageerayay habka dagaal galinta iyo waxa lamidka ah, dagaalka Mohaakis marka uu dhammaaday Suldaanka ayaa amray ciidankiisa in ay dhanka bari u jiheystaan si ay usoo edbiyaan shiicada halkaas ku kibirtay, Arrinka kale ee layaabka leh ayaa ah in Shiicada ay qodayeen ama faagayeen qabriga imaam Abii Xaniifa, Suuqyada

Baqdaad ayey dhax wareegayeen iyaga oo leh qofkii rabo dantiisa in loo fuliyo ha ula tago qabriga Abii Xaniifa, Ugu danbeyna Shiicadaas iyo wasaqdoodaba waa laga nadiifiyay magaalada Baqdaad muddo shan qarni ah Waxa ayna markale dib ugu laabteen 2003.

Suldaan Suleymaan howlaha uu qabtay intaas kuma eka ee waxa uu furtay jasiirada Roodos[4], (Rhodes – جزيرة (رودوس oo xilligaan ku taalo gariiga, jasiiradaani waxa ay aheyd jasiirad fowdo badan waxaana dagenaa ciidanka qidiis Yooxanna (القديس يوحنا), ciidankaas waxa ay wadada ugali jireen muslimiinta turkida ee xajka aadi jiray intaa waxaa usii dheera in dhibaatooyin u geysan jireen badmareenada Cusmaaniyiinta, Suldaankana waxa uu ku dadaalay sidii uu ku furan lahaa jasiiradaas isaga oo diyaarsaday ciidan xooggan, furashada jaziiradaas Suldaanka waxaa ka caawiyay dhowr arrimood oo ay kamid yihiin:

- In gaalada roomaanka iyo kuwa faransiiska ay isku mashquulsanaayen iyaga oo dagaal weyn uu ka dhaxeeyay.

[4]) Waa jasiirad Giriig ah oo ku taal badda Mediterranean-ka.

- Badmareenada Cusmaaniyiinta oo si aad ah u kordhay xilligii Suldaan Saliimka koowaad ee Khilaafada Cusmaaniyiinta.

Suldaan Suleymaan dagaal xooggan ayuu ku qaaday jaziiradaas sannadkii 1522 miilaadiga.

Suldaan Suleymaan Al-Qaanuuni Alle raali haka noqdee inta uu suldaanka ka ahaa dowladda waxa uu gaarsiiyay horumaro badan heer xilligii uu maamulka dowladda haayay lagu sheego in uu ahaa xilliga dahabiga ee dowladda Cusmaaniyiinta, intaas oo kaliya kuma uusan ekeyn ee xitaa waxa uu saameyn balaarana ku dhax lahaa dowladdaha caalamka qaasatan dowladdaha reer Yurub, maadaama kala qeybsanaan daran ay ka jirtay siyaasad ahaan iyo diin ahaanba, sidaas darteedna dowladdaha reer Yurub aragtiyada ay ka aamisanaayen dowladda Cusmaaniyiinta ayaa kala duwaneed, boqorka roomaanka oo lagu magacaabay Charles shannaad (تشارلز الخامس) waxa uu tartan kula jiray boqorka faransiiska oo lagu magacaabay Francisco koowaad (فرانسوا الاول) liyoo iyo Martin oo culimadooda ahaa iyagana tartan ayaa ka dhaxeeyay.

Boqorka Faransiiska Francisco koowaad (فرانسوا الاول) isaga oo fursadaas ka faa'iideysanaayo ayuu Suldaanka Khilaafada Cusmaaniyiinta usoo bandhigtay isbaheysi in uu la sameysto, suldaankana waa uu ka aqbalay.

Sannadkii 1525 miilaadi ayaa waxaa dagaal dhexmaray boqortooyada roomaanka iyo boqorka faransiiska Francisco koowaad, boqorka roomaanka ayaa guul ka gaaray dagaalkaas isaga oo boqorka faransiiskana qafaashay, Francisco ayaa waxa uu farriin gurmad ah u dirsaday Suldaanka dowladda Cusmaaniyiinta isaga oo ka dalbanaayay in uu ka xorreeyo boqorka roomaanka, Suldaan Suleymaan isagana waxa uu ugusoo jawaabay farriin udhigan sidaan:

Waxey ka timid suleymaan Waxeyna Ku Bilaabaneysaa Magaca Alle, Waxaan ahay Suldaanka Suldaamada, Suldaanka Badda Cad, Badda madow, Badda Cas, Suldaanka Anadol, Rumaliya, Qaramana Ruum, Diyaar bakar, Kurdistaan, Azerbijan, Masar, Makka, Madiina, Dimishiq, Xalab, Qudus iyo dhamaan Dhulalka Carabta iyo yaman, Dhulkaas Fidsan waxaa awoodooda ku furtay Aabeyaasheyda iyo awooweyasheyda Sharafta badan Alle ha unaxriiste, Imisa Wadan ayaan ku furtay Seefteyda Guusha u Saaxiibka ah

Ka timid Suldaan Suleymaan Khan ahna wiilka uu dhalay suldaan saliim khan ahna wiilka uu dhalay Suldaan Baayazasiid Khan kuna socoto Francis i, boqorka faransiiska, waxaanu helnay farriinta aad lasoo dirteen fariinsidihiina lagu magacaabo FRAN CPAN iyo

Xooga war ah oo aad hadal ahaan ugusoo dhiibteen, wuxuuna inoo sheegay in cadoowgiinna uu qabsaday dhulkiina haddana aad ku jirtaan xabsi gurmad iyo badbaadana aad ka sugeysaan dhankeenna, waxwalba oo aad tiri waxaa leygusoo bandhigay sariirta qasrigeyga horteeda, cilmigeyga sharafta leh ayaan ku ogaaday waxwalba, layaabna malahan boqorada in la Xabiso, laabta dajiso oo maskaxdaada ha mashquulin sababtoo ah aabeyaasheyda iyo awooweyaasheyda sharafta badan qabriga Alle ha u nuuriyee dagaal la'aan ma aysan joogi jirin si ay u furtaan dhulal cusub cadoowgana isaga difaacaan, annaguna sidooda oo kale ayaan nahay oo jidkooda ayaan qaadeynaa, marwalbo waxaa la furtaa dhulal adag iyo dhufeysyo la adkeeyay, habeen iyo maalin fardaheennu waa kuwo kooreysan oo diyaarsan seefaheenuna waa kuwo gal baxsan, hadalka inta hartay waxaad ka ogaan doontaan farriinsidihiina.

Suldaan Suleymaan waxa uu dhintay 7da bishii September sannadkii 1566 miilaadi isaga oo go'doomin ku haayay Magaalada Sectwar[5] (مدينة سيكتوار) si caadi ah ayuu udhintay, Suldaanka dardaarankiisa waxa uu ahaa,

[5]) Waa magaalo ku taal Gobolka Baranja, ee koonfurta Hungary

marka la aasaayo in lala aaso sanduuq, markii uu dhintay ee la rabay in sanduuqa lala aaso ayey culimada diiden , markaasna waxaa loo sheegay dardaaranka suldaanka inuu yahay, culimada ayaa arrinkaas ku wareeray waxa ayna go'aamiyeen in sanduuq la furo, markii la furay sanduuqa ayaa waxaa lagu dhax arkay wax culimada ay la yaabeen, waxaa lagu arkay fatwooyinka ay siin jireen culimada, Sheekhul islaam Abuu Sacuud ayaa iska ooyay markaas isaga oo yiri Suleymaanoow adiga naftaada waad furatayee, inaga cirkee ina hareyn doonno, dhulkeese ina aqbali doonno hadeynu ku qaldano fatwooyinkeenna.

YUUSUF BINU TAASHAFIIN

Yuusuf Binu Taashafiin waxa uu ahaa nin dulqaad badan oo deeqsi ah culimada iyo diintana jecel aadna u karaameeyo culimada haddii midkood uu wacdiyo waa uu khushuuci jiray.

- Ibnul Athiir

**

Imaamu dahabi kitaabkiisa (Siyar Aclaam An Nubalaa) isaga oo ka hadlaayo Yuusuf Binu Taashafiin waxaa uu leeyahay Yuusuf Binu Taashafiin waxa uu ahaa nin cafis badan oo culimada soo dhaweysto, wuxuu ahaa nin caato ah oo midab maariin ah leh, hadalkiisana jilcan yahay oo go'aan adag.

Ibnul Athiir Isagana Kitaabkiisa (Al-Kaamil) waxa uu ku leeyahay Yuusuf Binu Taashafiin waxa uu ahaa nin dulqaad badan oo deeqsi ah culimada iyo diintana jecel aadna u karaameeyo culimada haddii midkood uu wacdiyo waa uu khushuuci jiray.

Hoggaamiyaha tilmaamahaan wanaagsan leh cidkale ma ahan waa Amiirul Muslimiin Yuusuf Binu Taashafiin hoggaamiyaha dowladda Al-Muraabidiin oo ka talin jirtay waqooyi galbeed Afrika xilligii khilaafada Cabaasiyiinta, Yuusuf hadafkiisa wuxuu ahaa in ay muslimiimta oo dhan ku hoos noolaadaan hal calan hoostiisa (Calanka Nabiga scw), Ma uusan rabin in uu kala geeyo wadajirka Muslimiinta ama in uu afganbi ku sameeyo khilaafada Cabaasiyiinta marwalba damaciisa wuxuu ahaa in uu awooddiisa ku biiriyo awoodda Khilaafada islaamka ee Cabaasiyiinta asagana uu kamid noqdo ciidanka khilaafadaas.

Sannadkii 478 Hijri waxaa gacanta Muslimiinta ka baxday magaalada Toledo[6] (طليطلة) oo ku taala Andalus waxaana la go'doomiyay magaalada Ishbiiliya[7] oo isla Andalus ah inkastoo ay ku taalay koonfur galbeed Andalus ayna ka fogeed Boqortooyada Qashtaala[8] ee karishtaanka Aheyd taaso dhacday waqooyiga Andalus, culimada iyo shacabka Andalus waxa ay gurmad ka

[6]) waa Magaalo Isbaanish ah oo ku taal meel 75 kiiloomitir koonfur ka xigta caasimadda Spain ee Madrid

[7]) waa maamul gobaleed ka tirsanaa boqortooyada qashtaala

[8]) waa mid ka mid ah boqortooyooyinkii dhexe ee Jasiiradda Iberian.

dalbadeen dowladda Muraabidiinta ee uu hoggaanka u haayay Yuusuf Binu Taashafiin, bal inta aynaan ka hadlin Gurmadka Muraabidiinta aan waxyar dib ugu laabano xaalada Andalus ee xilligaas.

Andalus waxa ay soo martay xilliyo iyo xaalado adag xilli dulinnimo iyo tabar darri ah xilli muslimiinta aysan wadajir aheyn oo ay noqdeen qolo qolo iyo dowladdo yaryar oo tiradooda lagu sheegay 22 dowladdood Tartan adagna uu ka dhaxeeyay, qaarkoodna ay la heshiiyeen Boqortooyada karishtaanka si ay uga adkaadan dowladda ay is hayaan ee walaalaha yihiin, bal aan hadda dib ugu laabano gurmadka Muraabidiinta iyo sababtiisa.

Boqorka Qashtaala Al-Foonsoga Lixaad ayaa fariin jeesjees ah usoo diray Boqorka Ishbiiliya Al Muctamad Binu Cabaad isaga oo ka dalbanaayo Marwaxad uu naftiisa ku qaboojiyo, Ibnu Cabaad isma uusan dhibin ee warqada dhinaceeda kale ayuu ugu qoray jawaabta wuxuuna yiri Wallaahi haddii aadan joogin Waxaan kugu babin doonna marwaxada Muraabidiinta oo uu ula jeeday seefahooda, Al-Foonso cabsi ayaa gashay markaas, Andalus oo dhanna waxaa ku faafay jawaabta Ibnu Cabaad iyo goodintiisa uu gaalada ugu goodiyay ciidanka Muraabidiinta, dadkiina aad ayey ugu farxeen laakiinse Boqoradii yaryaraa ayaa ku mucaaraday arrinka iyaga oo qaarkood ay ku dhaheen laba seef

halmeel kamawada taliyaan qaar kalena waxa ay dhaheen Ma waxaad rabtaa inaad noo keento kuwaas reer baadiyaha ah ee geela dhaqdo si ay ula dagaalamaan Al-Foonso kadibna markii ay ka guuleystaana ay nooga qaatan dhulkeenna cagaaran iyo maamulkaba Lakiin Ibnu Cabaad wuxuu ku yiri hadal cajiib ah Wallaahi inaan geela Saxaraha ku raaco ayaa iiga fiican inaan doofaarada ku raaco Yurub Kadib ayey badankood waafaqeen go'aanka Ibnu Cabaad sidaas ayeyna gurmad uga dalbadeen hoggaamiyaha dowladda Muraabidiinta.

Sannadkii 478 Hijri ayuu Yuusuf qaabilay wafdiga uga yimid dhanka Andalus waxa ayna ka dalbadeen gurmad iyo garabsiin isla markiiba Yuusuf wuxuu diyaarsaday ciidankiisa iyo doomaha ay ku bixi lahaayeen, Mar ay marayeen biyo mareenka Jabalu Daariq ayey dabeyl kacday, baddana wey kacday doomihiina waxa ay ku sigteen in ay maashoodan, Markii ay xaaladdu sidaas noqotay ayaa isaga iyo ciidankiisaba gacmaha samada u taagteen iyaga oo is duleyn iyo adoonnimo iyo khushuuc muujinaayo waxa ayna dhaheen *Illaahow haddii aad ogtahay maritaanka aan inta mareyno in uu kheyr iyo wanaag ugu jiro Muslimiinta Illaahow inoo fududeey maritaankiisa, haddiise Muslimiinta uusan wanaag ugu jirina Illaahow nagu adkey si aynaan u gudbin* Isla markiiba dabeyshii ayaa istaagtay meeshiina wey ka gudbeen markii ay gaareen meesha ay u socdeen

oo Andalus ah Sujuud ayey la dhaceen iyaga oo Alle u mahadcelinaayo.

Yuusuf iyo ciidankiisa waxa ay galeen dhulka Andalus magaalada Ishbiiliya dadkuna waxa ay usoo dhaweynayeen sida ciidan dagaal kusoo guuleystay kadibna Yuusuf wuxuu aaday meel lagu Magacaabo Badliyoos oo udhaw Zalaaqa meeshas oo uu horay u dagay Al-Foonso.

Ciidanka Yuusuf Binu Taashafiin waxaa garab socday Mujaahidiin ka kala yimid Qurduba, Ishbiiliya iyo Badliyoos sidii ay usocdeenna waxa ay tageen Zalaaqa meesha lagu magacaabo, tirada ciidankana waxa ay aheyd 30 kun oo askari, hoggaanka ciidanka Muslimiinta waa Yuusuf Binu Taashafiin goobtuna waa Zalaaqa meesha uu ka dhici doonno mid kamid ah dagaalada ugu cajiibsan taariikhda Islaamka, Ciidankii karishtaanka ahaa waxa ay u diyaar noqdeen in ay ka hor tagaan Yuusuf Binu Taashafiin tiradooduna waxa ay gaareysaa 300kun oo askari hoggaankana waxaa u haaya Al-Foonso oo wato calaamada kirishtaanka iyo sawirka masiix (sida uu sheeganaayo) sidoo kalena wuxuu dhahaayay Ciidankaan ayaan kula dagaalami doonna Jin iyo insiba iyo xataa Malaa'igta Samada, ciidankaan Ayaan kula dagaalami donna Muxammad iyo Asxaabtiisaba.

Al-Foonso boqorka Qashtaala ee kirishtaanka ah ayaa fariin kibir iyo faan ah u diray Yuusuf Binu Taashafiin, hoggaamiyaha ciidanka muslimiintana wuxuu ugusoo jawaabay sidaan Waxaa inasoo gaaray inaad ku duceysatay kulankeenna, oo aad damacday inaad hesho doomo, si aad Badda noogusoo gudubto balse annaga ayaaba kusoo gudubnay Alle ayaana inagu kulmiyay barxadaan anaga iyo adinkaba, cirib xumada ducadaadana waad arki doonta, kadibna Yuusuf wuxuu ubandhigay Saddex qiyaar mid in ay doortaan Islaamnimo ama jizyo in ay bixiyaan ama aagaal, Al-Foonso markuu aqriyay fariinta aad ayuu u xanaaqay wuxuuna yiri Ma hadalkaan oo kale ayuu iigula hadlayaa, aniga oo jizyada ka qaadi jiray dadka ay isku diinta yihiin muddo 80 sano ah Kadibna fariin kale oo goodin ah ayuu u diray Yuusuf wuxuna yiri Waxaan doortay dagaalka ee maxaad ka baddaleysaa isla markiiba Yuusuf warqada dhinaceeda kale ayuu ugu qoray jawaabta wuxuu yiri Jawaabtu waxa ay noqonneysaa wax aad aragto ee ma ahan wax aad dhagahaaga ku maqleyso.

Al-Foonso Wuxuu ogaaday nin uusan awood u laheyn in lagu imtixaamay, Yuusuf ayuu fariin kale u diray wuxuuna ku yiri Bari waa maalin jimco ah, waana ciida Muslimiinta annaguna ma dagaalano ciidaha muslimiinta, Sabtigana waa ciida Yuhuuda, ciidankeennana waxaa ka buuxo Yuhuud badan,

Maalinka Axada ahna waa annaga ciideenna ee dagaalka noogu dib dhig Maalinka Isniinta ah Balse Yuusuf Binu Taashafiin wuxuu ogaa Salibiiyiinta kirishtaanka waligood in ay balan oofin ciidankiisa ayuu ka dalbaday feejignaan iyo diyaar garoow in ay galaan.

Al-Foonso ayaa waxa uu hurdada ku arkay riyo cajiib ah sida isaga oo saran Maroodi, riyadii ayuu ku wareeray kadibna culimadii kirishtaanka ayuu weydiiyay tafsiirkeeda weyna u jawaabi waayeen, Nin Yuhuudi ah oo meesha joogay ayaa riyadii u keennay nin muslim ah oo riyooyinka fasiro, ninkii Muslimka ahaa ayaa riyada u fasiray wuxuu yiri waxa ay daliil u tahay Musiibo weyn oo idinkuso socoto, ninkii Yuhuudiga ahaa ee riyada loo fasiray Tafsiirka riyada uma uusan sheegin Al-Foonso ee wuu ka qariyay, Isla habeenkaas nin kale oo Sheekh Muslim ah oo lagu Magacaabo Ibnu Rumeyla ayaa hurdada ka kacay riyo uu arkay awgeed wuxuuna si toos ah u aaday teendhada Yuusuf Binu Taashafiin isaga oo faraxsan wuxuu yiri Caawa waxaan riyada ku arkay Nabiga scw wuxuuna igu yiri waad guuleysan doontaan, adigana xageenna ayaad imaaneysaa Ciidankii Muslimiinta waxa ay is qabsadeen Takbiir, Yuusuf ayaa markaas wuxuu amray in ay aqriyaan Suuratu Anfaal iyo in ay tukadaan Salaatu Leyl.

Subax Jimco ah Ciidankii Mujaahidiinta ahaa oo faraxsan ayuu Al-Foonso isku dayay in uu qiyaamo,

ciidankiisa ayuu soo watay balse barxada dagaalka wuxuu ugu yimid Ciidan shahaadada u ooman oo dhiirranaan ay ka muuqato, halkaasna waxaa ku dhaxmaray dagaal loogu magacdaray dagaalkii Zalaaqa Muslimiinta ayaa ku guuleystay dagaalkaas markii ugu horeysay muddo sannooyin badan ah kadib Ciidanka Muslimiinta ahna halkaas waxa ay ka heleen Qanniimo fara badan, balse Yuusuf iyo Ciidankiisa halkaas waxba kama aysan qaadan waxa ayna u laabteen dhulkii ay ka yimaadeen markii hore, dowladdihii yaryaraa ee ka jiray Andalus ayagana isqab qabsigooda ayey ku laabteen, Reer Andalus ayaa markale Yuusuf ka dalbaday in uu ka xoreeyo dowladdaha yaryar ee is heysta balse wuu ka diiday cabsi uu ka cabsanaayay in uu la dagaalamo Muslimiin laakiin culimadii islaamka ayaa fatwooday in Andalus la hoos keenno Maamulka Muraabidiinta sidaas ayeyna Andalus uga mid noqotay Maamulka Muraabidiinta dowladdihii yaryaraana sidaas ayaa lagusoo Af jaray.

MAXAMUUD BINU SUBAKTIKIIN

…waxa aan jeclahay qiyaamaha in leygu yeero aaway Maxamuudkii sanamka dumiyay inta leygu wici lahaa aaway kii sanamka uga tagay hanti darteed

- Suldaan Maxamuud

**

Marwalba oo aad taariikhdeenna si qoto dheer u aqriso, Nolosha Muslimiintii horena aad u baarto waxaad ogaaneysaa qiimaha taariikhdeenna islaamka ee aan ka indha la'nahay, halka Cadoowgeenna ay marwalba daraaseeyaan oo baaraan si ay wax uga faa'iidan, annagana waxaan ku dhacnay godkii ay inoo qodeen ee mugdiga ahaa kaas oo inoo sababay inaan garan weyno cida aan nahay, horaa loo yiri Ummad aan aqoon taariikhdeeda, Mustaqbalkeeda ma maareyn karto.

Suldaan Maxamuud Binu Subaktikin Wuxuu dhashay (2 bisha November sannadka 971 Miilaadi) Wuxuu ahaa

hoggaamiyaha dowladda Qaznawiyiinta[9] intii u dhaxeysay 998 ilaa 1030 miilaadi oo ah xilligii Khilaafada Cabaasiyiinta, Suldaan Maxamuud Wuxuu furashooyin badan ka sameeyay dhulka hindiya, pakistaan iyo meelo badan, wuxuu burburiyay Sanamkii Sumnaat oo ay Hindida weyneyn jireen**,** wuxuu gaaray guulo badan Waxaa lagu magacaabay magacyo badan waxaa kamid ah magacyadaas **Geesiga islaamka**.

Suldaam Maxamuud Marwalba uu dhul furto ama Sanam burburiyo Hindida waxa ay dhihi jireen Sanamyadaan iyo dhulalkaan waxaa u carooday Illaaha weyn ee Sumnaat (oo ah sanamka ay caabudi jireen) haddii uu sumnaat raali ka ahaan lahaa, Wuxuu halaagi lahaa qofwalba oo dhinacooda soo aada Suldaankana waxaas ahmiyad ma siin jirin ilaa magaca Sumnaat uu hindida ku dhax faafay, Kadib ayuu weydiiyay waxa uu Sumnaat yahay waxaana lagu yiri Waa Sanamka ugu weyn iyo Illaaha ay caabudaan hinduuska, waxa ay aaminsan yihiin nafta marka ay qofka ka baxdo in ay asaga u tagto kadibna uu kusoo celiyo qofka uu rabo.

---

[9]) waa midka kamid dowladdihi islaamka ee ka taliyay hindiya iyo wadamada udhaw

Sumnaat waxaa dhinaciisa joogo Kun faalaloow iyo Saddex boqol oo nin oo dadka timaha iyo garka ka xiiro, iyo Saddex boqol oo nin iyo shan boqol oo naag oo Albaabka Sanamka heeso ka qaado kuna ciyaaro, Suldaan Maxamuud markuu helay warbixinta Sanamka oo dhammeystiran ayuu go'aansaday in uu burburiyo sanamka, Macbadka uu ku yaalana uu furto, isaga oo is leh hindida haddii ay waayaan sanamka oo ay ogaadaan beenta iyo baadilka Meesha lagu haayo diinta islaamka ayey soo gali doonnaan, Suldaanka hadafkiisa wuxuu ahaa Islaamka in uu u shaqeeyo, diinta islaamkana uu faafiyo wuu Istiqaareystay kadibna ciidankiisa ayuu hoggaamiyay (10ka shacbaan 416 hijri), Wuxuu jaray dhul dheer oo Biyo la'aan iyo haraad ah si uu usoo burburiyo sanamkaas, waxa ay isku dhaceen ciidamo badan oo hinduus ah, hindida wey ogaayeen Suldaanka hadafkiisa in uu yahay sanamka, waxa ay islahaayeen Sumnaat asaga ayaa is badbaadinaayo, Suldaanka wuxuu yimid magaalo waxyar u jirto Sumnaat dadkii halkaas daganaa ayaa dagaal la galay iyaga oo isleh Sumnaat ayaa idin difaaci doonno, balse Suldaanka wuu qabsaday ciidankiina afka ayuu dhulka u daray, Socodkiisa ayuu watay ilaa uu Sumnaat ka gaaray maalin khamiis ah (15ka dil-qacda 416 hijri), ciidanka muslimiinta waxa ay arkeen dhufeys adag oo wabiga dhinaciisa ku yaalo, dadkiisana ay daawanayaan

Muslimiinta iyaga oo kalsoonni ku qabo sanamkooda Sumnaat ah in uu difaaci doonno.

Maalin jimco ah (16 dil-qacda 416 hijri) Markii ay qoraxda u jiheysatay dhankii dhicitaanka ayey ciidanka Muslimiinta iyo hoggaamiyahooda geesiga islaamka ayagana u jiheysteen dhankii Sanamka, dagaal xooggan ayey la galeen hinduuskii, dharbaaxo xooggan ayey ku dhufteen sababtoo ah hinduuska waxa ay umaleynayeen Illaahooda Sumnaat in uu difaaci doonno uuna garab istaagi doonno, ciidankii Muslimiinta ahaa darbiyada Magaalada ayey ka iclaamiyeen Towxiidka, Takbiir ayey is qabsadeen, isla markaas waxaa adkaaday dagaalkii, Hinduuskii iyaga oo koox koox ah ayey isku gureen Macbadkooda wajiyada ayey gaduudsadeen Sumnaat ayey ka dalbadeen in uu u gargaaro iyaga oo halkaas ku ooyay kadib waxa ay usoo baxeen dagaalka dhammaantood wey dagaalameen, marba koox ayaa sidaas sameyneesay, waxa ay ku dagaalameen Albaabka Macbadka uu Sanamka yaalay dagaal midka ugu daran ilaa konton kun halkaas looga dilay, Markii ay dareemeen in ay sii dhammaanayaan ayaa inta soo hartay isku dayeen in ay baxsadaan dooman ayey ka qaateen wabiga balse libaaxyadii Muslimiinta ee dhiigga cadoowga u oomanaa ayaa ka hari wayay oo midna kama baxsan Maalintaasna gaalada aad ayey ugu cusleyd, Suldaan Maxamuud wuxuu amray in la burburiyo Sumnaat, dhagaxdiisana wuxuu ku dhisay

masjidka weyn ee Ghazna isagoo Alle ugu mahadcelinaayo.

Inta uu socday dagaalkaan qaar kamid odayaasha hinduuska ayaa dalbaday in ay la kulmaan Suldaanka waxa ay ubandhigeen hanti aad u badan iyo adduun lacageed si uu uga leexdo Sanamka Sumnaat dibna uu isaga laabto, iyaga oo is lahaa Muslimiinta uma aysan imaan wax aan lacag iyo hanti aheyn, Suldaan Maxamuud wuxuu la tashtay hoggaamiyeyaashiisa waxa ayna kula taliyeen in uu ka aqbalo lacagta, Suldaanka habeenka ayaa u baryay isagoo istiqaareysanaayo Rabbigiisna la tashanaayo markuu waaga baryay ayuu go'aamiyay in la dumiyo Sanamka oo aan la aqbalin hantidooda wuxuuna yiri hadalkiisa cajiibka ah Arrinka la sheegay waan ka fikiray waxa aan jeclahay qiyaamaha in leygu yeero aaway Maxamuudkii sanamka dumiyay inta leygu wici lahaa aaway kii sanamka uga tagay hanti darteed.

Allaahu Akbar taasi waa karaamo uu Allaah swt siiyay Suldaankaan qiimaha badan oo furashooyinkiisa oo dhan ka dhigay kuwo Alle dartii ah iyo sidii uu u kor yeeli lahaa kalimada Alle.

Suldaan Maxamuud har iyo habeen waxa uu u taagnaa jihaadka Alle dartii ah kama uusan caajisin mana uusan ka daalin, ilaa markii dambe uu caloosha ka

xanuunsaday maalmihiisa ugu danbeeyay, maalinba maalinta ka danbeyso xanuunkiisa ayaa kordhi jiray isagana dadka hortooda ayuu ugu dulqaadan jiray, maalin khamiis ah 23ka bisha rabiicul aakhir sannadkii 421 hijri kuna beegan 1030 miilaadi ayuu ku dhintay magaalada Ghazna qabrigiisana halkaas ayuu ku yaalaa, isaga oo xukunka haayay 35 sano, calanka islaamkana waxa uu gaarsiiyay meelo aan markii la gaarsiinin, Alle raali haka noqdo'ee.

SAYFU DIIN QUDUS

Yaa islaamka difaacaya, hadeynaan inagu difaacin

- Sayfu Diin Qudus

**

Wuxuu kasoo jeeda qoyska Boqortooyada Khawaarsimiyiinta, sidoo kale wuxuu hoggaanka u qabtay boqortooyada Mammaaliikta Wuxuu soo maray adoonnimo, Sidoo kale wuxuu hoggaamiyay mid kamid ah dagaalada ugu waaweyn ee ay Muslimiinta galeen, guul lixaad lehna wuxuu usoo hooyay Muslimiinta magaciisa waa Maxamuud Binu Mamduud Binu khawaarsim-Shaah (Boqorka Guusha), Sayfu Diin Qudus magacaas oo kaliya ayaa kaaga filan qofka uu yahayna in aad ogaato.

(25 bisha ramadaan 657) oo ku beegan (3 September 1260) Waxaa dhacay mid kamid ah dagaalada ugu waaweyn ee Muslimiinta iyo gaalada dhexmaray, dagaal xaqqa iyo baadilka kala saaray Muslimiintana ay guul lixaad leh ka gaareen Mangooliskana u noqday markii

ugu horeysay oo dagaal nuucana lagu jabiyo waxaa lagu qasbay gabi ahaanba in ay isaga baxaan dhulka Shaam is balaarrintii ay wadeenna halkaas ayaa lagu hakiyay.

Mangooliska ayaa waxa ay duulan kusoo qaadeen Caalamul islaami qarnigii todobaad bilawgiisa iyadoo hoggaanka uu u hayay ninka lagu Magacaabo Jinkis Khan, duulankii ugu horeeyay waxa ay ku qaaden Dowladdii Khawaarsimiyiinta oo dhulka Faaris ka talinaysay, Waxa ay burburiyeen Magaalooyin badan waxa ay dileen khalqi fara badan isla ficilkaas oo kale Moonko Khan ninka lagu Magacaabo oo hoggaaminayay Mangooliska ayaa ku sameeyay dowladda Cabaasiyiinta, ilaa ay burburiyeen Caasimada dowladda Cabaasiyiinta (4 bisha Safar 656 Hijri) isla sidaas oo kale Ciidankii Mangooliska oo tiro ahaan gaarayay 120kun oo askari ayaa u jiheystay dhanka Shaam waxaana hogaaminayay ninka lagu magacaabo Holaako Khan, Waxa ay galeen Magaalada Xalab toddobo maalin ayey ku burburiyeen, iyaga oo gali rabo Magaalada Dimishiq ayaa waxa dhintay boqorkooda oo Monko khan ah, kadib kulan tashi iyo doorasho ah ayey yeesheen, Holako Khan oo hoggaaminayay ciidanka Shaam kulankaas ayuu aaday, shaamna wuxuu uga tagay mid kamid ah hoggaamiyeyaashiis uu ku kalsoonna oo lagu Magacaabi jiray **kitbuqa** 20kun oo askari ayuuna halkaas ugu reebay, Kitbuqa wuxuu galay Magaalada Dimishiq kadib markii dadkeeda uu siiyay magan galyo been ah sidii

caadada aheydna wuxu burburiyay magaalada, intaas kuma joogsan ee wuxuu qabsaday Baytul Maqdis iyo Gaza iyo dhul badan oo Shaam ah.

Dowladda Mammaaliikta waxaa hoggaanka u haayay markas wiil yar oo 15 jir ah oo lagu Magacaabi jiray Al-Mansuur Nuura-diin Cali isaga oo maamulka dowladda ka dhaxlay aabihiis, balse geesiga qisadeenna Sayfu-Diin Qudus ayaa qabtay hoggaanka boqortooyada kadib markii uu madaxdii kale ku qanciyay in uu arrinkaan u sameynaayo in uu halis badan ka difaaco Mammaaliikta iyo dhammaan Muslimiinta guud ahaan, xilligaas waxaa cabsi xooggan laga qabay Mangooliska, Qudus wuxuu bilaabay in uu Muslimiinta kalsoonni siiyo, Siyaasiyiintii ay is hayeen ee Shaam joogay ayuu safkiisa kusoo daray raggaas waxaa kamid ahaa nin lagu Magacaabi jiray Bibris (Baibaras) oo kaalin xooggan ku lahaa dagaaladii Mangooliska, Holaako ayaa qudus usoo diray fariin u qoran sidaan wuxuu hadalkiisa ku bilaabay :

Illaaha samada leh ee daacadiisu waajibka tahay ayaa ku furfurtay, Kaas oo dhulka imakan siiyay, Khalqigiisana igu saliday, boqoryahoow adoomaha kamidka ah ee Masar iyo nawaaxigeeda xukuma waxaad ogaata annagu inaan nahay askartii Alle, carada Alle ayaa na laga Abuuray, wuxuu rabbi nacana waa nalagu saliday, waxaan dhul soo baaba'shay hakuu noqoto cibro qaadasho, dadka kalena ku cibra qaado, amarkiina nagusoo wareejiya, intaanu ceebtiinu muuqan, oo gafkiinu

idinku dhicin, annagu mid ooya uma naxariisano, dhulka waanu furanay, fasaadkana waan ka nadiifinay, waajib waxaa idinku ah orod, annagana eryasha nagu ah, dhulkee idin magan galin kara? Xaggaa Seefteenna ka gali kartaan, gacanteenna lagama baxsado, fardaheenna lagama dheereeyo, seefteennu waa sida danabka, Warmaheennu waa kuwa wax jeexa, qalbiyadeennu waa sida buuraha, tiradeennu waa sida ciida, qalcad iyo dhufeys wax nagama celiso, ciidan la sameysta wax nagama taraan, Ducadinana la inooma aqbalo, waayo xaaraanta ayaad cunteen, salaanta inaad celisaanna waa diideen, dhaartana waa beeniseen, caasi waalidnimada idinku baddatay xumaanta idinku badan, ku bishaareysta dulinimo - wuxuu yiri:

﴿فَٱلۡيَوۡمَ تُجۡزَوۡنَ عَذَابَ ٱلۡهُونِ بِمَا كُنتُمۡ تَعۡلَمُونَ﴾

Maanta waxaa leedihiin cadaabka wax duleeya, waxaa camal sameyseen daraaded. — Suurat Shucaraa, aayada 227

﴿وَسَيَعۡلَمُ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓاْ أَيَّ مُنقَلَبٖ يَنقَلِبُونَ﴾

Kuwa dulmiga sameeya meeshey unoqon doonnaan waa garan doonnaan. — Suurat Axqaaf, aayada 20

Waa run inaan annagu gaalo nahay adinkana inaad faajiriin tihiin, Waxaa nagu kiin imtixaamay Allaaha gacantiisa wax walbaa ku jiraan, Tira badnidiinu annaga agteena waa wax yar, Sharaftiinuna agteena waa dulinnimo, waxaan dulinnimo aheyn oo aan boqortooyoyinkiinna u haaya

ma jirto, Warkana ha igu badinina Jawaabta si dhaqsa ah usoo dira.

Suldaanka markaas wuxu shir dagdag ah isugu wacay culimadii iyo madaxdii waxaana kamid ahaa Suldaanka culimada Al-Cisi Binu Cabdi Salaam, Waxa ay go'aan ku qaateen in ay la dagaalamaan Mangooliska, Suldaanka culimada Al-Cisi Binu Cabdi Salaam madaxdii ayuu amray in ay bixiyaan hantida ay heystaan si ciidanka Muslimiinta ah loogu diyaariyo, Qudus isagana madaxdii ayuu ka dalbaday in ay bixiyaan balse wey diideen, markuu arkay in ay diidayaa ayuu ku yiri hadal saameyn badan wuxuu yiri Madaxdii Muslimiintaay, In badan ayaad xoolihii dowladda cunneyseen, maantana dagaalka waa naceysaan, anigu waan baxayaa ee ninkii dagaal raboow iraac, kii aan rabbina ha iska haro waan fasaxayaa, laakiin waxaad ogaata Danbigaaga iyo danbiga dumarka Muslimiinta iyo ummada Muslimiinta in ay adiga luquntaada tahay kii haroow, -Kadibna isagoo ooyaya ayuu yiri- Madaxdii Muslimiintaay *Yaa islaamka difaacayo, hadeynaan inagu difaacin.*

Madaxdii muslimiinta iyagana markaas waxa ay muujiyeen go'aankooda ku aadan jihaadka iyo in ay la dagaalamaan mangooliska wax walbaba haku baxaane, markaasna waxaa sare noqotay hammiga iyo kartida ciidanka muslimiinta, Suldaan Qudus isagana waxa uu qoorta ka jaray farriinsideyaashii uu Holaako soo diray, madaxyadoodana waxa uu ka lalmiyay albaabada Qaahira,

mid iyaga kamid ahna waa uu fasaxay si uu jirka intiisa kale ugu geeyo Holaako sidoo kalena wuxuu ugu dhiibay farriin udhigan sidaan *"Waxaa la yaableh in ugaarta waaweyn lagu cabsi galiyo waraabeyaal, fardaheennu waa sida hilaaca, fallaaraheennuna waa kuwo lagu sameeyay yamen, seefaheennuna waa kuwo ay sameeyeen reer Mudar, Balaca seefteennu waa mid adag oo qofkii lagu dhuftaa ka adag, geesiyadeennu waa libaaxyo haddii ay faraska koraan, fardaheennuna wey gaaraan qofka ay u baahdaan, seefaheennu meeshii ay ku dhacaan wey jaraan, maqaarkeenna iyo xabadkeenna ayaa inoo ah gaashaan, qalbigeenna ma cabsi galiyo wax adag, midnimadeennana laguma kala diri karo cabsi galin, haddii aan idin casino Alle Ayaan adeecnay, haddaan idinla dagaalnana waa ganacsi guuleystay, haddii aad na dishaanna inaga iyo jannada saacad ayaa inoo dhaxeysa, waxaad dhahdeen quluubteenna waa sida buuraha, tiradeennuna waa sida carada, qoryaha badan ee lasoo aruuriyo waxaa ku filan waxyar oo dab ah oo lagu shido, ma geerida Ayaan ka cararnaa oo dulinimada Ayaan doorannaa, sida aad u fikireysaan ayaa xumaatay, waxa laga carraro waa dulliga ee ma ahan geerida, geeriduna waa waxa dhan ee aan raadineyno haddii aan noolaano farxad Ayaan ku noolaaneynaa, haddii aan dhimanna shahaado, marwalbana xisbiga Alle ayaa guuleysanaayo, Amiirka mu'miniinta kadib miyaad rabtaan inaan idin adeecno, naguma lihidiin wax adeecid ah, ma waxaad rabtaan inaan maamulkeenna idin dhiibno anagoo aan is dagaalin taasna ma ahan mid dhaceyso, iimaanka kadib miyaan ku laabana gaalnimada inaga oo xaqa inoo cadaaday, midka farrintaan soo qoray waxaad ku tiraahdaa kama aadan gaabin ujeedkaaga warkana waad soo koobtay, wallaahi*

farriintaada agteenna waxa ay ka tahay Albaabka jiiq jiiqdiisa oo kale ama tixsiga/tuqsiga dhawaaqiisa, aftahanimadaadana waan garanay adigana waxa aad la mid tahay sida ninka yiri "wax badan Ayaan xifdiyay wax badanna wey iga lumen" Aniguna Qalinka ayaan dhigay oo seefteyda Ayaan qaatay, Kuwa dulmiga sameeya meeshey unoqon doonnaan waa garan doonnaan"

guryaha Masar oo dhana waxa uu u diray farriinsideyaal si ay jihaadka ugu soo baxaan, Sheekh Al-Cisi Binu Cabdi Salaam isagana waxa uu kaalin weyn ka qaadanaayay diyaarinta iyo dhiirragalinta mujaaahidiinta.

Maalin isniin ah (15ka bisha shacbaan sannadkii 658 hijri) ayuu Qudus soo baxay isaga iyo hoggaamiyahiisa Bibris (Baibaras), Qudus Ciidankiisa ayuu kala qeybiyay, Bibris (Baibaras) Ciidan uu hoggaaminaayay ayaa duulan ku qaaday ciidan Mangoolis ah oo joogay Qaza, hoggaamiyaha ciidankaas waxaa ahaa nin lagu magacaabi jiray Baydar oo Kitbuqa walaalkiisa ah, wuuna ka guuleystay Illaahey fadligiis, Kitbuqa markii uu maqlay Jabka ciidankiisa soo gaaray ayuu isna soo kaxeystay ciidan si uu dagaal ula galo Qudus iyo Ciidankiisa, markaasna waxa ay isugu yimaaden meel lagu magacaabo Caynu-Jaaluut.

Sannadkii (658, 25 bisha Ramadaan) labadii ciidan ayaa ku kulmay meel lagu Caynu-Jaaluut oo ku taalo Filastiin, Qudus ciidanka ayuu kala qeybiyay qeyb wuxuu hoggaamiye uga dhigay Bibris (Baibaras) inta soo hartayna

buuraha ayuu ku qariyay, Qeybta uu hoggaaminayay Bibris (Baibaras) Weerar dagdag ayey ku bilawdey kadibna sida wax jabay ayey iska dhigtay, hadafkana wuxuu ahaa in ciidanka Mangooliska gudaha lasoo galiyo, arrinkaasna waa lagu guuleystay, markii ay gudaha soo galeen gaaladii mangooliska ahaa Kitbuqa wuxuu arkaayay ciidanka Muslimiinta oo buuraha kasoo dagaayo iyaga oo dhar kala nuuc ah wato, Kitbuqa ayaa isku dayay in uu ciidankiisa meel ay ka baxaan u furo dagaal xooggan ayuu qaaday heer dhinaca bidix ee ciidanka muslimiinta ay daciiftay, Qudus markuu arkay arrinkaas ayuu Koofida inta iska bixiyay dagaalka isku tuuray isaga oo cod dheer ku qeylinaayo, isaga iyo dad la socday waxa ay awood u yeesheen markaas in ay jabiyaan Mangooliska, Kitbuqa hoggaamiyeyaashiisa qaar kamid ah ayaa kula taliyay in uu isaga cararo, balse wuu diiday dulinnimadaas, waxyar kadib qaar asxaabtiisa kamid ah ayaa halkaas lagu dilay sidoo kalena Kitbuqa laftiisa ayaaba la dilay, arrinkaasna Muslimiinta wuxuu u noqday guul weyn.

Jabkaas kadib Mangooliskii joogay dhulka Shaam iyagana Meesha wey isaga carareen, natiijada dagaalkaas waxa ay noqotay in la mideeyay Shaam iyo Masar oo hal dowlad laga dhigay, taasna Muslimiinta waxa ay u aheyd guul aad u weyn.

DAARIQ BINU ZIYAAD

''Ina soo gaar, Waxaa inoo yimid qowm aynaan garaneyn halka ay ka yimaadeen, dhulka mey kasoo baxeen mise cirka ay kasoo dageen

- hoggaamiyaha gaalada

**

Waxa uu kamid ahaa ragga geesinnimadooda ay taariikhda sida aad ka ah u xustay sidoo kale waa ninka loogu magacdarray biyo xireenka u dhaxeeyo qaaraddaha Yurub iyo Afrika, Waa kuma hoggaamiyahaan usoo talaabay Yurub ee furtay dhulka Andalus, Sababtiisana ay muslimiinta uga talinayeen wax ku dhaw Sagaal qarni, Magaciisa waa Daariq Binu Ziyaad Waa ninka loogu magacdarray Biyo xireenka kala qeybiyo Qaaradaha Yurub iyo Afrika, Muusa Binu Nusayr oo kamid ahaa hoggaamiyeyaasha boqortooyada Umawiyiinta ayaa waxa uu diyaariyay qorshaha lagu furanaayo Andalus.

Sannadkii 92 hijri ayaa waxaa dhaqaaqay ciidan ka kooban todobo kun oo askari hoggaankana waxaa u haayay geesiga qisadeenna Daariq Binu Ziyaad, Ciidankii muslimiinta waxa ay gudbeen biyo xireenka daariq Binu Ziyaad, Kadib waxa ay dageen jaziirad lagu magacaabo Jaziirada Cagaarneyd halkaasna waxa ay kula kulmeen ciidanka koonfurta Andalus kuwaas oo ilaalo u ahaa ciidanka kirishtaanka ah ee halkaas joogay, awood balaarana ma aysan laheyn, Sida caadada u aheyd halyeeyada Islaamka, Daariq Binu Ziyaad waxa uu u bandhigay Saddex arrimood in ay kala doortaan, in ay diinta islaamka qaataan oo xaqa muslimiinta oo kale ay yeeshaan, ama in ay bixiyaan Jizyo Naftoodana sidaas loogu ammaan galiyo, ama barxada dagaalka in ay is keennaan, laakiin ilaaladaas Kibir ayaa qaaday oo waxa ay doorteen dagaalka, wixii ay doorteenna waa laga abaalmariyay, hoggaamiyaha ilaaladaas ayaa fariin dagdag ah u dirsaday nin lagu magacaabo **Roderico**[10] oo ahaa Boqorka Visigothic (القوط) wuxuuna ku yiri sidaan ''ina soo gaar, waxaa inoo yimid qowm aynaan garaneyn halka ay ka yimaadeen, dhulka mey kasoo baxeen mise cirka ayey kasoo dageen Roderico waxa uu

[10]) waa Boqortooyo Jarmal ah oo gacanta ku haysay Jasiiradda Iberian

maqlay in ay muslimiinta ku wajahanyihiin magaalada Qurduba, Wuxuu si dagdag ah ku tagay magaalada Toledo (طليطلة) halkaas ayuu ku diyaarsaday kanasoo ambabixiyay ciidan uu hoggaan uga dhigay wiil ay walaashiis dhashay oo lagu magacaabi jiray Benchio si uu uga hortago ciidanka muslimiinta ah, Benchio isaga iyo muslimiinta ayaa waxa ay ku kulmeen Jaziirada Cagaarneyd marwalba ay kulmaana isaga ayaa la jabinaayay, ugu danbeyna halkaas ayaa lagu dilay Benchio, Ciidankiisa inta badbaaday waxa ay u carareen dhankii Roderico si ay ugu sheegan waxa ay indhahoodu arkeen.

Roderico oo ahaa Boqorka Visigothic (القوط) Waxaa gaaray fariintii ay wadeen ciidankiisa kusoo jabay dagaalka, intaas kuma uusan waana qaadan ee kibirkiisa ayuu kusii socday wuxuuna diyaariyay ciidan dhan Boqol kun oo askari, isaga ayaana markaan hoggaaminayay ciidanka, wuxuu kasoo baxay waqooyiga wuxuu yimid koonfurta isaga oo raadinaayo Daariq Binu Ziyaad, Daariq isagana waxa uu hoggaaminayaa ciidan dhan todobo kun oo kaliya, badankoodna ay yihiin lugley aan wadan wax faras ah, Muusa Binu Nusayr ayuu ka dalbaday gurmad waxaa loo soo diray ciidan dhan shan kun oo askari waxaana hoggaaminayay Dariif Binu Maalik Kuligoodna lugley ayey ahaayeen.

Tirada Ciidanka muslimiinta markaan waxa ay gaartay 12 kun oo askari, Daariq Binu Ziyaad wuxuu isku diyaariyay dagaal wixii ugu horeeyay uu sameeyayna waxa ay aheyd wuxuu raadiyay dhul ku wanaagsan dagaalka, wuxuu helay Dooxo lagu magacaabo Barbaad ama Lukah[11] hadba taariikhyahannada sida ay sheeganba, Sababta uu halkaas udoortay waxa ay aheyd, dhankiisa midig iyo gadaashiisa waxaa ku taalay buur weyn oo ka ilaalinayso dhabar jabinta iyo waxa lamidka ah, dhankiisa bidix waxaa ku taalay badyareey, Koox yar oo ciidanka kamid ah oo uu hoggaamiye uga dhigay Dariif Binu Maalik ayuu dhigay Meesha lagasoo galaayay Dusheeda Si uusan qofna ugu dhiirran dhabar jabinta ciidanka muslimiinta, Cadoowgana uu ugu qasbanaado si toos ah goobta in uu usoo galo isagoon meelna ku leexan, waxaa yimid Roderico isaga oo ku labisan dahab iyo waxwalba oo qurxoon kuna fadhiyo Sariir dahab ah oo saran laba faras dushooda, Adduunkiisa kama uusan soo tagin, xitaa haddii goob dagaal la joogo.

[11]) Waxa ay ku taallaa koonfurta Spain

Taariikhdu marka ay aheyd (28 ramadaan sannadka 92 hijri) ayey is gacan qaadeen labadii ciidan, halkaas waxaa ku dhaxmaray mid kamid ah dagaalada ugu layaabka badan, 12kun oo hor taagan boqol kun, Sida caadada u aheydba gaalada marwalba wey ka tira bataan muslimiinta saas ay tahayna iyaga ayaa guuldarrada farqaha looga buuxiya, Qofka sida caadiga ah u fiirinaayo dagaalkaan waxaa laga yaaba in ay qalbigiisa naxariis usoo gasho muslimiinta sababtoo ah Tiradooda kama badna 12kun, caqligana wuxuu dhihi karaa sidee ayey ku dagaalamayaan in ay guuleystaanba iska dhaafe, waa run labadaan koox tira ahaan wey kala badan yihiin haddane isku mid ma ahan koox usoo baxday jaceyl, rabitaan iyo doonis ay doonnayaan jihaadka iyo koox amar iyo qasab lagusoo kaxeeyay, Farqi ayaa u dhaxeeyo qof usoo baxay dhimasho isaga oo raadinaayo si uu caqiiqadada islaamka u ilaaliyo iyo qof aan intaasba waxba ka aqoon hadafkiisana uu yahay hanti iyo lacag in uu helo, Farqi ayaa u dhaxeeyo dad sida salaada oo kale u safan oo garbaha isku haayo Faqiir iyo taajir aan kala soocneyn, Yar iyo weyn is garab taagan yihiin hoggaamiye iyo shacabna is dhinac joogan iyo dad iyaga dhaxdooda midba kan kale uu adoonsado, Ciidanka muslimiinta waxaa hoggaaminaayo nin Alle ka cabsi iyo xikmad, naxariis iyo awood, sharaf iyo tawaaduc intaba isku darsaday, halka ciidanka gaalada uu hoggaaminayo nin kibirkiisa uu gaaray heer goob dagaal uu ugusoo

labisto dahab, isku mid ma noqon karaan koox uu garabkeeda taagan yahay rabbiga adduunkaan Abuuray una dagaalameyso diinteeda sidii ay u kor yeeli laheyd iyo koox u dagaalameyso adduun yar.

Sida caadada aheydba Furashooyinka iyo guulaha muslimiinta waxa ay dhici jireen bil ramadaan, balse nasiib darro xilligaan aan joogno bisha ramadaan waxa ay noqotay bil musalsalaad iyo aflaan iyo waxyaabo aan jirin waqtiga lagu lumiyo, Siddeed maalmood oo xiriir ah oo ay is hor joogeen labada ciidan ugu danbeyn waxaa guusha qaatay ciidanka muslimiinta oo sabar iyo imaan dhab ah la yimid, halkaasna waxaa lagu dilay ninkii kibirka badnaa ee Roderico ahaa, Taariikhyahanada qaarna waxa ay sheegaan in uu goobta isaga cararay oo uu is qariyay halkaas ayuu ku danbeeyay warkiisa.

Natiijada dagaalka

- Andalus waxa ay kamid noqotay dhulka islaamka kadib muddo dheer oo ay dulmi iyo jahli ku jirtay.
- Ciidanka muslimiinta waxa ay ka heleen qanniimo aad u fara badan haba ugu muhiimsaato Fardaha, Waxa ay noqdeen fardooley halka markii horena ay ahaayeen lugley aan Faras wadan.
- Ciidanka Muslimiimta dagaalka waxa ay bilaaben iyaga oo 12kun ah, dagaalkana wuxuu

dhammaaday iyaga oo sagaal kun ah, halkaas waxaa ka cad Saddex kun in ay ka shahiiday, naftooda ayey u hureen si ay diintaan u gaarsiiyan dadka, Alle haka abaalmariyee.

Alle raali haka noqdo geessiga iyo hoggaamiyaha dagaalkii lagu furtay Andalus kaas oo socday muddo isbuuc ah, intaas kadibna Andalus hoos keenay xukunka muslimiinta wax ka badan siddeed qarni.

SACIID BINU CAAMIR AL-JUMAXI

Cumaroow… waxaan kugula dardaarmayaa inaad dadka Alle uga cabsato, oo aadan Alle uga cabsan dadka, iyo in aysan is qilaafin hadalkaaga iyo ficilkaaga, hadal waxaa ugu wanaagsan kan uu ficilka rumeeyo

- Saciid Binu Caaamir

**

Saciid Binu Caamir Waxa uu kamid ahaa Kumannaan qof oo isugu soo baxday bannaanka magaalada Makka, meel lagu magacaabo Tanciim, Kulan ay isugu yeereen Odayaasha Qureysh si ay uga qeyb galaan dilka Khubayb Binu Cadiy oo ahaa mid kamid ah saxaabada Nabiga scw oo ay markaas Qureysh si dhagar ah kusoo qafaasheen, Saciid waxa uu ahaa wiil dhallinyaro ah oo xooggan, dhallinyaranimadiisa waxa ay awood u siisay in uu dhax jiiro safafka dadka oo uu dhax galo odayaasha Qureysh sida : Abuu Sufyaan Binu Xarbi iyo Safwaan

Binu Umaya, oo arrinka hoggaaminayay markaas, Arrinkaasna wuxuu u ogolaaday in uu si toosa u arko waxa lagu sameynaayo ninka ay qafaasheen Qureysh, Carruurta iyo dumarka iyo dhallinyaradana ay diyaar u yihiin in ay ugu aar-gudaan dadkoodii looga laayay dagaalkii Badar.

Ninkii qafaalka ahaa ayaa waxaa la keennay halkii lagu dili lahaa, Saciid Binu Caamir isaguna waxa uu taagan yahay meel udhaw, kadib ayuu maqlay cod hoose oo kasoo baxaayay Khubeyb kaas oo lahaa Iga leexda aan tukado laba rakco inta aydaan idilinee… weyna ka leexdeen.

Saciid wuxuu arkay Khubeyb oo dhanka kacbada u jeedo isaga oo tukanaayo laba rakco oo aad u qurxoon aadna u dhammeystiran kadibna Khubeyb ayaa odayaasha Qureysh ku yiri Hadeydaan umaleyn laheyn inaan salaada u dheereeyay cabsi aan ka cabsanaayo geerida, salaada ayaan badsan lahaa Saciid Wuxuu indhihiisa ku arkaayay tolkiisa oo suurad xumeynaayo Khubeyb oo marba jirkiisa qeyb ka jaraayo iyaga oo leh Ma jeceshahay Muxammad in uu booskaaga joogo adigana aad badbaado Khubeybna uu leeyahay isaga oo dhiigga uu jirkiisa ka socdo Wallaahi inaan jecleyn anigoo nabad qaba inaan qoyskeyga dhax fadhiyo, Muxammadna ay muddo qodax kadib Saciid Binu Caamir wuxuu arkay Khubeyb oo indhihiisa xaga

samada u taagay Isaga oo habaarayo Qureysh, ugu danbeyna neeftiisii ugu danbeysay ayuu qaatay.

Qureysh waxa ay ku laabteen magaalada Makka, Arrinka ay ku sameeyeen Khubeybna wey iska ilooben, laakiin Saciid Binu Caamir marna ma uusan iloobin waxa lagu sameeyay Khubeyb, haddii uu seexdo wuu ku riyoon jiray, haddii uu soo jeedana maskaxdiisa ayaa u sawiri jirtay, wuxuu ka baqi jiray in uu ku dhaco habaarkii Khubeyb, Saciid wuxuu ka bartay Khubeyb wax uusan horay u aqoonnin, sidaas ayuu ku qaatay diinta islaamka, qalbigiisana imaanka u buux dhaafiyay, Saciid Binu Caamir wuxuu usoo hijrooday magaalada Madiina, Waqtigiisa dhanna wuxuu siiyay Nabiga scw wuxuu ka qeyb galay dagaalkii Kheybar iyo wixii ka danbeeyay.

Xilligii Cumar Binu Khadaab Rc uu maamulka islaamka qabtay Saciid wuxuu uu u yimid Cumar isaga oo waano iyo naseexo u wado, wuxuuna yiri sidaan Cumaroow… waxaan kugula dardaarmayaa inaad dadka Alle uga cabsato, oo aadan Alle uga cabsan dadka, iyo in aysan is qilaafin hadalkaaga iyo ficilkaaga, hadal waxaa ugu wanaagsan kan uu ficilka rumeeyo.

Cumar ayaa maalin wuxuu u wacay Saciid wuxuu ku yiri Saciidoow… waxaan masuul kaaga dhignay Ximis.

Saciid ayaa dhahay Cumaroow… Alle ayaan kugu dhaarshayee ha ifitneyn.

Cumar ayaa xanaaqay oo yiri arrinkaan ayaad dusha iga saareysaan waadna iga tageysaan miyaa… Wallaahi kaama tagaayo.

Sidaas ayuu Saciid ku qabtay maamulka Ximis, waqti yar kadib Cumar ayaa reer Ximis ku yiri Iisoo qora magacyada dadkiina fuqarada ah, si aan danahooda ugu fuliyo markaasna waxaa loo keennay feel uu ku jiro magaca Saciid Binu Caamir, Cumar ayaa dhahay Waa kuma Saciidkaan…?

Waxaa lagu yiri Waa maamulkeenna

Cumar ayaa dhahay Oo maamulkiinnu ma faqiirbaa.?!

Waxaa lagu yiri Haa, Marmar xitaa gurigiisa wax dab ah lagama shido waqti badan.

Cumar ayaa iska ooyay ilaa garkiisu qoyay, kadibna kun diinaar ayuu u dhiibay wuxuu ku yiri Iga gaarsiiya salaam, waxaadna ku dhahdaan Amiirul Mu'miniin ayaa kusoo dhiibay hantidaan si aad danahaaga ugu qabsato.

Saciid Binu Caamir waxaa u yimid wafdigii ka socday Amiirul Mu'miniin Cumar, Waxa ay u keeneen wixii logusoo dhiibay, Saciid ayaa markiiba fiiriyay wuxuu

arkay hanti, wuxuu yiri Inaalilaah sida in ay kusoo dagtay musiibo, xaaskiisa ayaa ku tiri Maxaa kugu dhacay Saciidoow, Ma Amiirul Mu'miniin ayaa dhintay.?!

Saciid wuxuu yiri maya, waa Arrinkaas midka weyn….

Xaaskiisa waxa ay tiri Oo muslimiinta miyaa dagaal lagu jabiyay.

Wuxuu yiri Waa arrinkaas mid ka weyn.

Waxa ay tiri oo maxaa ka weyn.

Wuxuu yiri adduunyo ayaa iisoo gashay si ay aaqiradeyda iiga fasahaadiso, gurigeygana ay iiga burburiso.

Xaaskiisa ayaa tiri iyadoo arrinka hantida aan ogeyn ka taqalus hee…

Wuxuu yiri garab ma igu siinnaysaa

Waxa ay tiri Haa

Kadibna lacagtii ayuu qaaday wuxuuna u qeybiyay fuqarada muslimiinta.

Maalmo kadib Cumar Binu Khadaab Rc ayaa lugihiisa ku yimid Ximis isaga oo rabo in uu xaaladeeda ogaado, dadkii ayuu wareystay wuxuuna ku yiri kawarama Amiirkiinna afar waxyaabood ayey ka sheegteen, Cumar ayaa dadkii iyo Amiirkoodaba isku meel ku kulmiyay markaas, wuxuuna ku yiri Maxaad ka sheeganeysan Amiirkiinna.

Waxa ay dhaheen ma inooso baxo ilaa xilliga barqinka ma ahanee.

Cumar ayaa Saciid weydiiyay arrinkaas, Saciid ayaa waxyar aamusay, wuxuu yiri Wallaahi arrinkaas inaan sheego ma jecleyn balse haddii ay lagama maarmaan tahay waan sheegaya, anigaa ayaa qoyskeyga adeege u ah, Subax walbana cajiinka ayaan u qasaa, inta uu ka qamiiraayana waan sugaa, kadibna waan udubaa, markaas ayaan soo weysa qaata oo dadka usoo baxaa.

Cumar ayaa markale weydiiyay Waxa ay ka sheeganayaan Amiirkood

Waxa ay dhaheen Qofna habeenkii ma qaabilo.

Cumar ayaa Saciid ku yiri Maxaa ka leedahay arrinkaasna Saciid Binu Caamir ayaa dhahay Wallaahi ma jecli arrinkaas inaan muujiyo, Maalinkii iyaga ayaan u daayay danahooda inaan uqabto, habeenkiina

Rabbigeey Cumar ayaa dhahay Maxaa kaloo ka sheeganeysaan Amiirkiinna.

Waxa ay dhaheen Bishii halmar ma inoo soo baxo Cumar ayaa Saciid weydiiyay arirnkaas.

Saciid Binu Caamir ayaa dhahay Amiirul Mu'miniinoow… ma heysto adeegge, mana heysto dhar aan aheyn kuwaan aan wato, Bishii halmar ayaa dhaqaa inta ay ka qalalayaanna waan sugaa, kadib ayaan usoo baxaa goor dambe maalintii.

Cumar ayaa weydiiyay waxa kale ay ka sheeganayaan waxa ayna dhaheen Marmar ayuu miyirka ka tagaa oo iska dhacaa, Sidoo kale Cumar ayaa arrinkaas weydiiyay Saciid.

Saciid ayaa dhahay Waxaan joogay meeshii lagu dilay Khubeyb Binu Cadiy anigoo mushrik ah, Waxaan arkay Qureysh oo jarjareyso jirkiisa iyadoo leh Ma jeceshahay Muxammad in uu Booskaaga joogo- isagana uu leeyahay Wallaahi inaan jecleyn anigoo nabad qaba inaan qoyskeyga dhax fadhiyo, Muxammadna ay muddo qodax Marwalboo aan maalinkaas xasuusto iyo sida aan garabka u siin waayay Khubeyb waxaan umaleeya in uusan Alle ii danbi dhaafeynin, markaas ayaan miyr daboolmaa.

Cumar ayaa istaagay oo umahadceliyay Alle, kadib Saciid ayuu u dhiibay Kun diinaar si uu danihiisa ugu qabsado, Saciid xaaskiisa markii ay aragtay lacagta ayey tiri Alle ayaa mahadleh, Lacagtaan wax inoogu soo iibi, adeeggana inoogu sameey

Wuxuu yiri Saciid arrinkaas wax ka wanaagsan ma rabtaa...? waxa ay tiri maxaa waye.

Wuxuu yiri Waxaan siinnaynaa qof inoo keennayo markaan u baahano.

Waxa ay tiri oo sideeh.

Wuxuu yiri Alle ayaan u amaah dhiganeynaa.

Waxa ay tiri haaa waa arrin wanaagsan.

Saciid Binu Caamir Al-jumaxi isla fadhigaas ayuu ku qeybiyay lacagtii, Alle raali haka noqdo isaga iyo xaaskiisa dulqaadka badanba.

ORKHAN BINU CUSMAAN

Ma uusan aheyn Orkhan shar-wade ama naxariis laawe, ama qiyaanole

- Gibbons

**

Kadib geerida aabihiis Cusmaan Binu Ertugtul ayuu Orkhan noqday Suldaanka dowladda Cusmaaniyiinta, Orkhan wuxuu aabihiis ka dhaxlay dowlad aan nidaam iyo sharci midna aan laheyn wuxuu ku qasbanaaday in uu dowladdiisa u sameyo nidaam iyo sharci iyo in uu dhiso awood uu ku ilaaliyo dowladdaan uu ka dhaxlay Aabihiis, Wuxuu balaariyay dhulka dowladdiisa wuxuu muhiimada koowaad ka dhigtay dhisida ciidan

Xooggan, Caasimada dowladdiisana wuxuu usoo raray magaalada **Bursa**([12]).

Markii uu Suldaan Orkhaan qabtay maamulka dowladda sannadkii 1326, waxa uu sameeyay dhacdo aad u weyn taas oo ah furashada magaalada Bursa (مدينة بورصا), Bursa waxa ay kamid aheyd magaalooyinka ugu muhiimsan beyzantaaniyiinta ee anaadool (Anatolia) ku yaalo, furashadaasna waxa ay wax badan ka badashay hab fikirka gaalada iyada oo indhaha dowladda beyzantaaniya ay kusoo jeedeen xiddigaan cusub ee dowladdaan cusub ka dhaxlay aabihiis, laakiin beyzantaaniyiinta ma aysan heysan awood ay Bursa kusoo ceshtaan sidaas ayeyna iskaga dhaafen magaalada, Suldaan Orkhaan isagana waxa uu ka dhigtay caasimada dowladdiisa.

Horumarka Suldaan Orkhaan waxaa u dulqaadan waayay boqorka beyzantaaniya oo lagu magacaabi jiray (Andronicus III - أندرونيقوس الثالث) waxa uu diyaarsaday ciidan xooggan uu isaga hoggaaminaayay si uu ula

[12]) Waa magaalada afaraad ee ugu dadka badan dalka Turkiga, waxayna ku taalla waqooyi-galbeed ee dalka turkiga, waxa ayna u dhaxaysa magaalooyinka Istanbul iyo Ankara.

dagaalamo Suldaanka dowladda Cusmaaniyiin Orkhaan, balse ciidankaas waxaa dusha loo saaray guul darro aad u foolxun taariikhdu marka ay aheyd (10 june sannadkii 1329) dagaal lagu magacaabay Pelekanon (موقعة بيليكانون) Suldaan Orkhaana sidii hore ayuu kasii horumaray, awooddiisana wey sii horrumartay

Suldaan Orkhaan Binu Cusmaan guushaas waxa uu ku helay Sharaf iyo karaamo aad u weyn, dareenka dadka ayuu soo jiitay muslimiin iyo kuwo aan muslimiin aheynba, heer kirishtaankii daganaa halkaas ay tartan u galeen si ay diinta xaqa ah u qaadan lahaayen, qaasatan markii ay arkeen farqiga u dhaxeeyo hab dhaqanka muslimiinta Cusmaaniyiinta ay ula dhaqmeen iyo sidii ay boqortooyada beyzantaaniyiin ula dhaqmi jirtay, muslimiintaas cusub iyo dadkaas kusoo biiray dowladda waxa ay siiyeen awood dheeraad ah heer dhulka dowladda islaamka uu sii kordhay.

Suldaan Orkhan wuxuu dowladdiisa ku fidiyay dhulka Anatolia iyo qeyb kamid ah Yurub, Wuxuu furtay Jaziirado iyo Qalcado, Wuxuu dhisay jaamacaddii ugu horeysay oo dowladda Cusmaanniyada leedahay, Wuxuu dadaal iyo juhdi ku bixiyay in uu xaqiijiyo bishaarada Nabiga scw ee furashada Qustandiiniya ah, wuxuu dajiyay qorshooyin iyo talaabooyin lagu beegsanaayo Qustandiiniya, Si uu arrinkaas u xaqiijiyo wiilkiisa Suleymaan ayuu udiray in uu ka gudbo Biya

mareenka dardanelles (waxa uu ku yaala dalka Turkiga) iyo in uu gacanta ku dhigo meelaha qaar ee dhaca galbeedka.

Sannadkii 758 Xilli habeen ah Suleymaan ayaa ka gudbay Biya mareenka dardanelles isaga oo ay la socdeen 40 dagaalyahan oo ciidanka muslimiinta kamid ah, Markii ay daanta galbeed ee biyo mareenka tageen ayey gacanta ku dhigeen doomankii roomaanka ee halkaas ku xirnaa kadibna waxa ay u celiyeen daanta bari, Xilligaasna Cusmaaniyiinta wax maraakiib ah uma joogin sababtuna waxa ay tahay in dowladdu aysan wali si wanaagsan dhidibada udhigan oo ay ku jirto Waqtigeedii aas-aasid, Suleymaan wuxuu ciidankiisa amray in ay raacaan maraakiibta oo ay u talaaban Xeebaha Yurub, halkaasna waxa ay ku furteen qalcado fara badan oo dhammaantood ku teedsanaa Biya mareenka dardanelles waqooyi ilaa koonfur, Sidaasna Suleymaan wuxuu ku qaaday talaabo wax badan laga faa'iiday xilligii furashada Qustandiiniya.

Suldaan Orkhan wuxuu ciidanka u qeybiyay guutooyin, guuta walbana wuxuu ka dhigay toban qof ama Boqol Qof ama kun qof, wuxuu ciidanka ka dhigay kuwo marwalbaa heegan ah, halka markii hore ciidanka ay kulmi jireen xilliga dagaal loo baahdo, wuxuu u sameeyay saldhigayo lagu tababaro ciidanka.

Sidoo kale Suldaan Orkhan sannooyinka ugu horreysay ee xukunkiisa waxaa dhib ka heytay dhanka ciidanka waxa uu ubaahday ciidan lugley ah maadaama ciidanka turkida ay u badnaayeen fardooley taasna waxa ay keentay laba arrimood oo xun

- In aysan awooddin furashada qalcadaha iyo dhufeysyada ciidanka lugta la'aantood.
- In markasta loo baahdo ciidan Turki fardooley ah si ay u dagaalamaan.

Suldaankana si uu arrinkaas u xaliyo waxa uu dhisay ciidan joogto ah oo xirfad u leh xeelladaha dagaalka una heellan jihaadka, dowladduna ay ugu tiirsanaato marka ay furaneyso dhul cusub qeybna ka qaata ilaalinta amniga gudaha iyo dibada markaasna waxaa u timid fikrada dhisida ciidanka Inkishaariyiin (janissary) arrinkaas Suldaanka waxa uu sameeyay afar sanno kadib markii uu maamulka la wareegay, magaca ciidankaan cusub ee **Inkishaariyiin (janissary)** macnahihiisu waxaauu noqonnayaa ciidanka cusub, Ciidankaas marwalba oo dhul cusub la furto tiradooda ayaa kordheysay, Waxa ay ka koobnayeen carruurta muslimiinta iyo carruurta dhulalka la furtay kadib markii ay islaamka qaataan, Carruurtaasna waxaa laga diyaarrin jiray dhan walba, qaab dagaaleed iyo qaab fikradeedba, culimada ayaa halkaas ku siin jiray cashiro la xiriiro jecleysiinta jihaadka, iyo ugargaarida diinta

islaamka ciwaankooduna wuxuu ahaa (Duulaan ama shahiid).

Xilliga Orkhan dowladda Cusmaaniyiinta waxa ay Xaqiijisay laba arimood.

- Waxaa batay furashooyinka iyo qabsashada dhulalka.
- Suldaan Orkhan wuxuu nidaamiyay dowladda, kadib marka ay bateen furashooyinka.

Sannadkii (759 hijri) Suldaanka wuxuu go'doomiyay magaalada Qustandiiniya oo aheyd caasimada roomanka, balse uma suurtagalin in uu furto, Beysantaaniyiintana waxay ku qasbanaadeen in ay heshiisyo la galaan Suldaanka.

Sannadkii (761 hijri) Waxaa dhintay Suldaan Orkhan wiilkiisa Suleymaan, Arrinkaas ayuu Suldaanka si aad ah uga murugooday ilaa markii dambe uu isagana dhintay sannadkii ku xigay, kadibna Boqortooyada waxaa ka dhaxlay wiilkiisa labaad ahna muraadka koowad kana mid ah salaadiinta Cusmaaniyiinta.

SALAAXUDIIN AL-AYUUBI

Wallaahi Alle ayaan uga xishoonnayaa inaan qoslo iyadoo Baytul Maqdis ay gumeysi ku jirto

- Salaaxudiin Al Ayuubi

**

Ka hor inta aynaan ka hadlin taariikhda geesigaan waxaan cadeyn doonna arrin muhiim ah oo ay aaminsan yihiin dhallinayaro badan oo ah in guul la helaayo Marba hadii hub la qaato, taasina waa qalad weyn, xaqiiqada ay moogyihiin dhallinyaradaas masaakiinta ah waa in dagaalku yahay isku dayga ugu danbeeyo ee guusha lagu gaaro, guusha marmar waxa ay timaada iyadoo an wax hub ah la qaadin, taasna waxaa tusaale kuugu filan qisada Nabi Muuse cs runtiina waa mid aad ka heleyso tusaale cad, Allaah subxana-watacaala isaga oo awooddo in uu Fircoon usoo diro Malaku mowt halmarna nafta laga qaado, ayuu wuxuu qaaday waddo aan midaas aheyn, wuxuu u waxyooday Nabi Muuse hooyadiis,

kadibna Nabi Muuse ayuu ku koriyay guriga Fircoon, Nabi Muuse ayaa u hijrooday Madyan[13] meel lagu magacaabo, markale Nabi Muuse ayaa waxa uu kusoo laabtay dhulka Masar oo uu markaas ka talinaayay Fircoon, Nabi Muuse Fircoon ayuu hadalkiisa kula dooday ma ahan hub ee waa hadal, waqti badan ayuu reer Banii Israaiil dacwada ugu yeeraayay kadib Nabi Muuse iyo reer Banii Israaiil ayaa baxay Fircoon ayaa kasoo daba baxay, ugu danbeynna Fircoon ayaa lagu halaagay biyaha sidaasna waxaa ku guuleystay Nabi Muuse cs iyadoo halkaas uusan ka dhicin wax dagaal ah, aan su'aan ku weydiiyo; ma taqaana sababta uu Alle markii hore u halaagi waayay Fircoon? Dabcan jawaabtu waxa ay noqonneysaa si aniga iyo adigaba la inoo baro waddada guusha in ay tahay waddo dheer, guusha laftirkeedana ay tahay daqiiqado yar oo la sabro.

Aan dib ugu laabano hadda taariikhda geesigeenna Sannadkii (532 hijri) Magaalada Tikriit[14] (oo ku taalo xiligaan dalka ciraaq) waxaa ku dhashay wiil lagu

[13]) Magaalada Madyan waxa ay ku taalla meel u dhow magaalada Al Bidda, gaar ahaan dhanka waqooyi-galbeed ee Boqortooyada Sacuudi Carabiya.

[14]) waa magaalo ku taallo dalka ciraaq

magacaabay Yuusuf Binu Ayuub waana Salaaxudiin Al-ayuubi, waxaa lagu barbaariyay barbaarrin islaam, Markii uu qaan gaaray aabihiis ayaa u diray magaalada si uu wax uguso barto, wuxuu bartay aqrinta iyo qoraalka luqada Carabiga sidoo kale wuxuu xifdiyay Qur'aanka kariimka ah, asxaabtiisa kale wuxuu uga soocnaa caqligiisa iyo dabci wanaaggiisa wuxuu aad u jeclaa aqrinta iyo mudaalacada kitaabada, Salaaxudiin aabihiis ayaa marwalba uga sheekeyn jiray Mujaahidiinta iyo geesiyada islaamka taariikhdooda, Salaaxudiin asalkiisu waxa uu kasoo jeeday qoys Kurdi ah.

Bartamaha qarnigii laba iyo tobanaad Khilaafada Cabaasiyiinta ayaa u qeybsantay dowlado yaryar, waana xilligii Salaaxudiin uu soo shaac baxay, Faadumiyiinta oo ahaa qolo shiico ahaa waxa ay qabsadeen maamulka Masar iyaga oo sameeystay dowlad gooni, Khaliifkoodana kaliya waxaa looga duceyn jiray Masaajidka maalinta jimcaha ah oo magac uyaal ayuu iska ahaa, mana aysan aqoonsaneyn Khilaafada Baqdaad ka jirtay ee Cabaasiyiinta ah.

Masar waxa ay noqotay saldhiga dowlada Faadumiyiinta Khaliifkeedana kaliya Masaajidka ayaa looga duceyn jiray oo wax saameyn ah kuma uusan laheyn arrimaha dowladdiisa oo gacanta ugu jirtay wasiiradiisa, Masar waxa ay marti galisay kacdoono fara

badan kuwaas oo u dhaxeeyay dadka kala mad-hab iyo fikir duwanaa, Nuuradiin Maxamuud[15] oo ahaa Amiirka dowladda Zinkiyiinta[16] ayaa markii uu arkay dhibaatada ka jirtay Masar una fiirsaday damaca boqorka Beytul Maqdis ee kirishtaanka ahaa ayuu Masar u diray ciidan uu hoggaamiye uga dhigay nin lagu magacaabi jiray Assadu diin Shirkuh (أسد الدين شيركوه) waxa uuna garab uga dhigay Salaaxudiin Al Ayuubi, Saliibiyiintii kirishtaanka ahaa markii ay ogaadeen ciidanka uu Nuuradiin soo diray ayey isaga carareen Masar, labo bil kadib Salaaxudiin ayaa loo doortay wasiirka koowaad ee Khaliifkas ku xigi doonno, inkasta oo ay jireen shirqoolo loo maleegay Salaaxudiin laakiin Salaaxudiin ayaa shirqooladaas ka adkaaday.

Salaaxudiin Al Ayuubi ayaa waxa uu arkay mad-habka shiicada si aad ah ugu faafaayay Masar markaas ayuu dhisay labo madaraso si uu dadka ugusoo celiyo

---

[15]) Waa wiilka uu dhalay Cimaadu-diin Zinki. Waxaa lagu magacaabaa Boqorka Cadaaladda, waana wiilka labaad ee Cimaadu-diin Zinki. Wuxuu xukumay Xalab geeridii aabihii ka dib, wuxuuna si tartiib tartiib ah u ballaariyay imaaraddiisa, wuxuuna sidoo kale aabihii ka dhaxlay dagaaladdii Saliibiyiinta.

[16]) Waa imaarad Islaami ah oo uu ka aasaasay Cimaadu-diin Zinki magaalada Mosul

mad-habka Ahlu Sunnaha, arrinkaasna waxa uu hordhac u ahaa qorshooyinka Salaaxudiin.

Nuuradiin Maxamuud waxa uu aad u jeclaa in Khudbooyinka jimcaha ee Masar laga aqriyo lagusoo darro magaca Khaliifka Cabaasiyiinta maadaama markii hore laga mamnuucay, Salaaxudiin oo waqti munaasib ah la sugaayay arrinkaas ayaa maalin waxaa xanuunsaday Khaliifkii Faadumiyiinta ahaa, Salaaxudiin isaga oo ka faa'iideysanaayo arrinkaas ayuu Khudbada aqriyay isaga oo soo qaatay magaca Khaliifka Cabaasiyiinta, Sidaasna Salaaxudiin waxa uu ku noqday hoggaamiyaha Masar dood la'aan.

Sannadkii (569 hijri) ayaa Waxaa dhintay Nuuradiin Maxamuud Zikinki oo ahaa boqor caadil ah iyo ninka lagu tilmaamay inuu yahay Khaliifka lixaad ee Khulaa'u Rashidiinka, markaasna wadajirka muslimiinta ee uu dhisay boqor Nuuradiin Maxamuud ayaa ku dhawaaday burbur iyo fashil sababtoo ah ma aysan jirin cid buuxisa booskaas uu banneeyay Nuuradiin, Salaaxudiin ayaa u istaagay markaas in uu booskaas buuxiyo sidoo kalena soo celiyo wadajirkii iyo midnimadii, waddaduna aad ayey u adkeyd si uu hadafkaas uga dhabeeyo, Suldaan Nuuradiin waxa uu ka tagay wiil yar oo 11 jir ahaa xilligaas, arrinka Salaaxudiinna waxaa dood ka keenay madaxdii kale ugu danbeyn Salaaxudiin ayaa la doortay, Suldaan Salaaxudiin wuxuu dagaalo badan la galay salibiiyiinta kirishtaanka oo

markaas gacanta ku hayay Baytul Maqdis, Wuxuuna dhidibada u taagay dowladda Ayuubiyiinta.

Salaaxudiin Al-ayuubi wuxuu diyaariyay ciidan si uu duulaan ugu qaado saliibiyiinta, wuxuu la galay dagaal lagu magacaabo Xidiin (معركة حطين) oo hordhac u aheyd furashada Baytul Maqdis, Salaaxudiin wuxu dadaal galiyay in uu gaalada ka xigsado dhanka biyaha, sidaasna kirishtaanka waxa ay ku qaateen habeen u xun iyaga oo oon iyo haraad ah, dhagahooda waxa ay maqlayeen takbiirta muslimiinta, arrinkaasna wuxuu ku AbuurayArgagax xooggan.

Subax sabti ah (24 Rabiicul aaqir 583 hijri) Salaaxudiin wuxuu dhax wareegaayay ciidankiisa, isaga oo ku dhiirragalinaayo jihaadka sidoo kale wuxuu amraayay wixii anfacaayo waxa uuna ka reebaayay wixii dhibaayo, iyaguna amarkiisa ayey qaadanayeen.

Ugu danbeyn Waxaa bilaawday dagaalkii, Salaaxudiin dagaal toos ah kaliya lama uusan galin kirishtaanka, ee niyad jab ayuu qalbigooda ku Abuuray, wuxuu xoogga saaray in uu gacanta ku dhigo saliibkooda ugu weyn oo ay u yaqaaneen (True cross) kaasoo ay sheegeen in uu ku jiro gabal ama qeyb kamid ah alwaaxii ay ku salbiyeen Ciise, -Sida ay sheegtaan iyaga- Salaaxudiin wuxuu ogaa haddii saliibkaas uu gacanta ku dhigo in ay qalbi jabayaan, maalinkaas muslimiinta waxa ay dagaalkaas ku dileen

sodon kun oo kirishtaan waxa ayna qafaasheen sodon kun oo ay ku jiraan boqoro badan.

Dagaalkii Xidiin gaalada jab oo kaliya uma aheyn ee wuxuu u ahaa musiibo ku habsatay iyaga, waxa ay ku waayeen geesiyo fara badan, waxaa laga dilay ehelkooda sidaasoo kalena waxaa laga qafaashay dad kaloo far badan, Salaaxudiin markii uu salibiiyiinta ku jabiyay Dagaalkii Xidiin (معركة حطين) ma aysan jirin wax ka celinaayay furashada Baytul Maqdis, wuxuu furtay qalcado yaryar oo ka ag dhawaa Baytul Maqdis.

Suldaan Salaaxudiin Al Ayuubi ayaa maalin waxaa loo sheegay war ah in hoggaamiyaha faransiiska oo lagu magacaabi jiray Arnat أرناط oo ka talinayaay magaalada Kerak[17] الكرك in uu jid gooyo u dhigtay muslimiintii Xajka u socday isaga oo dilay dumarka iyo carruurta iyo odayaasha waxa uuna kulahaa markaas U yeerta Muxammadkiina ha idin difaacee, ka codsada in uu idin caawiyo oo uu idin badbaadiyo nin muslim ahaa ayaa ka badbaaday markaas isaga oo arrinkana gaarsiiyay Salaaxudiin. hoggaamiyaheena Salaaxudiin Al Ayuubi

[17]) waa Magaalo kamid ah magaalooyinka Urdun waxa ay ku taallaa koonfurta caasimadda Cammaan

markii uu maqlay ayuu inta guriga soo xirtay laba maalin iska ooynaayay isaga oo leh Yaa Rabbi… Yaa Rabbi ma ii ogolaaneysaa inaan Rasuulkaada Muxammad ah wakiil kaga noqdo difaaca ummadiisa..? intaas ayuu ku celcelinaayay maalin dhan, kadib ayuu inta ciidan diyaarsaday ayuu Khudbad u jeediyay isaga oo leh ciidankii Nabi Muxammadoow Arnat oo ah xaakimka kerak, dhulka ayuu ku kibray isaga oo dilay muslimiintii xajka u socday, wuxuu daadiyay dhiiga dumarka iyo carruurta, isaga oo leh U yeerta Muxammadkiina ha idin difaacee…aniga nafteyda iyo ruuxdeyda ayaan u hibeeyay si aan wakiil uga noqdo Nabi Muxammad difaaca ummadiisa, qofkii rabanna waa uu isoo raaci karaa ciidankii oo dhan ayaa halmar waxa ay si wadajir ah u dhaheen dhammaanteen nafteenna Ayaan u hureynaa Rasuulka Alle, markii uu dhacay dagaalkii xidiin gaalkii kibirsanaa ee Arnat ahaa waxaa uu kamid ahaa dadkii uu Salaaxudiin gacanta ku dhigay waxa uuna ku yiri soo adiga ma ahan ninkii muslimiinta xajka u socday dilaayay kuna lahaa U yeerta Muxammadkiina ha idin difaacee Arnat waxa uu yiri haa Salaaxudiin ayaa markaas waxa uu yiri Anigu waxaan ahay addoonkii Ilaahay ee miskiinka ahaa, Rasuulka Alle aniga ayuu ii wakiishay difaaca ummadiisa kadibna intuu qoorta ka jaray ayuu Alle u sujuuday isaga oo uga mahadcelinaayay guushaas qiimaha badan.

ALPA ARSALAAN

Haddii la idilo karfanteyda waa midaan

- Alpa Arsalaan

**

Suldaanka iyo Boqorka caadilka ah, libaaxa geessiga ah Mohammed Alpa Arsalaan, geerida adeerkiis (**طغرل بك**) **Tughtul bey**[18] Kadib ayuu qabtay maamulka dowladda Salaajiqada wuxuu ahaa Suldaan taariikh wanaagsan dadkiisa u dhimriya, deeqsi ah oo naxariis badan, fuqaradana ujilcan, ehelkiisa iyo asxaabtiisa baari u ah, waa mid kamid ah hoggaamiyeyaasha islaamka ee waaweyn, taariikhdana baal dahab ah ka galay, dowladdo badan oo dariskiisa ah oo kirishtaan ahaa

[18]) Waa Aasaasihii dowladda Seljuk iyo suldaankeedii ugu horreeyay, wuxuu xukumaayay intii u dhaxeysay 1037 ilaa 1063m

ayuu dowladdiisa kusoo daray, diintana ku faafiyay, Suldaanka salaajiqada Alpa Arsalaan wuxuu ahaa hoggaamiye jihaad, hadafkiisa wuxuu ahaa mideynta caalamul islaam.

Biloowga qarnigii shanaad ee hijriga Saljuuqiyiinta ayaa wax ay dhisteen dowlad xooggan waxa ayna muujiyeen in ay yihiin maamul ka tirsan Khilaafada Cabaasiyiinta oo xarunteedu aheyd Baqdaad, waqti kooban ayey ku fiday dowladdooda iyagoo gacanta ku dhigay maamulka iiraan iyo Ciraaq, Suldaan Tughrul Bey ayaa ah aasaasaha dhabta ee dowladdaan waqti yar ayuuna uga dhigay dowladda ugu awoodda badan caalamka islaamka, waxa uu dhisay dowlad nafta kusoo celisay Khilaafada Cabaasiyiinta oo tabar darri xun heysay kadib markii hoggaamiye kamid ah dowladdaas uu ku biiray dowladda Faadumiyiinta ee Shiicada ah,

Dowladda uu dhisnay Suldaan Tughrul Bey waxaa ka dhaxlay wiilka uu adeerka u ahaa ee lagu magacaabo Suldaan Alpa Arsalaan, maadaama Suldaanka uusan ka tagin wiil uu isaga dhalay oo maamulka ka dhaxlo, Suldaan Alpa Arsalaan waxa uu ahaa sidan adeerkiis Tughrul Bey wuxuu ahaa hoggaamiye caqli badan oo geesi ah aan cabsan, siyaasadiisu waxa ay aheyd in uu adkeeyo tiirarka dowladda ka hor inta uusan dhulal cusub qabsan, sida adeerkiis oo kale ayuu u jeclaa jihaadka iyo in uu islaamka ku dhax faafiyo dowladdaha

kirishtaanka ah wuxuu ahaa hoggaamiye dowladdeed sidoo kalena ah hoggaamiye jihaad wuxuu ku dadaali jiray ugargaarida islaamka iyo in lagu faafiyo dhulka calanka islaamkana in uu marwalba sare noqdo.

Suldaan Mohammed Alpa Arsalaan markii uu qabsaday maamulka wuxuu balaariyay dhulka dowladdiisa, Xuduudaha dowladdiisa ayuu ka nabad galiyay dowladdaha Yurub, kadibna wuxuu u jiheystay dhankii galbeedka si uu dowladdaha kirishtaanka ah ugusoo darro xukuumaddiisa wuxuu furasho ku bilaabay dhulalka Georgia iyo Armenia dhul ballaarsigaas uu sameeyay Suldaanka salaajiqada waxaa dhibsaday Boqorka ruum oo lagu magacaabi jiray Romanos, wuxuu ogaaday boqorkaas is balaarrintaas in aysan joojinnayn salaajiqada markaasna wuxuu diyaarsaday ciidan tiro ahaan gaaraayay labo boqol oo kun oo askari, Wuxuu kasoo baxay Qustandiiniya oo aheyd caasimada dowladdiisa isagoo yaqiinsan in uu ka guuleysan doonno salaajiqada wuxuu yimid meel lagu magacaabo (ملاذكرد ¦ Malazgirt) oo ay isku diyaarrinayeen ciidanka salaajiqada.

Suldaan Alpa Arsalaan wuxuu arkay ciidan tiro badan halka ciidankiisa ay ahaayeen 15kun oo kaliya, Suldaankeenna wuxuu isku dayay in uu wada-hadal la sameeyo Romanos oo ah Boqorka ruum, Balse Romanos wuu diiday codsigaas isagoo kibir iyo isla weyni ay ka

muuqato, yaqiinsana in uu guuleysan doonno ayuu dalbaday heshiiska in uu ka dhaco Magaalada Rey (مدينة الري) oo aheyd Caasimada dowladda salaajiqada.

Alpa Arsalaan waxaa u caadatay markaan arrinka in uusan sahal aheyn, Ciidankiisa ayuu ku dhiirragaliyay jihaadka wuxuuna jecleysiiyay Shahaadada Alle dartii ah wuxuu xasuusiyay qiimaha sabarka iyo sugnaanta, kadib Suldaanka Sheekhiisa ayaa kula taliyay in uu dagaalka ku qaado maalin jimco ah xilliga Khudbada jimcada ay socoto khadiib walbana uu minbarka saran yahay, waayoo markaas mujaahidiinta ayey ugu duceynayaan guul.

Waxaa la gaaray xilligii dagaalka, Sheekha Suldaanka ayaa salaada tujiyay, Salaada kadib Suldaanka ayaa ooyay isaga oo duceysanaayo, dadkiina wey la ooyeen, Wuu duceeyay, ayagana wey la duceysteen, kadibna wuxuu xirtay dhar cadaan ah, wuxuuna yiri haddii la idilo karfanteyda waa midaan.

Suldaan Alpa Arsalaan wuxuu diyaariyay qorshe dagaal oo cajiib ah, xamaasad iyo naf hurnimo ayuu ku Iftiimiyay qalbiyada ciidankiisa, markii uu dagaalka bilaawdayna libaaxyada muslimiinta sida libaax careysan ayey u ugaarsadeen ciidankii roomaanka ahaa, iyaga oo waxwalba oo kasoo hor baxa cagta marrinaayay jaceyl ay shahaadada uqabaan awgeed, cadoowga ayey

u weerareen si naf hurnimo iyo geesinnimo leh, dil iyo dhaawac ayey iskugu dareen, Waxyar kadibna ciidanka muslimiinta waxa ay soo hooyeen guul weyn meydadkii kirishtaankana waxa ay buux dhaafiyeen barxadda dagaalka.

Ciidanka muslimiinta waxa ay gacanta kusoo dhigeen boqorkii kibirsanaa ee Romanos ahaa waxaa loo keenay Suldaan Alpa Arsalaan, Suldaanka ayaa iska fasaxay Romanos kadib heshiis uu kula galay kaas oo ah in uu bixiyo madax furasho iyo in uu soo fasaxo qofwalba oo muslim ah oo ku xiran dhulkaas, iyo heshiis xabad joojin ah oo 50 sano socon doonno, Muddada heshiiskaasna uu bixinnaayo Jizyada sannad laha ah, iyo in ay soo celiyaan dhulka shaam ay muslimiinta ka qaateen Kadibna Suldaanka ayaa siiyay lacag uu safarkiisa ugusii kaalmeysto, Qaar ciidankiisa kamid ahna wuu ku darray si ay u gaarsiiyan halka uu rabo.

Boqortooyadii Qustandiiniya markii ay maqashay guul-darrada uu soo hooyay boqorkooda, Magaciisa ayey ka tireen diiwaanka Boqoradooda, Boqor kalena wey caleema saarteen.

Guushas muslimiinta waxa ay u aheyd mid kamid ah guulaha ugu waa weyn ay muslimiinta ka guuleysteen Ruum, Boqortooyada Ruumna ay awooddeeda ku daciiftay.

BARAKA KHAN

Culimada iyo dadka wanaagsan ayuu jeclaa, wuxuu ahaa deeqsi caadil ah oo geesi ah

- Taariikhyahanada

**

Baraka khan waa ninkii ugu horeeyay ee kasoo islaamay dowladdii mangooliska ee burburisay dowladdihii islaamka iyo caasimadii Ummada muslimka ah oo Baqdaad aheyd, sidaas darteedna mangooliska waqooyiga ayaa ugu hor islaamay qoyska Jinkis khan ee mangooliska ah, wuxuu islaamay sannadkii (650 Hijri), isaga oo markaas kasoo noqonnaayay Caasimada dowladda mangooliska oo aheyd Qaraqorum([19]) ayuu

[19]) Waxa ay ku taallaa dalka manta loo yaqaan Mongolia, waxana ay hore u ahaan jirtay caasimadda Boqortooyada Mongol, taas oo ku fidsaneyd

soo maray magaalada Bukhaara, halkaasna wuxuu kula kulmay mid kamid ah Culimada islaamka kadibna wuxuu qaatay islaamnimadiisa markaasna waxa uu farriin u diray Boqorka dowladda Mammaaliikta oo ahaa Bibris (Baibaras) waxa uuna ku yiri sidaan waad ogtahay jaceylka aan islaamka uqabo, sidoo kale waad ogtahay waxa uu Holaako ku sameeyay Muslimiinta, adigana dhinacaaga kasoo dagaal tag anigana dhinaceyga Ayaan kasoo dagaal tagayaa ilaa aan ka jabino ama aan dhulka ka saarno isaga, waxaana ku siiyay dhammaan dhulalka uu Holaako gacanta ku haayo.

Baraka khan wuxuu gacanta ku dhigay maamulka dowladda mangooliska ee qeybta waqooyi, islaamnimadiisa darteed waxaa kusoo islaamay dad badan oo mangoolis ah, aad ayuu ugu xamaasadeysnaa islaamka jaceyl saaid ahna wuu u qabay, wuxuu beycada siiyay khaliifka muslimiinta ee dowladda Cabaasiyiinta Al-mustacsim Billaah, Baraka khan wuxuu dhisay caasimadii mangooliska ee waqooyi oo aheyd Magaalada Saray (oo ah magaalada Saratov ee ruushka

---

bariga Kuuriya ilaa xadka galbeedka Yurub iyo bariga Carabta, waxaa dhisay Jinkis Khan waxa uuna ku qurxiyay waxyaabo qadiimi ah iyo taalooyin uu ka soo qaatay dhulkii uu qabsaday.

ku taalo xilligaan) sidoo kale wuxuu ka dhisay masaajid weyn, magaaladaasna wuxuu ka dhigay magaalada ugu weyn adduunka ee xilligaas.

Holaako Khan ayaa walaalkiis oo ahaa Khanka weyn oo lagu magacaabi jiray Monko Khan waxa uu ku qanciyay in ay ku duulaan caasimada islaamka ee Cabaasiyiinta oo Baqdaad ah iyo in ay gacanta ku dhigaan dhulalka muslimiinta ee u horay, Monko Khan isagana fikrada walaalkiis ayuu soo dhaweeyay waxa uuna diyaariyay ciidan xooggan, iyaga oo is diyaarrintaas ku jiro ayaa waxaa arrinkooda maqlay Baraka khan, Xilligaasna waxa uu ahaa xilligii Bato Khan oo ahaa wiilka uu awoowaga u yahay Jinkis Khan sidoo kalena ahaa Baraka walaalkiis, dadaal dheer kadib Baraka walaalkiis Bato ayuu ku qanciyay inaan lagu duulin Baqdaad, Bato isagana codsiga walaalkiis ayuu qaatay markaasna wuxuu farriin u diray Holaako khan isagoo ka reebayay duulaanka Baqdaad Holaako isagana wuxuu qaatay amarka Bato, Markii uu dhintay Bato ayuu Holaako qorshihiisa duulaanka Baqdaad ahaa fuliyay, Baraka ayaa markaas isku dayay in uu celiyo balse Holaako iyo ciidankiisa dhagaha ayey ka xirteen, markaasna khilaaf xooggan ayaa soo kala dhaxgalay Baraka iyo Holaako khilaafkaas oo ugu danbeyn sababay dagaal xooggan in uu dhaxmaro ciidanka Holaako iyo Baraka khan dagaalkaasna waxaa jab xooggan lagu gaarsiiyay ciidanka Holaako sannadkii (660 hijri) isla sannadkaas markale waxaa dagaal kale uu dhaxmaray Holaako iyo Baraka markaana waxaa la jabiyay ciidanka Baraka khan, Holaako ayaa markas isku

dayay in uu ka faa'iideysto jabkaas wuxuu damcay in uu soo afjaro Baraka khan, wuxuu soo diray ciidan uu hoggaamiye ugasoo dhigay wiilkiisa Abqaa Khan, Baraka khan isaga ayaa hoggaaminaayay ciidankiisa halkaasna waxaa jab kale oo xooggan lagu gaarsiiyay ciidankii Holaako khan sannadkii (661 hijri), Holaako wiilkiisa oo dagaalka lagu jabiyay isaga iyo ciidankiisa intii badbaadayna goobta ayey isaga carareen.

Baraka khan wuxuu xiriir la sameeyay Boqortooyada mammaaliikta oo uu markaas hogaaminayay ninka lagu magacaabi Bibris (Baibaras), Boqorka mammaaliikta isagana Baraka ayuu ku dhiirragaliyay dagaalka Holaako Khan sidoo kalena waxa uu u sheegay islaamka in uu ku waajibinaayo in uu la dagaalamo cadoowga diinta xita haddii ay yihiin ehelkiisa iyo qaraabadiisa, dhab ahaanna Baraka Bibris (Baibaras) ayuu ka caawiyay dagaalka Holaako lagula jiray, isla waqtigaasna isaga ayaa si toos ah ula dagaalamaayay Holaako si uu culeyskiisa uga qafiifiyo dowladda mammaaliikta.

Baraka khan kuma gaabsan oo kaliya ugargaarida iyo dagaalka uu kula jiray wiilasha ay isku dhiigga yihiin ee duulaanka ku ahaa islaamka iyo ehelkiisa, ee wuxuu dajiyay qorsheyaal uu ku daciifinayay awoodda dowladda sanam caabudka ah ee mangooliska si uu qorshahaas u fuliyo islaamkana ugu dhax faafiyo waxa uu ka faa'iideystay geerida Monko khan oo ahaa hoggaamiyaha magooliska, wuxuu dagaal ka dhax shiday Artuq Boka iyo

Qablaay oo u sharaxnaa hoggaanka dowladdaas, markaasna ciidanka mangooliska iyo madaxdooda waxa ay doorteen Qablaay, Baraka khan isagana wuxuu awood siiyay Artuq Boka si uu maamulka ugu qabsado walaalkiis Qablaay, sannadkii (658 hijri) labadaan walaalaha ah waxaa dhaxmaray dagaal muddo badan qaatay, markaasna Holaako oo ciidanka shaam hoggaaminayay ayaa ku qasbanaaday in uu ka tago dagaalka oo uu ulaabto magaalada Qarquum oo aheyd caasimada mangooliska, isaga ayaa markaas qaboojiyay dagaalka, Qablaay ayaana loo doortay maamulka, Markaasna Baraka khan wuxuu fuliyay qorshe kale kaas oo ah ciidankii uu Holaako uga tagay shaam ayuu diinta ugu yeeray in badan oo ciidankaas ah ayaana diinta xaqa ah qaatay iyagoo la saftay ciidanka boqortooyada mammaaliikta, Holaako ayaa markaas aad ugu xannaaqay Baraka Xanaaq sababay geerida Holaako sannadkii (663 hijri), Holaako wiilkiisa Abqaa ayaa ka dhaxlay naceybka iyo dagaalka lagula jiray Baraka khan, isaga iyo ciidanka Baraka khan ayaa waxa dhaxmaray dagaal lagu jabiyay ciidanka Baraka khan, markale Baraka isaga ayaa soo hoggaamiyay ciidanka balse isaga oo wadada ku jiro ayuu dhintay sannadkii (665 hijri) Alle haka raali noqdo oo qabrigiisa ha unuuriyo, wuxuu diinta islaamka qaatay Muslimiintana uu garab u noqday xilli adag, xilli walaalihiis ay isku dhiigga ahaayeen ay kusoo duuleen diinta islaamka.

Al-XAAJIB AL-MANSUUR

Waxa uu ahaa nin go'aan adag, aadna loo ixtiraamo, mana aynaan maqlin boqoradii islaamka kuwii hore iyo kuwii dambeba qof lamid ah isaga marka laga reebo Cumar Binu Khadaab

- Ibnu Sammaak

**

25 sano oo dagaal ah, Waligiis dagaal laguma jabin, xilligiisa wuxuu dhulka afka u daray Yurub, Wuxuu ku qasbay in ay jizyada bixiyaan iyaga oo duleysan, Markii uu dhintayna Yurub oo dhan ayaa ku faraxday geeridiisa, waa geesi aan waligiis la jabin wuxuu galay 54 dagaal, Romaanka ayuu cabsi ku Abuuray, Ispaanishkana cashiro wanaagsan ayuu udhigay magaciisana waa Muxammad Binu Abii Caamir wuxuu maamulka islaamka qabtay inta u dhaxeysay (366 hijri ilaa 392 hijri) Waqtigiisa wuxuu ku qaatay jihaad uu kula jiray kirishtaanka , Maamul wanaagiisa iyo siyaasadiisa

toosan ayuu Andalus ku gaarsiiyay waqtigeeda ugu wanaagsan.

Muxammad Binu Abii Caamir wuxuu galay 54 dagaal waligiisna lama jabin, arrinta cajiibka ahaa waxa ay tahay in uu gaaray Dhulal aysan gaarrin mujaahidiintii asaga ka horeysay sida Daariq Binu Ziyaad, Wuxuu gaaray mandiqada Covadonga oo Isbayn(spain) ku taalo waana mandiqad aysan muslimiinta horay u furan, Wuxuu awood u yeeshay geesiga qisadeenna in uu kirishtaanka ku weeraro guryahooda, wuxuu gaaray badda Atlantic ee waqooyi, intaas oo duulaan marka uu waday ciidankiisana lama jabin calankiisana dhulka ma dhicin, xilligaas waxaa caan aheyd dagaalada in ay dhacaan hal xilli oo kaliya ahna xilliga xagaaga balse geesiga qisadeenna sannadkii laba mar ayuu jihaad gali jiray Xagaaga iyo jiilaalka.

Duulaannada ugu waaweyn ee uu Xaajib Al-Mansuur qaaday waxaa kamid ah duulaanka Magaalada (Shant Yaqab[20]- (شننت ياقب.) Ama qidiis Yacquub Magaaladaas

[20]) Waa mid ka mid ah degmooyinka gobolka Cargia, oo ka mid ah gobollada dalka Spain, waxa ay ku taalaa gobolka Galicia ee waqooyi-galbeed Spain.

Waxa ay ku taalay waqooyi galbeed ee fog ee jaziirad u ekaha Aybeeriya (Iberian) dhulka Andalusna aad ayey uga fogeyd saas darteedna ma jirin cid gaartay Halkaas Xaajib Al-Mansuur ka hor, magalaadana waxa ay aheyd magaalo kirishtaanka agtooda xurmad ka leh, wadamo badan ayey isaga imaan jireen si ay usoo booqdaan qabriga qidiiskaas Yacquub ah, Boqorada kirishtaanka ee waqooyiga marwalba uu Xaajib Al-Mansuur weeraro caasimadahooda waxa ay u carari jireen halkaas iyaga oo gabaad ka dhigan jiray, Sababtaas darteed Xaajib Al-Mansuur wuxuu go'aansaday in uu aado magaaladaas oo uu burburiyo dhufeysyadeeda iyo qasriyadeeda, Si ay u ogaadan gaaladaas Muxammad Binu Abii Caamir meel laga galayo in aysan jirin.

Qisada magaaladaan waxaa la sheega ninkaa qidiiska ee Yacquub la dhaho in uu kamid ahaa Xawaariyiintii Nabi Ciise ee 12ka ahaa wuxuu aad ugu dhawaa Nabi Ciise waxa ayna ku magacaabeen walaalkiis, -walaalka Illaah- Alle ayaa ka hufan waxa ay sheegayaannee.

Sannadkii (378) xilliga xagaaga waa duulaankii 48aad ee uu hoggaaminaayo Xaajib Al-Mansuur isaga oo ku wajahan magaalada Shant Yaqab- (شنتت ياقب.), wuxuu diyaarsaday ciidan inta uu jidka kusii socdayna waxaa kusoo biiray ciidan badan oo kirishtaanka Isbayn(spain) ah kuwaas oo uu la saxiixday heshiis ku waajibinayo in ay la qeybsadaan dagaalada, Buuraha ayuu jid ka furtay

ilaa uu gaaray magaalada, isaga oo gacanta ku dhigay dhammaan meelihii uu soo maray kana soo qanimeystay hanti badan, Magaaladii Shant Yaqab- (شننت ياقب.) wuxuu u tagay iyadoo cidlo ah iyo nin kirishtaan suufi ah oo dul fadhiyo qabriga qidiiska, wuxuu weydiiyay sababta uu meesha u joogo wuxuu yiri Waxaan wehlinayaa Yacquub markaas ayuu amray in uu Meesha ka tago isagoon la taaban, wuxuu amray in la burburiyo dhufeysyada iyo qalcdaha magaalada sidoo kale wuxuu amray inaan la taaban qabriga qidiiska, Xaajib wuxuu tagay xeebta isaga oo cidna aysan hortiisa istaagin kadib ayuu iskasoo laabtay markuu soo qaniimeystay muslimiintana wuxuu ugu bishaareeyay furashadaas qiimaha badan.

Dhacdo naadir ah Al-Xaajib Al-Mansuur ciidan dhan ayuu u diyaariyay si ay usoo badbaadiyaan saddex dumar oo muslimiin oo qafaal u ahaa Boqortooyada Naaffaar[21] Boqortooyadaas iyo Xaajib waxaa ka dhaxeeyay heshiis ah in ay bixiyaan jizyo shuruuddahana waxaa kamid ahaa in aysan wax dhib ah u geesan qof muslim ah, Arrinkaasna wuxuu dhacay mar uu Xaajib Al-Mansuur u diray

[21]) Markii hore waxaa loo yaqaan Boqortooyada Pamplona, waxayna ku taalay meel u dhow buuraha Pyrenees iyo Badweynta Atlantic, Waxaa la aas aasay sannadkii 824-kii

farriinside Boqortooyada Naaffaar, Farriinsidiihii markii uu geeyay farriinta isaga oo dhax wareegayo Boqortooyada Naaffaar ayuu arkay saddex dumar oo muslimiin ah oo lagu qafaashay kanniisad, markuu arkay ayuu la yaabay waxa ay meesha u joogan markaas ayuu dadkii weydiiyay arrinkooda waxaana loo sheegay in meesha lagusoo qafaashay, markaas ayuu si daran inta u xanaaqay utagay Xaajib Al-Mansuur una sheegay arrinka, Xaajibna markii uu maqlay arrinka ayuu diyaariyay ciidan xooggan si uu usoo badbaadiyo dumarkaas, Markii ay ciidankii tageen dhulkii Naaffaar ayuu boqorkii Naaffaar isku naxay wuxuuna yiri Ma naqaano waxa idin keennay, waxaa naga dhaxeeyay heshiis ah in aynaan dagaalamin, Jizyadana waa idin siin jirnay Markaas ayey si kalsoonni leh ugu jawaabeen waxaad buriseen balantii, Waxaadna qafaalateen dumar muslimiin ah Boqorkii Naaffaar ayaa dhahay waxba kama ogin arrinkaas, Farriinsidihii ayaa baxay oo kanniisada tagay wuxuuna soo bixiyay saddex dumar ah, Boqorkii ayaa dhahay Dumarkaan waxba kama naqaanno waxaa soo qafaashay askari kamid ah ciidanka, isagana waan ciqaabeynaa markaas ayuu u cudurdaartay Xaajib Al-Mansuur wuxuuna usheegay kanniisadaba in la duminnaayo, markaasna geesigeenna wuxuu u laabtay magaaladiisa isagoo dumarkiina wato.

Arrin kale oo cajiib ah Xaajib Al-Mansuur inta uu ku jiray jihaadka ayuu maalin wuxuu ka gudbay wado laba buurood dhaxmarto oo yar markaasna kirishtaankii ayaa jid gooyo u sameeyay, markii Xaajib iyo ciidankiisa ay ka

gudbeen waddadii ayey kirishtaankiina waddadii xireen, Xaajib iyo ciidankiisa markii ay soo laabteen iyaga oo rabay in ay Meesha ka gudbaan ayey arkeen waddadii oo xiran, Xaajib isma dhibin ee markiiba gadaal ayuu u laabtay wuxuuna gacanta ku dhigay magaalo kirishtaan ah dadkeediinna banaanka ayuu isaga saaray, halkaas ayuu ciidankiisa dajiyay dhufeysna ka dhigtay waqti badana ku noola, halkaas ayuu jizyada uga qaadi jiray gaalada, kirishtaankii markii ay ka yaabeen ayey madaxdoodii u tageen iyaga oo careysan kana dalbadeen in ay u furaan Albaabka oo uu iska laabto ama ay xal kale u keenaan ninkaan, madaxdiina arrinkas ayey aqbaleen Xaajib ayey ku dhaheen Albaabka waan ku furay orodoo iska laabo Xaajibna wuxuu usheegay in uu joogi doonno sannadka inta ka dhimman, sannad walbana uu laba jeer usoo laaban doonno, gaaladii go'aan aan aqbalid aheyn hortooda ma yaalin waxa ay ka dalbadeen in uu u laabto dhulkiisa waxa ayna u diyaariyeen qanniimada iyo wixii lagu qaadi lahaa, markaas ayuu ku yiri waxaan go'aansaday inaan joogo, markaas ayey qanniimadii uga tageen, kadibna heshiiskooda ayuu aqbalay albaabkii ay xireenna wey u fureen, Waxaaba umaleysaa Xaajib Al-Mansuur in uu ficil ahaan inoo tusay hadalkii Amiirul Mu'miniin Cumar Binu Khadaab Rc ee ahaa Waxaan nahay dad uu Alle ku sharfay islaamka, marwalboo aan Sharaf ka raadinno Cid aan Alle aheyn, Alle ayaa ina duleeyo.

ABUU YUUSUF YACQUUB AL-MANSUUR

U celi, waxaana ula imaan doonna ciidan ayna awood u laheyn waxaana ka saareyna magaalada iyaga oo duleysan oo ihaaneysan, Jawaabtuna waxa ay noqon doonta waxaad aragto ee ma ahan waxaa maqleyso.

- Abuu Yuusuf Al-Mansuur

**

Dowladda Muwaxidiinta ayaa dhaxashay dowladda Muraabidiinta taas oo ka talin jirtay galbeedka Afrika iyo Andalus, Dowladda muraabidiinta waxa ay guul lixaad leh ka gaartay dagaalkii Zalaaqa oo aan kassoo sheekeynay taariikhdiisa, dowladdaasna waxaa baddashay dowlad kale oo lagu magacaabo dowladda Muwaxidiinta.

Abuu Yuusuf Yacquub Binu Yuusuf Al-Mansuur-billaah Waa khaliifka saddexaad ee dowladdii muwaxidiinta taas oo ka talin jiray galbeedka Afrika, Aabihiis Yuusuf ayuu kala wareegay maamulka Sannadkii 580 ee hijri , wuxuu dagaalo badan la galay saliibiyiinta Andalus qaasatan Boqorka Qashtala, Al-Foonsoga siddeedaad, Dagaaladaasna waxaa kamid ah, dagaalkii Arak (معركة الأرك) oo dhacay (9 bisha shacbaan Sannadkii 591), dagaalkaaas wuxuu kaalin buuxdo ka qaatay sugida iyo balaarrinta dhulka dowladda Muwaxidiinta ah, Markaas kadib Al-Foonso wuxuu ku qasbanaaday in uu wadahadal ka dalbado Suldaan Abuu Yuusuf Yacquub Al-Mansuur.

Taariikhyahannada dagaalkaas waxa ay ku sheegan in uu lamid ahaa dagaalkii Zalaaqa ee jabka xooggan lagu gaarsiiyay Saliibiyiinta Aybeeriya (Iberian), dagaalkaan waxa uu ka dhacay meel udhaw qalcad lagu magacaabo Al-arak (الأرك).

KA HOR DAGAALKA

Sannadkii (587) Boqorka Bortuqiiska (Portugese) Sanshooga koowaada ayaa ku duulay magaalada

Shalab[22] ee muslimka aheyd isaga oo garab ka helaayay gaalada kale ee Saliibiyiinta ah, Abuu Yuusuf oo joogay galbeedka Afrika ayaa markii uu ogaaday arrinka wuxuu diyaarsaday ciidankiisa wuxuu kasoo gudbay badda, wuxuuna dib usoo celiyay afar magaalo oo ay gaalada horay uga qaateen muslimiiinta muddo afartan sanno ka hor ah, arrinkaasna wuxuu cabsi ku Abuuray boqorada Aybeeriya (Iberian) Qaasatan Al-Foonso ugu danbeyna Suldaanka ayuu ka dalbaday heshiis muddo shan sano ah, Markaasna Suldaanka wuxuu iska laabtay.

Markii ay dhammaatay mudadii shanta sano aheyd, Al-Foonso ayaa ciidan xooggan udiray dhulka muslimiinta si ay burburin iyo fasaad uga sameyaan arrinkaasna wuxuu ahaa cabsi galin, wuxuuna farriin jeesjees iyo edeb darro ah u diray Suldaanka isagoo ka dalbaday dagaal, Suldaanka markii uu aqriyay farriinta, dhinaceeda kale ayuu ugu qoray jawaab udhigan sidaan U celi, waxaana ula imaan doonna ciidan ayna awood u laheyn waxaana ka saareyna magaalada iyaga oo duleysan oo ihaaneysan, Jawaabtuna waxa ay noqon doonta wax ay arkaan ee ma ahan wax ay maqleyaan.

---

[22]) waa Magaalo ku taalo koonfurta Portugal ee gobolka Algarve

Abuu Yuusuf isaga oo xanaaqsan ayuu ciidanka amray in ay u diyaar garoobaan duulaanka Andalus, isaga iyo ciidankiisa waxa ay soo aadeen dhankii Andalus waxa ay kasoo talaabeen jaziirada cagaarneyd, Si toos ah waxa ay u aadeen dhankii qashtala ciidankana waxaa kusoo biiraayay ciidankii Andalus, ciidankunna waxa uu noqday ciidan xooggan tirro ahaana gaarayay laba boqol oo kun oo askari, Suldaanka ciidankiisa ayuu ku nidaamiyay sahayna uga qaaday magaalada ishbiiliya (Seville) oo ku taalo Isbayn(spain) kadib waxa uu aaday dhankii Caasimada Boqortooyada qashtala oo aheyd magaalada Toledo (طليطلة) oo iyadana ku taalo xilligaan wadanka Isbayn(spain), Al-Foonso wuxuu diyaarsaday ciidan xooggan oo tirro ahaan garayay 225kun oo Saliibiyiin ah iyo qaar Yuhuud ah oo damacoodu ahaa markuu dagaalka dhammaado in ay helaan muslimiin ay qafaashaan ama addoonsadaan si ay u iibiyaan.

Nin lagu magacaabi jiray Cabdullaahi Binu Sanaadiid Kana mid ahaa hoggaamiyeyaasha dagaalka ee Andalus ahaana nin caqli badan oo qabiir ku ahaa xirfadaha dagaalka ayaa Suldaanka siiyay talooyin, wuxuu kula taliyay in uu u kala qeybiyo ciidanka sidaan;

- Ciidanka Andalusiyiinta in uu gooni u sooco, hoggaamiyana uga dhigo mid iyaga kamid ah si aysan awooddooda u daciifin haddii uu

hoggaamiye u noqdo qof aan ka mid aheyn iyaga, dhanka midig ee ciidankana uu dhigo.

- Carabta iyo Barbarka iyagana in uu dhigo dhanka bidix.
- Ciidanka Boqortooyada muwaxidiinta iyagana in la dhigo dhaxda.
- Dadka jihaadka rabo balse aan xirfad dagaal laheyn ee Carabta iyo Barbarka iyo Andalusiyiinta isugu jiro iyagana in la dhigo qeybta dambe.
- Suldaanka iyo ciidankiisa qaaska ahna ay buuraha gadaalkooda galaan, marka loo baahdana ay gurmad ahaan usoo baxaan.

Suldaanka Fikradaas wuu aqbalay, arrinkaasna wuu sameeyay, Kadib ayuu ciidanka ku dhiirragaliyay geesinnimada iyo Alle tala saarashada.

Waxaa bilawday dagaalkii, Ciidankii Qashtaaliyiinta ahaa ayaa koox koox usoo galayay dagaalka ciidankii Muslimiintana waxa ay ku dhawaadeen in la jabiyo balse Suldaankii ayaa arkay markaas ayuu kor ugu qeyliyay isaga oo leh Niyadiina cusbooneysiiya, oo qalbigiina soo xaadiriya kadibna booskiisa ayuu ku laabtay, markaas kadib muslimiinta waxa ay awooden in ay celiyaan ciidanka Saliibiyiinta, haddane sidii oo kale Muslimiinta ayaa la jabin gaaray balse Alle ayaa sugay, Mar

saddexaad haddane ciidanka Saliibiyiinta ah waxa ay gudaha u ciidanka muslimiinta iyaga oo qeybta dhaxe ee muslimiinta dad ka dilay, Markaas ayey Saliibiyiinta umaleyeen guusha in ay iyaga raacday, Boqorka qashtala Al-Foonso ayaa markaas goobta dagaalka soo galay isaga oo ay garbahiisa socdaan toban kun oo askari, isla markaas qeybta midig ee ciidanka muslimiinta Andalusiyiinta ah ayaa gudaha u galay ciidanka Saliibiyiinta waxa ayna go'doomiyeen tobankii kun ee ilaalada u ahaa Al-Foonso, markaasna waxaa isku dhax yaac ka dhacay ciidankii Saliibiyiinta, hawadana waxaa buux dhaafiyay boor codka kaliya ee markaas la maqlaayay wuxuu ahaa bir isku garaacmeyso iyo takbiirta ciidanka muslimiinta ah.

Suldaan Abuu Yuusuf Al-Mansuur iyo ciidankiisa oo markii hore buuraha gala la dhahay ayaa soo baxay iyaga oo wato calanka dowladda muwaxidiinta ee cadaanka ah kaas oo ay ku qorneyd kalimada tawxiidka iyo kalimad kale oo aheyd guuleyste ma jiro Alle mooyee Isla markaas Kartida ciidanka muslimiinta ah ayaa sare noqotay, Duligana wuxuu ku habsaday Saliibiyiinta waxaana leyskugu daray dil iyo barakicin, Ciidanka mujaahidiinta ah ayaa guul lixaad leh kasoo hooyay dagaalkaas taariikhduna markaas waxa ay aheyd (9 bisha shacbaan 591) Al-Foonso ninkii kibirsanaa isagoo jab iyo hoog isku darsaday ayuu qaar ciidankiisa kamid ah ula cararay dhankii Caasimadiisa Toledo (طليطلة),

Guusha ay muslimiinka maalinkaas gaareen waxa ay aheyd farxad aan wax lagu tilmaamo laheyn guushas waxa ay timid kadib sideed sano dagaalkii Xidiin markii uu dhacay.

SAFIYA BINTU CABDI MUDHALIB

Raali ayaan ku ahay xukunka Alle, Wallaahi waan sabri doonna waana ajir xisaabsan donna insha Allaah

- Safiya Binu Cabdi Mudhalib

**

Wax badan waxaan kasoo sheekeynay raggii geesiyada ahaa ee diintaan dhiigooda iyo naftooda u huray, balse hadda waxa aan ka sheekeyn doonna Haweeney sameeysay wax ay sameyn kari waayeen ragga, haweeney udhiganto kumannaan rag ah, cadoowga islaamkana jab xooggan gaarsiisay iyadoo kaligeed ah, Dagaalkii Axzaab kaligeed ayey ilaalinnaysay hal dhufeys heer gaalada ay umaleeyeen dhufeyska in uu ku jiro ciidan fara badan, geesinimaddeeda awgeed, qofta aan ka hadleyno cid kale ma ahan waa Suubanaheenna Muxammad scw eedadiis, kana mid ah marwooyinka Carbeed **SAFIYA BINTU CABDI MUDHALIB.**

Marwo aragti dheer ragguna ay kumannaan jeer ku xisaabtami jireen, waa saxaabiyad geesiyad ah waana Marwadii ugu horeysay oo nin gaal ah disho diinteeda iyadoo difaaceyso, Marwo go'aan adag taas oo dhashay geesigii ugu horeeyay ee seef u siibto Alle dartii, Aabaheed waa Cabdimudhalib Nabiga scw awoowgiis kana mid ahaa hoggaamiyeyaasha Qureysh, hooyaddeed Waa Haalla Bintu Wahab oo la dhalatay Nabiga hooyadiis Aamina Bintu Wahab, ninkeedii hore wuxuu ahaa Xaarith Binu Xarbi oo la dhashay Abuu Sufyaan oo ahaa hoggaamiye Qureysheed, balse wuu ka dhintay, kadibna waxaa guursaday Al-Cawaam Binu Khuweylid oo la dhashay Khadiija Bintu Khuweylid oo ah hooyada Mu'miniinta, wiilkeeda waa Zubeyr Binu Al-Cawaam oo ahaa Ugargaaraha Suubanaha scw, Sharaf intaas ka badan oo ay nafta jeceshahay miyaa jirto..?

Ninkeeda Al-cawaam Binu khuweylid markii uu ka dhintay wuxuu uga tagay wiilkeeda yare ee Zubeyr ah waxa ay kusoo korisay qalafsanaan iyo xoog iyo Geesinimo iyo dagaal, waxa ay u diri jirtay meel walba oo laga cabsado, haddii ay aragto in uu ka warwareegayo Si daran ayey u garaaci jirtay, heer mid adeeradiis kamid ah uu yiri Ma sidaana loo garaaca ilmaha, waxaad u garaaceysaa si naceyb ah ee uma garaaceysid si hooyanimo ah Markaas ayey si xanaaq ah ugu jawaabtay iyada oo leh:

Qofkii dhaho waad nacday been ayuu sheegay
Waxaan u garaacayaa si uu unoqdo qof caqli badan
Ciidankana uu ujabiyo, Hantida uu noogu keenno

Markii lasoo saaray Nabiga scw isaga oo dadka u digaayo Una bishaareynayo dacwadana ka bilaabayo ehelkiisa ayuu kulmiyay reer Cabdimudhalib raggooda iyo dumarkoodaba markaas ayuu ku yiri Faatima Bintu Muxammadeey...!! Safiya Bintu Cabdumudhalibeey...!! Reer Cabdimudhaliboow...!! aniga waxba idinkagama qaban karo Alle xaggiisa Kadibna wuxuu ku booriyay in ay rumeyaan Alle oo risaaladiisa qaataan… Safiya waxa ay ku jirtay dadkii ugu horeeyay ee diinta xaqa ah Suubanaha ka qaatay, Markii uu Alle amray Nabigiisa in uu u hijroodo magaalada Madiina Safiya waxa ay ku jirtay dadkii hijrooday iyaga oo diintooda baxsad la ah.

Safiya inkasta oo ay lixdan jir eheyd haddana furimaha jihaadka waxa ay ku leedahay xasuuso fara badan oo aysan taariikhda marna iloobi karrina, Maalmahaas ay cajaa'ibta furimaha dagaalka ka dhigtay waxaan kasoo qaadan doonna laba qiso, dagaalkii Uxud iyo dagaalkii Axzaab.

Maalinkii Uxud iyada iyo qaar kamid ah dumarka muslimiinta ayaa u baxay jihaadka iyaga oo biyaha uwaday ragga dagaalamayo, waraabinaayo midkooda ooman, falaaraha u afeynayo, hubka ka halaaba u

toosinaayo, intaas iyada waxaa u dheera dagaalka ayey kor ka ilaalinnaysay taasna layaab malahan oo furinta dagaalka waxaa taagan wiilka ay eedada utahay Muxammad Binu Cabdillaah scw, iyo walaalkeed Xamza iyo wiilkeeda Zubeyr.

Safiya iyada oo daawaneyso dagaalka ayey aragtay Muslimiintii oo cidleeyay Suubanaha dhinaciisa gaaladana ay rabaan in ay ka taqalusaan, markaas ayey tuurtay weelkii ay wax ku waraabinnaysay, barxadda dagaalkana ugusoo boodday sida libaax dhadig ah oo dhalaankiisa la wareeray, muslimiintii soo jabay mid kamid ah ayey warankiisa ka qaadatay iyadoo markaas ku furaneysay waddo kuna qeylineeso Hoogeyaal...!! Ma waxaad ka jabteen rasuulkii Alle Nabiga scw markii uu arkay ayuu ka cabsaday in ay aragto walaalkeed Xamza oo dagaalka lagu dilay gaaladana ay si xun u suurad xumeeyeen markaas ayuu wiilkeeda Zubeyr udiray, Zubeyr ayaa markaas ku yiri hooyo laabo...!! hooyo laabo...!!

Waxa ayey tiri iga leexo Hooyo kuuma ihiyee.

Wuxuu ku yiri rasuulka Alle ayaa amray inaad laabato.

Waxa ay tiri Sabab...!! waxaan maqlay in si xun loo dilay walaalkeey, arrinkaasna waa Alle dartii.

Markaas ayuu Nabiga scw yiri Zubeyroow ka leexo.

Markii uu dagaalka joogsaday ayey Safiya aragtay walaalkeed oo calooshiisa la jeexay, oo beerkiisana bannaanka la keennay, sankana laga jaray, dhagahana laga gooyay Alle ayey danbi dhaaf u weydiisay iyada oo leh arrinkaan waa Alle dartii, raali ayaan ku ahay xukunka Alle, Wallaahi waan sabri doonna waana ajir xisaabsan doonna insha Allaah.

arrinkas wuxuu ahaa dagaalkii Uxud bal aan haddana u imaanno dagaalkii Axzaab.

Nabiga scw caadooyinkiisa waxaa kamid ahaa marka uu go'aansado in uu duulaan qaado dumarka iyo carruurta wuxuu geyn jiray meel gooni ah si aan loo soo daba marrin inta uu ka maqan yahay magaalada, dagaalkii Axzaab dumarkii iyo carruurtii iyo eedadiis Safiya wuxuu isugu geeyay dhufeys aad uga foggaa magaalada, xilligaasna ragga muslimiinta waxa ay ilaalo ka hayeen godka Axzaab iyaga oo hor taagnaa Qureysh iyo xulafadeeda waxa ayna iska iloobeen carruurtii iyo dumarkiiba.

Xilli habeen mugdi ah Safiya ayaa waxa ay aragtay qof socdo, dhagta ayey u raaricisay si toos ah ayey u fiirisay markaas ayey aragtay nin Yuhuudi ah oo usoo socdo dhanka dhufeyska, rabanna in uu jaajuuso dadka ku jiro meesha, Safiya waxa ay ogaatay in uu jaajuus u yahay tolkiisa rabanna in uu ogaado dhufeyska in ay ku jiraan rag iyo inkale, nafteeda ayey ku tiri markaas Yuhuudii reer Banii Qureyda Nabiga ayey balanta uga baxeen oo Qureysh

iyo xulafadeeda ayey uga hiilliyeen muslimiinta, iyaga iyo annagna inooma dhaxeeyso qof muslim ah oo naga difaaco Rasuulka iyo ciidankiisana waxa ay ilaalo ka hayaan furinta, ninkaan haddii uu arrinkeen gudbiyo Yuhuuda waxa ay qafaalan doonnaan carruurta iyo dumarka taasna muslimiinta dhib ayay ku tahay, Kadib ayey go'eeda madaxa ku duubatay sidoo kale dhaxda ayey xiratay garabka waxa ay ku qaadatay bud iyadoo rabtay ninkaas in ay ka taqalusto, nasiib wanaag madaxa ayey budka uga garaacday ilaa ay nafta ka baxday, markaasna madaxa inta ay ka jartay ayey surtay meesha ugu sareyso dhufeyska, ninkaas dadkii la socday ee uu jaajuuska u ahaa ayaa iyagana rabay in ay soo daba galaan saaxiibkood balse waxa ay arkeen madaxa saaxiibkood markaas ayey dhaheen Waan ogeyn Muxammad in uusan ka tageyn dumarka iyo carruurta ilaalo la'aan Waxa ayna isaga noqdeen godkoodii.

Safiya Bintu Cabdimudhalib Alle raali haka noqdo waxa ay tusaale cad u tahay gabar walba oo muslimad ah, Wiilkeeda ayey u tarbiyeysay si wacan, Walaalkeed Xamza ayaa shahiiday, si wacan ayey u sabartay, Waxa ay soo martay xilliyo adag balse waxa ay noqotay Marwo geesiyad ah oo caqli badan, Kitaabada taariikhda ahna waxaa ku qoran Safiya Bintu cabdimudhalib waa gabadhii ugu horeysay oo muslimad ah ee nin gaal ah disho.

UMMU CAMAARAH

Uma jixin jixaayo markaan kadib wax walboo adduunka igula dhaco.

- Ummu Camaarah

**

Maalinkii Uxud si geesinnimo leh ayey uga dagaalameysay furinta iyadoo difaaceysay Suubanaheenna Muxammad scw, isla maalinkaas wiilkeeda ayey ku weysay dagaalkii Uxud, Gacantedana waxa ay ku weysay dagaalkii Yamaama Marwada geesinnimadaas leh cid kale ma ahan waa **UMMU CAMAARAH** radiyallaahu canhaa.

Hadda waxaan istaageynaa meeshii uu ka dhacay dagaalkii Uxud, Marwada aan taariikhdeeda kaaga sheekeyn rabanna waa Nuseybatu Bintu Kacab Al-Maasiniyah oo caan ku ah Ummu Camaarah, Waxa ay aaday dhankii dagaalka Uxud iyada oo waday biyihii lagu waraabin lahaa mujaahidiinta sidoo kale waxa ay usoo baxday in ay daaweyso dhaawacyada ciidanka

taasna layaab malahn oo dagaalka waxaa ku jiray qalbigeeda oo Suubanaha scw ah iyo labadeeda wiil Xabiib Binu Zayd iyo Cabdullaahi Binu Zayd, iyo intaas oo lagu daray libaaxyada ay diinta Alle walaalaha ku noqdeen oo Nabiga garab taagnaa.

Markii ay dhibaatada dhacday dagaalkii Uxud, Ummu Camaarah waxa ay indhaheeda ku arkeysay guusha muslimiinta oo isku baddeleyso jab xooggan iyo siduu dagaalka ugusoo xooggeysanaye safka muslimiinta, iyo mujaahidiin badan oo shahaadada qaadanayay iyo sida ay muslimiinta u cidleyeen Nabiga garabkiisa iyada oo ay Nabiga u hareen kaliya toban qof, arrinkaas oo sababay in ay gaalada ku qeyliyaan Muxammad waa la dilay….!! Muxammad waa la dilay….!! Markaas ayey iska tuurtay weelkii ay wax ku waraabinnaysay una soo dagtay goobta dagaalka iyadoo la moodo sida Gorgor ugaarsi ku jiro, Ummu Camaarah iyada oo ka sheekeynesay daqiiqadahaas xamaasada leh ayey tiri:

Waxaan baxay aroor hore anigoo u socday Uxud horayna waxaan u qaatay weel aan mujaahidiinta ku waraabiyo markuu oon qabto, waxaan u tagay Nabiga scw markaasna awoodda iyo guusha dhanka muslimiinta ayey soo jirtay, wax yar kadib ayaan arkay muslimiintii oo cidleeyay Nabiga, agtiisana ay kusoo hareen wax ka yar toban qofood, markaas ayaan u tagnay

aniga iyo ninkeyga iyo wiilkeyga, Nabiga waxaan ku difaacnay hubkii ay heysanay oo dhan, markaas Nabiga ayaa i arkay aniga oo aan heysan wax gaashaan ah oo aan isku ilaaliyo haddane wuxuu arkay nin sii cararaayo markaas ayuu ku yiri U tuur gaashaanka qofka dagaalamaayo gaashaanka ayaan qaatay Nabiga ayaana ku ilaalinayay… wiilkeeda wuxuu halgan ugu jiray siduu Nabiga uga difaaci lahaa gaalada isagoo sidaas ah ayaa waxaa seef ku dhuftay nin gaal ah heer ay gacanta go'i rabtay, Markaasna dhiig daran ayaa ka yimid kadibna dhaawicii ayey ka duubtay waxa ay ku tiri Istaag wiilkeyga oo seeftaada ku garaac gaalada Nabiga ayaa fiiriyay markaas wuxuuna ku yiri Yaa awoodi karo waxaad awooday Umu Camaarey markaasna waxaa yimid ninkii wiilkeeda dhaawacay Nabiga ayaa dhahay Waa kan ninkii wiilkaada dhaawacay markaas ayey si dagdag ah ugu booday seef ayey lugta uga dhuftay markii uu dhulka ku dhacay, sidii ay u garaaceysay ayey ayey dishay, Nabiga ayaa isagoo dhoolacadeynayo yiri -waad ka cad goosatay Ummu Camaarey, waxaana mahad leh Allihii kaaga guuleeyay, Aargoosigaadana waxaan ka arkaa indhahaaga-

Ummu Camaarah Wiilasheeda kama aysan yareyn xagga geesinnimada iyo naf hurnimada, Wiilkeeda Cabdullaahi oo ka sheekeynayo arrinka ayaa dhahay Maalinkii Uxud Nabiga scw ayaan u raacnay dagaalka, markii ay ka tageen dadkii ayaa aniga iyo hooyadeey

usoo dhawaanay Nabiga scw inagoo difaaceynay, Nabiga isaga oo meelaha fiirinaayo ayuu arkay dhawaac Ummu Camaara qoorta uga yaalay oo dhiigayo, markaas ayuu igu yiri -Hooyadaa….!! Hooyadaa….!! - Hooyadeey ayaa markaas soo fiirisay Nabiga waxa ayna ku tiri Noogu duceey inaan jannada saaxiib kugula noqonno Rasuulkii Alloow -Markaas ayuu Nabiga ugu duceeyay- Hooyadeey ayaa markaas tiri Uma jixin jixaayo markaan kadib wax walboo adduunka igula dhaco.

MAALINKII YAMAAMA;

Qisadeeda waxa ay kasoo bilaabaneysaa sidaan, Nabiga scw ayaa farriin u diray Musaylama oo ah Ninkii sheegtay Nabinnimada, farriintana waxa uu ugu dhiibay wiilka ay dhashay Ummu Camaara oo ah Xabiib Binu Zayd, markaasna Musaylama ayaa qiyaanay Xabiib si xun ayuu u dilay Xubin xubin ayuu u jarjaray isaga oo leh ma qireysaa inaan ahay Rasuulka Alle, Xabiib Binu Zayd isagana wuxuu lahaa ma maqlo waxa aad sheegeyso, Ummu Cammaarah markii loo sheegay dhimashada wiilkeeda ayey tiri mawqifkaan oo kale ayaan u diyaariyay Alle ayaan uga ajir xisaabsanayaa.

Xilligii Abuubakar uu khaliifka ahaa ayaa la iclaamiyay jihaad ka dhan ninka sheegtay Nabinnimada oo ah Musaylama, ciidankii markaas baxay waxaa kamid ah Ummu Cammaarah iyo wiilkeeda geesiga ah

Cabdullaahi Binu Zayd, Markii uu bilawday dagaalka Musaylama Dilkiisa waxaa rabay Muslimiin badan haba ugu horeyso Ummu Cammaarah oo rabtay in ay wiilkeeda uga aargudo, balse Ummu Cammaarah jaanis uma aysan helin dilkiisa maadama gacanteeda la jaray, laakiin Washe Binu Xarbi iyo Abuu Dujjaana ayaa seef iyo waran nafta uga qaaday.

Ummu Cammaarah waxa ay u laabatay magaalada Madiina iyadoo hal gacan la' rabbina ka ajir xisaabsaneyso, Alle haka raali noqdo waxa ay tusaale u tahay dumarka qiimaha badan ee muslimiinta ah.

RAMLA BINTU ABII SUFYAAN

Rasuulka Alle scw ayaa iga dalbaday inaan u guuriyo Ummu Xabiiba Ramla Bintu Abii Sufyaan anigana dalabkiisa waan ka aqbalay waxaana meher uga dhigay aniga oo asiga wakiil ka ah 400 oo diinaar oo dahab ah

- Boqor Najaashi

**

Abuu Sufyaan oo aabaheed ahaa waligiis kuma uusan fikirin in uu soo bixi doonno qof amarkiisa ka hor yimaado, sababtoo ah wuxuu ahaa hoggaamiye Qureysheed oo amarkiisa la qaato, balse arrinkaas waxaa been ka dhigay gabadhiisa Ramla markii ay raacday Nabiga suuban scw kuna kufrisay sanamyadii uu caabudi jiray Abuu Sufyaan, Ramla iyo ninkeeda Cubeydillaahi Binu Jaxshi waxa ay qaaten diinta Nabi Muxammad scw.

Abuu Sufyaan isaga oo isticmaalayo awooddiisa dhan ayuu isku dayay gabadhiisa iyo ninkeedaba in uu kusoo celiyo diinta aabayaashiis ee sanamka adoomaha loo noqonnaayo, balse kuma uusan guuleysan sababtoo ah iimaanka xooggan ee Ramla iyo ninkeeda ayaa ka awood badnaa wax walba uu wato Abuu Sufyaan.

Abuu Sufyaan waxaa wehel u noqday walwal iyo murug maadama ay gabadhiisa Nabi Muxammad rumeysay, ma uusan aqoon waji uu ku hor tago Qureysh, maadaama ay gabadhiisa iska diiday gaalnimadii uu la rabay, ayna ka raacday Nabiga scw, Qureysh markii ay ogaatay Abuu Sufyaan in uu u careysan yahay Ramla iyo ninkeeda ayey ku dhiirratay in ay ku ciriiriyaan nolosha, heer ay Ramla iyo ninkeedaba u dulqaadan waayeen dhibka Qureysh.

Markii Nabiga scw uu u fasaxay muslimiinta in ay u hijroodaan dhulka xabasha Ramla iyo gabadheeda yar ee Xabiiba iyo ninkeeda Cubeydillaah waxa ay ku jireen dadkii ugu horeeyay ee hijrooday iyaga oo diintooda baxsad la ahaa, balse Abuu Sufyaan iyo dadkiisaba waxa ay go'aansadeen muslimiintaas hijrooday in aysan marna ka baxsan oo aysan dhadhamin macaanka dhulka xabashida, Boqor Najaashi ayey udirsadeen farriinsideyaal iyaga oo ka dalbanaayo in gacanta loo soo galiyo muslimiintaas wadankiisa usoo hijrooday, Farriinsideyaashii waxa ay isku dayeen in ay Najaashi ku

diraan muslimiinta iyaga oo kasoo maray dhinaca Nabi Ciise iyo hooyadiis maadaama uu isaga masiixi ahaa, Najaashi ayaa markaas weydiiyay muslimiinta, xaqiiqda diintooda iyo waxa ay ka aaminsa yihiin Ciise iyo hooyadiis sidoo kale wuxuu ka dalbaday in ay ku aqriyaan qaar kamid ah qur'aanka lagusoo dajiyay Nabigooda.

Markii ay muslimiinta usheegeen xaqiiqada diintooda kuna aqriyeen aayado qur'aan ah, ayuu Najaashi iska ooyay wuxuu yiri Wallaahi midkaan lagusoo dajiyay Nabigiina Muxammad ah, waa kii uu la yimid Ciise, waxa ay kasoo wada baxayaan hal meel kadib islaamka ayuu qaatay Nabigana wuu rumeeyay sidoo kale wuxuu shaaciyay in uu ilaalin doonno qof walba oo muslim ah oo usoo hijrooda dhulkiisa inkasta oo aysan islaamin hoggaamiyeyaashiisa kale.

Ramla markaas waxa ay maleysay waqtigii dhibka iyo rafaadka in uu soo dhammaaday maadaama ay tageen dhul nabad ah iyadoo aan ogeyn wuxuu qadarka u qarrinaayo, Alle SWT ayaa doonnay in uu imtixaamo Ramla imtixaan adag, imtixaankas kadibna waxaa loo diyaariyay guul iyo farxad aysan waligeed arkin, habeen habeenada kamid ah ayey ku riyootay riyo xun, riyadaas fasirkeeda inta aysan helin ayaa waxaa diinta islaamka ka laabtay ninkeeda Cubeydillaah oo noqday masiixi,

iyadana wuxuu kala dooran siiyay laba arrin oo kala daran.

- In uu furo
- In ay masiixiyad noqoto

Ramla nafteeda ayaa markaas usoo bandhigtay Ssddex khiyaar oo kala ah;

1. In ay qaadato diinta ninkeeda sidaasna ay masiixiyad ku noqoto diinta islaamkana uga baxdo markaasna ay adduun iyo aaqiraba ku hoogto taasna ma ahan ma dhaceyso.
2. In ay u laabato guriga aabaheed oo asagana markaas gaalnimadiisa ku taagna agtiisana ay ku noolaato iyadoo duleysan.
3. In ay iska joogto dhulka xabashida iyadoo kaligeed.

Ramla Alle iyo rasuulkiisa ayey waxwalba ka dooratay, waxa ay go'aansatay in ay joogto dhulka xabasha iyada oo kaligeed ah.

Ramla Bintu Abii Sufyaan markii ay dhammeysatay cidada furriinka ayaa waxaa Albaabka usoo garaacay farxadii ay rabbigeed ka sugeysay, waxaa u timid farxad aysan balan hore la laheyn, waxaa albaabka usoo garaacday adeegtada qaaska ah ee boqor Najaashi, si

dagan ayey u salaantay iyadoo ka dalbatay in ay gudaha soo gasho waxa ayna ku tiri Boqorka ayaa kusoo salaamayo wuxuuna ku leeyahay Rasuulka Alle scw ayaa kusoo doontay, Wuxuu isoo diray farriin wuxuuna iiwakiishay inaan adiga kugu mehriyo ee adigana wakiilo qofka aad rabto Ramla waxa ay ku dhawaatay farxad in ay la duusho markaas ayey adeegtadii abaalmarrin ahaan usiisay waxyaabihii ay isku qurxin jirtay, waxa ayna ku tiri Waxaan wakiishay Khaalid Binu Saciid Binu Caas isaga ayaa dadka iigu dhaw.

Qasriga Najaashi ee quruxda badnaa wax walba oo qurxoonna lagu qurxiyay ayaa lagu mehriyay Ramla, Waxaa kasoo qeyb galay meherkeeda saxaabadii joogtay dhulka Xabasha haba ugu horeeyan Jacfar Binu Abii Daalib, Khaalid Binu Saciid Binu Caas iyo Cabdullaahi Binu Xudaafa waxaa khudbad kooban jeediyay Najaashi wuxuu yiri Rasuulka Alle scw ayaa iga dalbaday inaan u guuriyo Ummu Xabiiba Ramla Bintu Abii Sufyaan anigana dalabkiisa waan ka aqbalay waxaana meher uga dhigay aniga oo asiga wakiil ka ah 400 oo diinaar oo dahab ah markaasna dahabka wuxuu gacanta ka saaray Khaalid Binu Saciid kadibna Khaalid ayaa kalimad kale jeediyay.

Markii uu dhammaaday guurka dadkii ayaa isku dayay in ay baxaan, balse Najaashi ayaa ku yiri fariista, Anbiyada haddii ay guursadaan dadka ayey quudiyaan.

Ramla markii loo geeyay meherkeeda ayey qeyb udirtay adeegtadii Boqorka oo markii hore ugu bishaareysay farxaddaan balse waxyar kadib waxaa timid adeegtadii iyadoo soo celisay wixii ay ka qaadatay oo dhan waxa ayna tiri Boqorka ayaa amray inaan waxba lagaa qaadan, dumarkana wuxuu amray in ay kuu keennaan wax walba oo carfaayo Markii ay u keentay waxyaabihii carfaayay ayey ku tiri Dan ayaan kaa leeyahay… Ramla waxa ay tiri Maxaa waaye…. Adeegtadii waxa ay tiri Waan islaamay diinta Nabi Muxammadna waan raacay ee Nabiga iga gaarsii salaam una sheeg inaan rumeeyay Alle iyo rasuulkiisa hana iloobin.

Ramla markii ay u tagtay Nabiga scw una sheegtay sida uu ku dhacay meherkeeda ayey waxa ay usheegtay Qisada Adeegtadii iyo in ay soo salaameysay, Nabiga suuban scw aad ayuu ugu farxay salaantana wuu ka qaaday.

ASMAA BINTU ABII BAKAR SIDIIQ

Ma arkin laba dumar ah wax ka deeqsinnimo badan Habaryarteey Caa'isha iyo hooyadeey Asmaa……

- Cabdullaahi Binu Zubeyr

**

Saxaabiyad sharaf walba kulansatay, Aabaheed waa saxaabi, awoowgeed waa saxaabi, walaasheed waa saxaabiyad, ninkeeda waa Saxaabi, wiilkeedana waa saxaabi.

Aabaheed waa Abuubakar Sidiiq Rc, Awoowgeed waa Abuu Quxaafa Abuubakar aabihiis, walaasheed waa Caa'isha Mu'miniinta dhan hooyadood, ninkeeda waa Zubeyr Binu Cawaam, wiilkeedana waa Cabdullaahi Binu Zubeyr, sharaf waxaa ugu filan in la dhaho gabadha uu dhalay Abuubakar Sidiiq Rc.

Waxa ay kamid aheyd dadkii islaamnimada xilli hore soo galay kaliya waxaa ka horeeyay 17 qof, Waxaa guursaday Zubeyr Binu Cawaam oo markaas ahaa wiil dhallinyar oo faqiir aan heysan wax hanti ah iyo adeege u adeegaba kaliya wuxuu heystay faras uu iibsaday, Waxa ayna u noqotay xaas wanaagsan wey u adeegi jirtay faraskana wey u dhaqaaleyn jirtay garab ayey u noqotay heer uu noqday saxaabada kuwooda ugu hodansan, markii ay muslimiinta u hijroonayeen Madiina iyaga oo diintooda baxsad la ah Asmaa waxa ay aheyd xaamilo bilaheedana wey dhammeeysatay balse arrinkaas uma diidin in ay hijrooto oo ay u dulqaadato dhibka safarka markii ay tageen Qubaa ayey waxa ay dhashay wiilkeeda Cabdullaahi Binu Zubeyr oo noqday cunugii ugu horeeyay ee u dhashay muhaajiriinta usoo hijrooday Madiina, Nabiga scw ayey dhabta u saartay markaas Nabigana candhuuftiisa ayuu afka u mariyay wiilka wuuna u duceeyay, wiilkaas calooshiisa wixii ugu horeeyay ee gala wuxuu ahaa Candhuufta Suubanaha scw.

Asmaa waxaa u kulmay tilmaamaha kheyrka iyo wanaaga iyo caqli badnaanta deeqsinnimadana waxa ay u aheyd tilmaan, wiilkeeda Cabdullaahi oo ka sheekeynayo ayaa dhahay Ma arkin laba dumar ah wax ka deeqsinnimo badan Habaryarteey Caa'isha iyo hooyadeey Asmaa, laakiin deeqsinnimadooda ayaa kala duwaneyd, Habaryarteey wax ayey isku dari jirtay

markaas ayey uqeybin jirtay dadka u baahan, balse hooyadeey Waxba ma keydsan jirin.

Caqli badnaanteeda waxaa cadeyn kuugu filan, Aabaheed Abuubakar markii uu hijrada usoo raacay Nabiga wuxuu horay usoo qaatay hantidiisa oo dhan, ciyaalkiisana waxba ugama uusan soo tagin, Abuu Quxaafa oo Abuubakar aabihiis ahaa oo aan markaas islaamin ayaa wuxuu ogaaday hijrada wiilkiisa kadib wuxuu u yimid Asmaa isaga oo rabay in uu ogaado in hanti looga tagay iyo inkale, balse Asmaa ayaa usheegtay in uu aabaheed uga tagay hanti badan iyada oo aruurisay dhagaxaan yaryar waxa ayna saartay meel ay lacagta dhigan jireen korkana waxa ay ka saartay dhar kadib ayey gacanta awoowgeed inta qaaday ayey kor saartay maadaama uu indhoole ahaa waxa ayna ku tiri Arag wuxuu nooga tagay hanti badan duqiina wuxuu yiri waa arrin wanaagsan markaas sidaas waxa ay u sameysay duqa in ay dajiso oo uusan is dhibin mana aysan jecleyn in ay qabato gacanta nin gaal ah xitaa haddii uu awoowgeed yahay.

Wiilkeeda Cabdullaahi Binu Zubeyr ayaa maalin u yimid isaga oo kala tashanaayay arrinka Xajaaj iyo in asxaabtiisa ay ka tageen, Xajaaj Binu Yuusuf isagana uu soo galaayo magaalada Makka uuna dili doonno, Waxa ay tiri Wiilkeygiyoow haddii aad xaq ku sugan tahay, xaqa aad ku sugan tahay ku sugnaaw, waad ogtahay

waxaa la dilay dadkii diinta u adeegaayay oo amniga diinta ka shaqeynaayay, xaqa ku sugnaaw si kasta oo ay natiijada noqoto… Wuxuu yiri isagana Hooyo laakiin markaan dhinto jirkeyga ayey xumeyn doonnaan markaas ayey tiri hadal cajiib ah Ariga waxba kama dhibaayo maqaar siibka marba haddii la gawraco Cabdullaahi markaas ayuu baxay Alle dartiina wuu u shahiiday.

GUNAANAD

Waxaan kaaga mahadcelinayaa Aqrintaada qiimaha badan iyo sida aad waqtigaaga qiimaha badan ugu bixisay aqrinta buuggan yar ee aan haddiyada kaaga dhigay waxaana rajeynayaa inaad wax uun ka faa'iiday haba yaraadane.

Alle fadligiis Buuggaan waxaan dhammeeyay maalintu ay taariikhdu ku beegneyd (13ka Maarso 2022) Aniga oo qoraalkiisa soo bilaabay (20 bisha Maarso 2021).

Waxaa laga yaaba intii aan buuggaan qoraaya in qalad sameeyay sidaas darted waxa aan kaa codsanayaa haddii aad qalad ku aragto inaad sida ugu fudud aad ii lasoo xiriiriso si aan u saxo.

Social Media

Mohammed Bin Farah
Fahamka Nolosha
252(0) 615243549

MAXAAD IS LEEDAHAY WAAD KA FAAIIDAY BUUGGAAN?

1. ……..
2. ……..
3. ……..
4. ……..
5. ……..
6. ……..
7. ……..
8. ……..
9. ……..
10. ……..
11. ……..
12. ……..
13. ……..
14. ……..
15. ……..
16. ……..
17. ……..
18. ……..
19. ……..
20. ……..

DHAMMAAD

GEESIYAAL

TAARIIKHDA GALAY

Taariikhda waa muraayadda wixii tagay, Ummadd aan taariikhdeeda war u heynina mustaqbalka waxba kama qaban karto, Taariikhda aynu ka hadleyno ugama hadleyno kaliya inaan waqtiga isku dhaafino ama aan caruurteena ku seexino ee waxaa nalooga baahan yahay ineynu ku bedalno waaqica aynu ku noolnahay, Aabayaashenii hore waxaa soo maray caqabado badan oo lamid ah amaba ka badan kuwa ina heysta maanta Anagana waxaa nalaga rabaa ineynu ka barano qaabka ay u xaliyeen dhibaatadaas.

****